GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LA-SOCODKA HIRGELINTA DASTUURKA

# SOOJEEDINTA

## WAX-KABEDDELKA CUTUBYADA 5AAD, 6AAD, 7AAD, 8AAD IYO 9AAD EE DASTUURKA KMG AH.


**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)

**ANSIXIYEY:**
GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LA-SOCODKA HIRGELINTA DASTUURKA



JANNAAYO 2026

# ARAR

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD) wuxuu diyaariyay soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 5aad, 6aad, 7aad, 8aad iyo 9aad ee asalka Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Warbixintan waxay ka koobantahay saddex qaybood oo kala ah:

(a) Dastuurkii asalka ahaa oo ku qoran dhanka bidix;
(b) Soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka uu soo diyaariyay GMDHD oo ku qoran dhanka dhexda; iyo
(c) Faallo tilmaamaysa is-beddellada la soojeediyay iyo sababaha loo cuskaday, oo ku qoran dhanka midig.

| Asalka Dastuurka KMG ah | Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD uuna ansixiyay Guddiga Lasocodka ee BFS | Faallo |
|---|---|---|

GMDHD wuxuu diyaariyay warbixin mug leh oo faahfaahsan wadatana cilmibaarisyo islamarkaasna bixinaysa tusaalooyin dalal kale haddii loo baahdo.

# CUTUBKA SHANAAD:
# NIDAAMKA FEDERAALKA IYO BAAHSANAANTA AWOODDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA

Cutubka shanaad wuxuu ka koobanyahay toban iyo sagaal qodob (19), oo ka bilaabanaya Qodobka 61aad ilaa 79aad, waxaana lagu soo kordhiyay toban iyo afar (14) qodob. Halka asalka Dastuurka oo ka koobnaa toddoba (7) qodob, waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyay soddon iyo afar (34) faqradood, oo cusub oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Waxaa la tiray laba (2) qodob oo kala ah Qodobka 53aad & Qodobka 54aad iyo afar (4) faqradood oo ku jiray asalkii Dastuurka.

Cutubkan waxaa lagu soo kordhiyay axkaam ay ka mid yihiin:

- Maqaamka Caasimadda;
- Dastuurrada Dawlad Goboleedyada;
- Goleyaasha Dawlad Goboleedyada;
- Fulinta Dawlad Goboleedyada;
- Awoodaha Heerarka kala duwan ee Dawladda;
- Awoodaha u gaarka ah Dawladda Federaalka;
- Awoodaha u gaarka ah Dawlad Goboleedyada;
- Awoodaha u gaarka ah Dawladaha Hoose;
- Awoodaha Wadaagga ah;
- Awoodaha Haraagga ah;
- Erginta Awoodaha; iyo
- Dhexgalka Dawladda Federaalka.

Cutubkan waxaa lagu saleeyay latashiyada bulshada, hay'adaha dawladda, cilmibaarisyo iyo sidoo kale heshiiska Astaynta Awoodaha.

| CUTUBKA SHANAAD:<br>NIDAAMKA FEDERAALKA IYO BAAHSANAANTA AWOODDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA | | |
|---|---|---|
| **Asalka Dastuurka KMG** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD** | **Faallo** |
| **Cutubka Shanaad: Baahsanaanta Awoodda Xukuumadaha ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Cutubka Shanaad: Nidaamka Federaalka iyo Baahsanaanta Awoodda Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | Cinwaanka cutubka 5aad waxaa lagu soo kordhiyay *"Nidaamka Federaalka iyo"*. |
| **Madaxa Koowaad: Qaab Dhismeedka Iyo Mabaadiida Wadashaqeynta Heerarka Xukuumadaha.** | **Madaxa Koowaad: Qaabdhismeedka Dawladda** | Madaxan waxaa loo kala saaray laba qaybood: Madaxa 1aad oo laga dhigay *"Qaabdhismeedka Dawladda"* iyo Madaxa 2aad oo noqday *"Iskaashiga Heerarka Dawladda"*. |
| **Qodobka 48aad: Qaab-dhismeedka Dawladda** | **Qodobka 61aad: Heerarka Dawladda** | Cinwaanka Qodobka 61aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 48aad, magaca cinwaanka oo ahaa *"Qaabdhismeedka Dawladda"* waxaa laga dhigay *"Heerarka Dawladda"*. |
| (1) Qaab-dhismeedka Dawladda ee Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu ka kooban yahay 2 heer Dawladeed:<br>(a) Heerka Xukuumaddu Federaalka<br>(b) Heerka Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxaa ka kooban tahay Xukuumaddu ka tirsan Dawladaha Federaalka iyo Dawladaha Hoose. | (1) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ka koobantahay saddex (3) heer dawladeed oo kala ah:<br>(a) Dawladda Federaalka;<br>(b) Dawlad Goboleedyada; iyo<br>(c) Dawladaha Hoose. | Faqraddan waxaa lagu sameeyay siiqayn. Heerarka dawladdana waxaa laga dhigay saddex, halka markii hore ay ahaayeen laba qaybood. Dawladaha hoose oo ku hoos jirey Dawlad Goboleedyada ayaa noqday heer dawladeed oo gooni ah. Xarfaha (a) iyo (b) dib u siiqayn ayaa lagu sameeyay, |

| | | |
|---|---|---|
| | | waxaa lagu soo kordhiyay xarafka (c). |
| (2) Gobol goonni isu taagi karaa ma jiri karo, inta uu Gobol kale uu kuu biirayo, Xukuumaddu Federaalka Soomaaliya ayaana maamulaysa waxaana waajib ku ah gobolkaas inuu ku biiro gobol kale ama Dawlad xubin ka ah Dawladda Federaalka muddo labo sano gudahood ah. | | Faqradda 2aad ee asalka Dastuurka waxaa loo raray oo lagu nidaamiyay Qodobka 62aad faqradaha 5aad iyo 6aad ee wax-kabeddelka Dastuurka. |
| | (2) Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay waajibaadkeeda u gudanaysaa si waafaqsan Dastuurka Federaalka, halka ay Dawlad Goboleedyadu u gudanayaan si waafaqsan Dastuurka Federaalka, Dastuurka Dawlad Goboleedka iyo xeerarka kale ee dalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Dawladda Federaalka ay waajibaadkeeda u gudanayso si waafaqsan Dastuurka Federaalka, halka Dawlad Goboleedyada ay u gudanayaan si waafaqsan Dastuurka Federaalka, Dawlad Goboleedka iyo xeerarka kale ee dalka. |
| **Qodobka 49aad: Tirada iyo Xudduudaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyo Degmooyinka** | **Qodobka 62aad: Dhismaha Dawlad Goboleedyada iyo Soohdimahooda** | Cinwaanka Qodobka 62aad oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 49aad waxaa laga dhigay *"Dhismaha Dawlad Goboleedyada iyo Soohdimahooda".* |
| | (1) Waxaa jiraya Dawlad Goboleedyada ku dhisma si waafaqsan axkaamta qodobkan. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay qeexaysa Dawlad Goboleedyada ku dhisma si waafaqsan Dastuurka |
| (1) Tirada iyo xuduudaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka cusub waxaa go'aaminaya Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka. | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeeda waxaa lagu daray isla qodobkan faqradihiisa. |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka, inta aanu goyn tirada iyo xudduudaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, wuxuu magacaabayaa guddi heer qaran ah oo daraasad ka sameeya, warbixin ay la socdaan talooyinka u bandhiga Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka. | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeeda waxaa lagu daray qodobka 55aad ee Cutubka 4aad oo Baarlamaanka Federaalku ansixiyey. |
| | (2) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa go'aan ka gaaraya oggolaanshaha dhismaha Dawlad Goboleedka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqraddan waxaa laga soo raray Qodobka 49aad faqradda 4aad ee asalka Dastuurka, waxaana lagu sameeyay dib-u-siiqayn. Golaha Aqalka Sare ayaa go'aan ka gaaraya dhismaha Dawlad Goboleedka, maaddaama uu matalo Dawlad Goboleedyada. |
| (3) Magacaabidda guddigu lagu xusay faqradda 2 ee kore waa inuu ka horreeyo sharci Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka uu ansixyo oo qeexaya:<br>(a) Xilalka iyo awoodaha Guddiga;<br>(b) Hal-beegyada uu u cuskanayo samaynta Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyo shuruudaha qayb dalka ka mid ihi ku mutaysan karto inay ka mid noqoto Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka;<br>(c) Tirada xubnaha guddiga, shuruudaha xubinnimada iyo siyaabaha lagu magacaabayo xubnaha guddiga, muddada xilhayntood, xuquuqdooda; | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeeda waxaa lagu daray qodobka 56aad ee Cutubka 4aad. |

| | | |
|---|---|---|
| (4) Tirada iyo xuduudaha degmooyinka Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxaa goynaya sharci uu soo saaro Baarlamaanka Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, Golaha Shacabka ee Federaalkuna oggolaado. | | Faqraddan Nuxurkeeda waxaa lagu daray soojeedinta faqradda 2aad ee isla qodobkan. |
| | (3) Marka ay dhismaan Dawlad Goboleedyada waxaa wax-kabeddel lagu samayn karaa oo keliya marka ay heshiis ku wada gaaraan dhinacyda Dawlad Goboleeyada ay khuseyso. Haddii ay heshiin waayaan waxaa khilaafkooda lagu xallinayaa habraac maxkamadeed waxaana go'aan ka gaaraya Maxkamadda Dastuurka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay nidaaminaysaa habraaca la marayo haddii uu ku yimaado wax-kabeddel dhismaha Dawlad Goboleedka iyo habka loo xallinayo khilaafka yimaada. |
| (5) Xuduudaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalku waxay ku salaysnaan doonaan xuduudihii gobollada ee jirey 1991-kii. | (4) Soohdimaha Dawlad Goboleed kasta oo cusub waxay ku salaysnaan doonaan soohdimihii gobollada dalka sidii ay u jireen 1991-kii. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, keliya siiqdeeda ayaa la hagaajiyey. Ereyga "xudduudaha" waxaa lagu beddelay "soohdimaha". |
| (6) Ugu yaraan laba gobol iyo ka badan ayaa ku midoobi kara Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyaga xor u ah go'aankooda. | (5) Dawlad Goboleed waxaa ku midoobi kara laba, saddex ama afar gobol oo deris ah ayagoo xor u ah go'aankooda. | Faqradda 5aad ee soojeedinta oo asalka Dastuurka ahayd farqadda 6aad waxaa loo dhigay in dawlad goboleed ay ku midoobi karaan laba, saddex ama afar gobol oo deris ah ayagoo xor u ah go'aankooda. |
| | (6) Gobol gooni isu taagi kara dawlad goboleed ahaan ma jiro, Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa maamulaysa gobolkaas inta uu ku biirayo gobol ama dawlad goboleed kale. | Faqraddan waxaa laga soo raray Qodobka 48(2) ee asalka Dastuurka, ayadoo lagu sameeyey dib-usiiqayn, waxayna xeerinaysaa in aan la oggoleyn in gobol gooni isu taago, ayadoo |

| | | |
|---|---|---|
| | | XFS ay maamulayso inta uu ku biirayo gobol ama dawlad goboleeed kale, waxaa la tiray ereyga "muddo labo sano ah". |
| | **Qodobka 63aad: Maqaamka Caasimadda** | **Qodob cusub:** |
| | Maqaamka Caasimadda Soomaaliya wuxuu Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka ka diyaariyay cilmibaaris dheer oo ku saabsan maqaamka caasimadaha dalalka ku dhaqma nidaamka federaalka ah. Guddigu wuxuu soojeedinayaa labada xulasho ee loo arko in ay ku habboon yihiin Soomaaliya kuwaas ay Xildhibaannada Baarlamaanka kala xulan karaan.<br><br>**Xulashada 1aad: Gobol Caasimad ah oo Hoosyimaadda Dawladda Federaalka**<br><br>(1) Magaalamadaxdu waxay noqoneysaa Gobol magaalamadax u ah Dawladda Federaalka.<br>(2) Gobolka magaalamadaxda federaalku kama mid noqon karo qayb ka mid ah dawlad goboleed.<br>(3) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa in uu soo saaro xeer gaar ah oo nidaamiya is xukun dimuqaraaddi ah, oo lagu maamulo Gobolka Magaalamadaxda Federaalka.<br>(4) Xeerka doorashooyinka federaalku waa in uu siiyaa muwaaddiniinta deggan Magaalamadaxda, xaq ay ku dooran karaan wakiillo u matala Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waana in aysan matalaaddaas ku waayin degganaanshada ay deggan yihiin Magaalamadaxda Dawlada Federaalka awgeed. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddani waxay uu ku salaysan tahay Qodobka 9(2) ee wax-kabeddelka Dastuurka oo baarlamaanku ansixiyay, xeerinaysana in maqaamka magaalamadaxda lagu nidaaminayo Cutubka 5aad ee wax-kabeddelka Dastuurka.<br><br>Qodobkan waxaa lagu soo bandhigay laba xulasho oo laga diyaariyay maqaamka Caasimadda Soomaaliya.<br><br>Xulashada koowaad waa Gobol Caasimad ah oo hoos imaanaysa Dawladda Federaalka.<br><br>***Xulashada labaad waa caasimad Dawlad Goboleed ah.***<br><br>Si Muqdisho u hesho maqaam iyo matalaad, waxaa muhiim ah in jawaab loo helo su'aalaha hoose: |

| | | |
|---|---|---|
| | **Xulashada 2aad: Caasimad Dawlad Goboleed ah**<br><br>(1) Magaalamadaxda Federaalku waxay noqonaysaa dawlad goboleed; leh maqaam iyo xuquuq la mid ah kuwa Dawlad Goboleedyada.<br>(2) Magaalamadaxda Federaalku kuma biiri karto gobol kale ma noqon karto qayb dawlad goboleed kale ku dhul ballaarsato.<br>(3) Xukuumadda Dawlad Goboleedka ee Magaalamadaxda Federaalka iyo Xukuumadda Federaalku waa in ay dhowraan mabaadii'da xiriirka iskaashiga ee ku xusan Dastuurkan. Waa in ay si gaar ah ugu heshiiyaan arrimaha canshuuraha iyo xeerarka kale ee nidaaminaya dhulalka iyo dhismooyinka ay leedahay ama ay deggan tahay Xukuumadda Federaalku ee ku dhexyaal Magaalamadaxda. | (1) Maamulka caasimadda uu noqonayo?<br>(2) Goleyaasha ay yeelanayso caasimadda?<br>(3) Muxuu noqonayaa xiriirka caasimadda iyo xukuumadda Dawladda Federaalka?<br>(4) Matalaadda caasimadda ee goleyaasha dawladda? |
| | **Madaxa Labaad: Iskaashiga Heerarka Dawladda** | **Madax cusub:**<br>Madaxan wuxuu markii hore raacsanaa madaxa koowaad ee cutubkan. |
| **Qodobka 50aad: Mabaadii'da Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Qodobka 64aad: Mabaadii'da Federaalka** | Cinwaanka qodobkan oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 50aad waxaa laga dhigay Qodobka 64aad. Sidoo kale waxaa la tiray "ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". |
| (1) Heerarka kale duwan ee Xukuumaduhu marka ay dhexdooda ka macaamilayaan iyo marka ay ku gudo-jiraan adeegsiga awoodda sharci-dejinta | (1) Dhammaan heerarka kala duwan ee Dawladda waa in ay dhawraan una hoggaansamaan mabaadi'da federaalka ee soo socda: | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo hagaajin. |

| | | |
|---|---|---|
| iyo awoodaha kaleba, waa in ay ilaaliyaan mabaadi'da Federaalnimada; kuwaas oo ah:<br>(a) Heer kasta oo xukuumadeed waa in ay haysato kalsoonida iyo taageerada dadweynaha;<br>(b) Awood walba waa in la siiyo hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta;<br>(c) Jiritaanka iyo joogtaynta xiriirro iskaashi iyo istaageerid labo-dhinacle ah oo ka dhexeeya Dawladaha xubnaha ka ah federaalka dhexdooda iyo dawladaha xubnaha ah iyo Xukuumadda Federaalka ah<br>(d) Si uu u jiro dareen midnimo qaran, degaan kasta oo ka mid ah Jamhuuriyaddu Federaalka ah ee Soomaaliya waa inuu helaa adeegyo iyo waxqabad xukuumadeed oo isku mid ah;<br>(e) Khayraadka dalka oo si caddaalad ah loo qaybsado;<br>(f) Dakhli-ururinta oo loo xilsaaro hadba heer xukuumadeedka sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta;<br>(g) Khilaafaadka oo wadahadal iyo dib-u-heshiin lagu xalliyo. | (a) In awoodda dawladdu baahsantahay, una qaybsantahay dhammaan heerarka kala duwan ee Dawladda.<br>(b) In muwaaddin walba, meel kasta uu ka joogo dalka iyo deegaan kasta, helo xuquuq, adeegyo iyo waxqabad dawladeed oo isku mid ah oo ku dhisan xaqsoor.<br>(c) In heer kasta oo dawladeed uu helo kalsoonida iyo taageerada shacabka;<br>(d) In uu jiro xiriir iskaashi iyo wada shaqeyn joogta ah oo u dhaxeysa Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada iyo sidoo kale Dawlad Goboleedyada dhexdooda, ayada oo la ilaalinayo midnimada masiiriga ah ee qaranka.<br>(e) In mas'uuliyadda fulinta adeegyada loo dhiibo hadba heerka dawladeed ee awood ku filan u leh, sida ugu wax-ku-oolsanna u fulin kara, uguna dhow muwaaddinka adeegga loo qabanaayo;<br>(f) In heerarka kala duwan ee dawladda ay si caddaalad ah u wadaagayaan una qeybsanayaan kheyraadka iyo dakhliga dalka; iyo<br>(g) In khilaaf kasta, oo ka dhex dhasha Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada ama Dawlad Goboleedyada dhexdooda lagu xalliyo wada xaajood. Haddii lagu guulaysan waayana waxaa loo gudbinayaa Golaha Aqalka Sare si uu go'aan uga gaaro. | Waxaa kale oo lagu soo kordhiyay mabaa'di cusub.<br><br>***Xarafka (a)*** ee faqraddan waa mid cusub oo tilmaamaya mabda'a in awoodda dawladdu u baahsantahay una qaybsantahay heerarka dawladda.<br><br>***Xarafka (b)*** ee faqraddan oo xarafka (d) asalka Dastuurka ahaa nuxurkeeda waxba lagama beddelin, laakiin waxaa lagu sameeyay siiqatoosin. Ereyga "xukuumadeed" waxaa lagu beddelay "dawladeed".<br><br>***Xarafka (c),*** oo asalka Dastuurka ahaa xarafka (a) nuxurkiisa waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqatoosin.<br><br>***Xarafka (∂),*** oo ahaa xarafka (c), oo tilmaamaya iskaashiga ka dhexaynaya Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedka iyo kan Dawlad Goboleedyada dhexdooda, nuxurka waxba lagama beddelin, ee waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn. |

| | | |
|---|---|---|
| | | ***Xarafka (e),*** oo ahaa xarafka (b) ee asalka Dastuurka nuxurka waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib u siiqayn.<br><br>***Xarafka (f)*** ee asalka Dastuurka waa la tiray, waxaana lagu xeerinayaa cutubka maaliyadda ee Dastuurka.<br><br>***Xarafka (g)*** nuxurkiisa waxaa lagu sameeyay siiqayn, waxaana lagu daray in aqalka sare uu leeyahay awoodda xallinta haddii khilaafka lagu xallin waayo wadaxaajood. |
| **Qodobka 51aad: Xiriirka Iskaashiga Heerarka Dawladaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Qodobka 65aad: Xiriirka Iskaashi ee u Dhexeeya Heerarka kala duwan ee Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | Cinwaanka Qodobka 65aad oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 51aad nuxurkiisa waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib u habayn. |
| | (1) Dhammaan heerarka dawladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay dhawraan, una hoggaansamaan Dastuurka Federaalka, iyaga oo aan isasiinayn awood ka baxsan midda uu Dastuurka Federaalka u asteeyay. | Faqraddan waxaa laga soo raray Qodobka 51aad, faqradda 4aad ee asalka Dastuurka, waxayna ku waajibineysaa heer kasta oo dawladeed in uu dhawro una hoggaansamo Dastuurka. |

| | | |
|---|---|---|
| (1) Heer kasta oo Xukuumadeed ha ahaadeen heerar siman ama kuwo kala sarreeya waa in ay yeeshaan xiriir iskaashi oo wanaagsan. | (2) Heer kasta oo dawladeed, ha ahaadeen heerar siman ama kuwo kala sarreeya, waa in ay yeeshaan xiriir iskaashi oo wanaagsan. | Faqradda 2aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin. Ereyga "xukuumadeed" waxaa lagu beddelay "dawladeed". |
| (2) Xukuumad kasta waa in ay ixtiraamtaa, ilaalisaana xadka awoodaha ay leedahay iyo awoodaha ay leeyihiin Dawladaha kale, waana in ay:<br>(a) La yeelatab xiriir walaaltinnimo oo wax-ku-ool ah heerarka kale ee Xukuumadaha, una horseedaa midnimada muwaaddiniinta;<br>(b) Heer kasta oo Xukuumadaha waa in ay ku wargelisaa heerarka kale siyaasadaha iyo hawlgallada ay ka fulineyso degaannadeeda oo saamayn ku yeelan kara degaannada heerarka kale;<br>(c) Yeeshaan siyaasado u adeegaya qorshaynta iyo hirgelinta mashaariic hormarineed oo wadajir ah. | (3) Heer kasta oo dawladeed waa in uu tixgaliyaa, ilaaliyaana xadka awoodaha loo asteeyay, iyo awoodaha ay leeyihiin heerarka kale ee dawladda, waana in uu:<br>(a) La yeeshaa heerarka kale ee dawladda xurmeyn iyo xiriir walaaltinimo oo waxku-ool ah, kana shaqeeyaa midnimada iyo wadajirka shacabka;<br>(b) Ku wargeliyaa hay'adaha kale siyaasadaha iyo hawlaha uu ka fulinayo deegaannadooda kuwaas oo saamayn ku yeelan kara degaannada heerarka kale; iyo<br>(c) Dejiyo siyaasado u adeegaya qorsheynta iyo hirgelinta mashaariicda horumarineed oo wadajir ah. | Faqradda 3aad oo asalka Dastuurka ahayd faqaradda 2aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib u habayn. Ereyga "xukuumad" waxaa lagu beddelay "dawlad" "midnimada muwaadiniinta" waxaa laga dhigay "wadajirka shacabka". |
| (3) Si loo xaqiijiyo jiritaanka iyo horumarinta xiriirada iskaashiga Federaaliga ah waa in la joogteeyo kulan sanadeed ay wada yeeshaan madaxda fulinta Xukuumadda Federaalka iyo Madaxda Fulinta Dawladaha xubinta ka ah Xukuumadda Federaalka si ay isula meeldhigaan:<br>(a) Adkaynta Midnimada Qaranka; | (4) Si loo xaqiijiyo jiritaanka iyo horumarinta xiriirka iskaashi ee Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada, waa in la joogteeyo wadashaqeyn wanaagsan si sare loogu qaado:<br>(a) Xoojinta midnimada qaranka;<br>(b) Amniga iyo nabadda;<br>(c) Horumarinta dhaqan-dhaqaale ee qaranka iyo siyaasadaha ganacsiga ee dalka; | Faqradda 4aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad waxaa lagu sameeyay dib u siiqayn, si loo waafajiyo heshiisyada siyaasadeed ee ay gaareen Golaha Wadatashiga Qaranka iyo qaybaha kale ee Dastuurka. |

| | | |
|---|---|---|
| (b) Sugidda ammaanka iyo Nabadgelyada Dalka;<br>(c) Horumarinta dhaqan-dhaqaalaha qaranka iyo suuqa mideysan ee dalka;<br>(d) Horuumarinta baraaraha shacabka;<br>(e) Isdhaafsiga macluumaadka. | (d) Kor u qaadidda daryeelka iyo horumarinta dhaqaalaha dadka;<br>(e) Wadaagidda xogta ee heerarka kala duwan ee dawladda; iyo<br>(f) Dejinta siyaasadaha iyo halbeegyada federaalka iyo dhaqangelintooda ee la xiriira awoodaha wadaagga ah. | |
| (4) Dhammaan heerarka Xukuumadda waxaa waajib ku ah inay u hoggaansanaadaan Dastuurka dalka, ayada oo aan heerna isa siinayn awood ka baxsan kuwa Dastuurku siiyay. | | Faqraddan waxaa loo raray oo lagu nidaamiyay faqradda 1aad ee isla qodobkan. |
| (5) Sharci Baarlamaanka Federaalku ansxiyay waa inuu xeeriyo:<br>(a) Samaynta hay'ado iyo habraacyo fududaynaya wada falgelidda heerarka Xukuumadda;<br>(b) Samaynta hay'ado habaraacyo fududaynaya xallinta khilaafaadka ka dhex dhasha heerarka Xukuumadda inta aanay u gudbin maxkamad. | (5) Baarlamaanka Federaalka ayaa soo saaraya xeer qeexaya dhisidda hay'ado iyo dejinta habraacyo fududeynaya wada shaqeynta heerarka kala duwan ee dawladda. | Faqraddan oo ahayd faqradda 5aad ee asalka Dastuurka nuxurkeeda waxba lagama beddelin, keliya waxa lagu sameeyay dib u habeyn iyo siiqatoosin. |
| **Qodobka 52aad: Iskaashiga Xukuumadaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka** | **Qodobka 66aad: Heshiisyada Iskaashiga ee Heerarka Dawladda** | Cinwaanka Qodobka 66aad ee soojeedinta oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 52aad, waxaa laga dhigay "Heshiisyada Iskaashiga ee Heerarka Dawladda" |
| (1) Xukuumadda Federaalka ah iyo Xukuumadaha xubnaha ka ah waxaa waajib ku ah in madaxweyneyaasha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda hoose ee isla qodobkan. |

| | | |
|---|---|---|
| Mas'uuliyiintooda sare yeeshaan kulammo joogto ama kaltan ay kaga wada xaajoodaan arrimaha degaammadooda wada saameeya oo ay ka mid yihiin:<br>(a) Ilaha biyaha;<br>(b) Beeraha;<br>(c) Xannaanada xoolaha;<br>(d) Daaqa iyo seeraynta;<br>(e) La dagaallanka nabaadguurka iyo ilaalinta deegaanka;<br>(f) Caafimaadka;<br>(g) Tacliinta;<br>(h) Xiriirinta iyo wada-xaajoodka hoggamiyeyaal-dhaqameedka, ilaalinta iyo horumarinta xeer-dhaqameedka;<br>(i) Xiriirinta culimada diinta; iyo<br>(j) Dhallinyarada. | | Sidoo kale, waxaa nuxurkeeda lagu daray madaxa afaraad ee cutubkan oo ah "Astaynta Awoodaha" taas oo lagu gaaray Heshiiska Astaynta Awoodaha 2022. |
| (2) Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayadu dhexdooda ama Xukuumadda Federaalka waxay isla geli karaan heshiisyo iskaashi oo ay ku wada hawlgalaan, aanse lahayn awood sharci, kana horimanayn Dastuurka Federaalka iyo kan Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka. | (1) Dawlad Goboleedyadu waxay geli karaan heshiisyo iskaashi dhexdooda ah ama heshiisyo iskaashi, oo u dhaxeeya Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedayada, kuwaas oo aan ka hor-imaanayn Dastuurka Federaalka. | Faqraddan waxay xeerinaysaa in Dawlad Goboleedyada dhexdooda iyo Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada ay geli karaan heshiis, kuwaas oo aan ka hor imanayn Dastuurka Federaalka. |
| | (2) Heshiisyada leh saameyn siyaasadeed, dhaqaale guud ee u dhexeeya Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada waxay u baahanyihiin ansixinta Baarlamaanka Federaalka. Halka Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedyada ay ansixinayaan heshiisyada u dhexeeya Dawlad Goboleedyada ee aan ka hor imanayn Dastuurka Federaalka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddani waxay waajibinaysa in heshiisyada u dhexeeya Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada ay u baahanyihiin ansixinta Baarlamaanka Federaalka. |

| | | |
|---|---|---|
| **Qodobka 53aad: Wada-xaajoodyada Caalamiga** | | **Qodobakan waa la tiray:** Nuxurkiisa waxaa lagu daray Qodobbadda ka hadlaya Astaynta Awoodaha. |
| (1) Iyada oo la qaddarinayo nuxurka iskaashi ee lagu shaqaynayo, xukuumadda Federaalku waa in ay Dawlad- goboleedyada kala tashataa wada-xaajoodyada la xiriira kaalmada dibedda, ganacsiga, cahdiyada ama arrimaha muhiimka ah ee la xiriira heshiisyada caalamiga ah. | | |
| (2) Marka ay wada-xaajoodyadu si gaar ahaan u saamaynayaan danaha khuseeya dawladda xubinta ka ah dawladda federaalka, xukuumadda Federaalku ergada wada-xaajoodka geleysa waxaa kaabaya wakiillo ka socda Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka. | | |
| (3) Xukuumadda Federaalka marka ay ka hawlgelayso wada- xaajoodyada, waa in ay isu aragtaa xilgudashadeeduna ka muuqdaa in ay tahay ilaaliyaha danaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka. | | |
| **Qodobka 54aad: Kala Qaybinta Awoodaha** | | **Qodobkan waa la tiray:** Nuxurkiisa waxaa lagu daray qodobbada soo socda ee madaxan 4aad. |
| Awood-qaybsiga siyaasadeed iyo dhaqaale waxaa ka wada xaajoon doona Xukuumadda Federaalka iyo | | |

| | | |
|---|---|---|
| Dawladaha ka mid noqonaya Dawladda Federaalka Soomaaliya marka laga reebo:<br>(a) Arrimaha Dibadda;<br>(b) Difaaca Qaranka;<br>(c) Jinsiyadda iyo Socdaalka iyo<br>(d) Siyaasadda Lacagta, oo ay awooddeeda iyo mas'uuliyadda yeelaneyso Xukuumadda Federaalka. | | |
| | **Madaxa Saddexaad: Dawlad Goboleedyada** | **Madax cusub:**<br>Madaxan waxaa laga soo raray cutubka 12aad ee asalka Dastuurka oo ka koobnaa laba qodob. |
| | **Qodobka 67aad: Dastuurka Dawlad Goboleedyada** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dastuurrada Dawlad Goboleedyada waa in ay noqdaan kuwo waafaqsan, oo aan ka hor imaanayn Dastuurka Federaalka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa in dastuurrada dawlad goboleedyadu waafaqsanyihiin Dastuurka Federaalka. |
| | (2) Qodob kasta oo ka mid ah Dastuurka Dawlad Goboleedka, oo aan waafaqsanayn Dastuurka Federaalka wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa in qodob kasta oo ka mid ah Dastuurka dawlad goboleedka ee ka soo horjeeda Dastuurka federaalka uu noqonayo waxba kama jiraan. |
| | **Qodobka 68aad: Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedyada** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dawlad Goboleed kasta wuxuu yeelanayaa Gole Wakiillo oo ku salaysan matalaadda shacabka. | **Faqrad cusub:** |

| | | |
|---|---|---|
| | | Faqraddan waxay xeerinaysaa in dawlad goboleedku yeelanayo gole wakiillo. |
| | (2) Tirada xubnaha Golayaasha Wakiillada Dawlad Goboleed kasta waa in aysan ka badnaan 99, waxaana lagu xaddidayaa Dastuurka Dawlad Goboleedka, si loo hubiyo in dhammaan dadka ku nool Dawlad Goboleedka ay helaan matalaad buuxda. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in tirada xubnaha golaha wakiillada dawlad goboleedyada aysan ka badnaan 99 wakiil. |
| | (3) Xeer kasta uu soo saaro Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka waa in ayna ka hor imaan Dastuurka iyo xeerarka Federaalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in xeerarka uu soo saaro golaha wakiilladu ay noqdaan kuwo waafaqsan xeerarka uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka. |
| | **Qodobka 69aad: Golaha Fulinta Dawlad Goboleedyada** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dawlad Goboleed kasta wuxuu yeelanayaa Gole Fulineed oo ka kooban: Hoggaamiye, Hoggaamiye kuxigeen, oo ay dooranayaan Golaha Wakiillada, iyo Xoghayeyaal. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in dawlad goboleedku yeelanayo hoggaamiye, hoggaamiye kuxigeen iyo xoghaye. |
| | (2) Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Kuxigeenka Dawlad Goboleedka waxay xilka haynayaan muddo shan (5) sano ah oo ka bilaabata maalinta xilka loo dhaariyo loomana dooran karo wax ka badan laba (2) muddo xileed oo isku xiga. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in hoggaamiyaha iyo hoggaamiye ku-xigeenka dawlad goboleedka aan xilka loo dooran karin wax ka baadan laba muddo xileed oo isku xiga. |

| | **Madaxa Afaraad: Astaynta Awoodaha ee Heerarka kala duwan ee Dawladda** | **Madaxa cusub:** |
|---|---|---|
| | **Qodobka 70aad: Awoodaha u Gaarka ah Dawladda Federaalka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dawladda Federaalku waxay yeelanaysaa awoodo u gaar ah ee ku xusan Jadwalka 2 (A) ee Dastuurka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in dawladda federaalka ay yeelanayso awoodo u gaar ah oo ku xusan Jadwalka 2(A). |
| | (2) Dawladda Federaalku waxay mas'uul ka tahay dejinta xeerarka, siyaasadaha, xeer nidaamiyayaasha, halbeegyada, lasocodka, maalgelinta iyo fulinta awoodaheeda u gaarka ah. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa hirgelinta awoodaha u gaarka ah dawladda federaalka. |
| | **Qodobka 71aad: Awoodaha Wadaagga ah** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada waxay wadaagi doonaan awoodaha iyo waajibaadka ku xusan Jadwalka 2 (B) ee Dastuurka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa awoodaha wadaagga ee ka dhexeeya dawladda federaalka ah iyo dawlad goboleedyada. |
| | (2) Awoodaha la wadaago ee ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan, mas'uuliyadda dejinta xeerarka, siyaasadaha, xeer-nidaamiyayaasha, halbeegyada iyo la socodka waxaa u xilsaaran Dawladda Federaalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in dawladda federaalka ay masuul ka tahay dejinta xeerarka, siyaasadaha, xeernidaamiyayaasha khuseeya awoodaha wadaagga ah ee dawladda federaalka iyo dawlad goboleedyada. |
| | (3) Dhaqangelinta iyo fulinta awoodaha la wadaago waxaa u xilsaaran Dawlad Goboleedyada. | **Faqrad cusub:** |

| | | |
|---|---|---|
| | | Faqraddan waxay xeerinaysaa in fulinta iyo dhaqangelinta awoodaha la wadaago ay dawlad goboleedyadu u xilsaaran yihiin. |
| | **Qodobka 72aad: Awoodaha u Gaarka ah Dawlad Goboleedyada** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dawlad Goboleedyadu waxay yeelanayaan awoodo u gaar ah ee ku xusan Jadwalka 2 (C) ee Dastuurka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in dawlad goboleedyada ay yeelanayaan awoodo u gaar ah oo ku xusan Jadwalka 2 (C) ee Dastuurka. |
| | (2) Dawlad Goboleedyadu waxay mas'uul ka yihiin dejinta xeerarka, siyaasadaha, xeer nidaamiyayaasha, halbeegyada, la socodka, maalgelinta iyo fulinta awoodohooda u gaarka ah. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in ay dawlad goboleedyadu leeyihiin mas'uuliyadda dejinta xeerarka, siyaasadaha iyo xeer nidaamiyayaasha ee awoodaha ku xusan Jadwalka 2C. |
| | **Qodobka 73aad: Awoodaha u Gaarka ah Dawladaha Hoose** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dawladaha Hoose waxay yeelanayaan awoodo u gaar ah, oo ku xusan Jadwalka 2 (D) ee Dastuurka. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay xeerinaysaa in dawladaha hoose ay yeelanayaan awoodo u gaar ah oo ku xusan Jadwalka 2 (D). |
| | (2) Dawladaha Hoose waxay mas'uul ka yihiin dejinta siyaasadaha, xeer nidaamyeyaasha, halbeegyada, la socodka, maalgelinta iyo fulinta awoodahooda u gaarka ah. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay xeerinaysaa in awoodaha gaarka u ah dawladaha hoose mas'uuliyadda dejinta |

| | | |
|---|---|---|
| | | siyaasadaha, xeer nidaamiyayaasha iyo halbeegyada ay saarantahay dawladaha hoose. |
| | **Qodobka 74aad: Awoodaha Haraaga ah** | **Qodob cusub:** |
| | Awoodaha haraaga ah waxaa heshiis ka gaaraya Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay tilamamaysaa in awoodaha ka baxsan kuwa gaarka loo asteeyay iyo kuwa wadaagga ah ay ka gaarayaan heshiis Dawladda Federaalka Soomaaliy iyo Dawlad Goboleedyada. |
| | **Qodobka 75aad: Erginta Awoodaha** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dawladda Federaalku waxay Dawlad Goboleedyada iyo Golayaashooda Wakiillada u wakiilan kartaa awoodaheeda u gaarka ah iyadoo la raacayo ansixinta Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay tilmaamaysaa in dawladda federaalka ay awoodaheeda gaarka u leedahay u wakiilan karto dawlad goboleedyada iyo golayaashooda wakiillada. |
| | (2) Dawlad Goboleedku wuxuu Dawladda Federaalka u wakiilan karaa awoodaha u gaarka ah iyadoo la raacayo ansixinta Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedkooda. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay xeerinaysaa in dawlad goboleedku u wakiilan karo awoodahooda u gaarka ah dawladda federaalka, loona baahanyahay ansixinta golaha wakiillada dawlad goboleedka ay khusayso. |
| | (3) Dawladaha Hoose waxay Dawlad Goboleedkooda u wakiilan kartaa awoodaha u gaarka ah. | **Faqrad cusub:** |

| | | |
|---|---|---|
| | | Faqraddani waxay xeerinaysaa in dawladaha hoose awoodaha gaarka ah u wakiilan karaan dawlad goboleedka. |
| | **Qodobka 76aad: Dhexgalka Dawladda Federaalka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay awood u leedahay in ay soo dhexgasho Dawlad Goboleedyada keliya marka midnimada dhuleed, amniga qaranka, ama madaxbannaanida Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay khatar ku jirto iyo duruufo adag oo ku yimaadda Dawlad Goboleedka ee uu maareyn waayo. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in dawladda federaalka awood u leedahay inay dhexgasho dawlad goboleedyada marka midnimada dhuleed, amniga qaranka, ama madaxbannaanida Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay khatar ku jirto iyo duruufo adag oo ku yimaadda Dawlad Goboleedka ee uu maareyn waayo. |
| | (2) Baarlamaanka Federaalka ayaa soo saaraya xeer nidaaminaya gudashada iyo fulinta soo dhexgalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay xeerinaysaa in baarlamaanku soo saarayo xeer ku saabsan habraaca faragelinta. |
| | **Qodobka 77aad: Habraaca Soo Dhexgalka Dawladda Federaalka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dawladda Federaalku waa inay ku wargalisaa Dawlad Goboleedka ay khuseyso, ayada oo faahfaahinaysa sababaha maangalka ah ee soo dhexgalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay tilmaamaysaa in dawladda federaalka ay soo saarto wargelin rasmi ah oo ay u dirayso dawlad goboleedka taas oo lagu faahfaahinayso asbaababa saxda ah ee faragelinta. |

| | | |
|---|---|---|
| | (2) Dawladda Federaalku waa inay la tashato hoggaanka Dawlad Goboleedka, oo ay raadiso xal inta aanay qaadin tallaabooyinka soo dhexgalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay muujinaysaa in dawladda federaalku ay la tashato dawlad goboleedka oo ay xal raadiso faragelinta ka hor. |
| | (3) Markii ay jirto xaalad degdeg ah oo ayna suurtagal ahayn talo wadaagga, Dawladda Federaalku waxay qaadi kartaa tallaabo degdeg ah, laakiin waa in talaabadaas uu dib u eegis ku sameeyo Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka muddo afar iyo toban (14) maalmood gudahood ah. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay xeerinaysaa in marka ay jirto xaalad deg deg ah dawladda federaalku ay qaadi karto tallaabooyin faragelin ah, laakiin Golaha Aqalka Sare ee baarlamaanku leeyahay dib-u-eegista faragelintaas. |
| | **Qodobka 78aad: Xaddidaadda Soo Dhexgalka Dawladda Federaalka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Soo dhexgalka Dawladda Federaalku waa in uu noqdo mid kumeelgaar ah, oo waafaqsan baahida loo qabo in dib loo soo celiyo nabadda, amniga, ama nidaamka dastuuriga ee Dawlad Goboleedka. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay tilmaamaysaa in faragelinta federaalku noqoto mid ku-meelgaar ah oo ku jaango'an baahida soo celinta nabadda, amniga iyo nidaamka dastuuriga ah. |
| | (2) Dawladda Federaalku waa inay ixtiraamto Dawlad Goboleedka oo aanay isku dayin inay wax-kabeddesho qaabdhismeedka siyaasadeed, dhaqaale, ama maamul ee Dawlad Goboleedka, marka laga reebo xaaladaha lagama maarmaanka ah si loo soo celiyo maamulka dastuuriga ah. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay xeerinaysaa waajibka dawladda federaalka ee ilaalinta madaxbannaanida Dastuuriga ah ee dawlad goboleedka iyo in aan isbeddel lagu samayn qaabdhismeedka dawlad goboleedka inta |

| | | |
|---|---|---|
| | | faragelintu socoto, haddii aanay laga maarmaan u ahayn soo celinta maamulka dastuuriga ah. |
| | (3) Soo dhexgalku waa in uu joogsadaa isla marka la xalliyo sababaha keenay soo dhexgalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxa ay xeerinaysaa in ay khasab tahay in ay dhammaato faragelintu marka la xalliyo sababihii keenay faragelinta. |
| | **Qodobka 79aad: Korjoogtaynta Aqalka Sare ee Soo Dhexgalka Dawladda Federaalka** | **Qodob cusub:** |
| | Soo dhexgalka Dawladda Federaalku waa in lagu hor keenaa Golaha Aqalka Sare muddo afar iyo toban (14) maalmood gudahood. Golaha Aqalka Sare wuxuu yeelanayaa awood uu ku ansixiyo, wax-kabeddelo, ama ku joojiyo soo dhexgalka Dawladda Federaalka, iyadoo la hubinayo in tallaabo kasta ay ku jirto xuduudda Dastuurka Federaalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddani waxay xeerinaysaa korjoogtayna Golaha Aqalka Sare iyo faragelinta dawladda federaalka. |

## JADWALKA 2A: AWOODAHA U GAARKA AH DAWLADDA FEDERAALKA

1) Ilaalinta iyo difaaca Dastuurka Qaranka.
2) Ilaalinta midnimada dalka iyo madax-bannaanidiisa.
3) Aftida Dastuurka Qaranka.
4) Arrimaha dibadda iyo xiriirrada dublomaasiyadeed ee caalamiga
5) Axdiyada Caalamiga ah iyo heshiisyada laba dhinaclaha ah ee lala galayo dowladaha iyo hay'adaha caalamiga ah.
6) Arrimaha jinsiyadda iyo socdaalka.
7) Siyaasadda ilaalinta Diinta iyo Awqaafta.
8) Ilaalinta xuquuqda iyo xurriyadaha uu Dastuurku Federaalka dammaanad qaaday.
9) Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Qaran ee Dadweynaha.
10) Siyaasadda diiwaangelinta dhalashada, dhimashada, guurka iyo furiinka.
11) Siyaasadda guud Arrimaha Xisbiyada iyo doorashooyinka dalka.
12) Maamulka doorashooyinka (hal guddi oo maamula doorashooyinka seddaxda heer).
13) Siyaasadda qaran ee arrimaha dhulka, badda iyo hawada.
14) Ilaalinta xuduudaha dhulka, badda iyo hawada.
15) Diiwaangelinta iyo ilaalinta xuquuqda hal-abuurka (Copy right).
16) Shaqaalaha rayidka ee heer federal.
17) Siyaasadda qaran ee mihnadleyaasha iyo ruqsadahooda. Dhaqaalaha.
18) Halbeegyada la xiriira cabiraadda iyo miisaanka.
19) Qorshaha qaran ee horumarinta dhaqaalaha.
20) Siyaasadda lacagta.
21) Go'aaminta ilaha dakhliga, soo saarista canshuuro u gaar ah DFS iyo dajinta, ansixinta iyo maamulidda miisaaniyadda guud ee Federaalka.
22) Istatistikada Qaranka.
23) Wabiyada isku xiraya laba DXDF ama ka badan ama ka imaanaya dibadda xudduudaha gayiga qaranka.
24) Siyaasadda iyo shuruucda ganacsiga dibadda.
25) Maalgashiga Caalamiga.
26) Siyaasadda guud ee tamarta iyo biyaha.
27) Dekadaha iyo garoomada diyaaradaha caalamiga.
28) Waddooyinka isku xira labo DXDF ama ka badan.
29) Siyaasadda gaadiidka dhulka, badda iyo cirka.
30) Maamulka duulista hawada iyo gaadiidka badda.
31) Boostada, Koodka Soomaaliya ee (252), Koodka Internet-ka (.SO), astaynta mowjadaha maqal iyo maqal-aragga, Siyaasadda Ammaanka Internet-ka (Cyber Security), ilaalinta xogta (Data protection) iyo siyaasadda isgaarsiinta iyo warfaafinta.
32) Difaaca Qaranka iyo Cidanka Xoogga Dalka.
33) Dhisidda Boliis Federaal ah iyo Sirdoonka Qaranka.
34) Soo celinta amniga iyo xasilloonida marka DXDF ay la soo gudboonaadaan qalalaase ka baxsan awooddooda marka ay DF iyo DXDF ay khuseyso ka heshiiyaan.
35) Habraacyada nidaamiya hubka fudud iyo saanadda ee gaarka loo leeyahay.
36) Golaha Sare ee Garsoorka, Maxkamadda Sare ee federaalka, Maxkamadda Dastuurka iyo xeer-ilaalinta guud ee qaranka.
37) Maxkamadda ciidamada galabka-sida ee heer federaal.

38) Siyaasadda qaran ee caafimaadka.
39) Siyaasadda tayadhawrka agabka, dawooyinka iyo cuntada.
40) Arrimaha qaxootiga, magangeliyo doonka iyo barakacayaasha.
41) Siyaasadda daryeelka bulshada.
42) Nidaaminta iyo maamulka xarumaha qaran sida:
    a) Matxafyada.
    b) Maktabadaha.
    c) Tiyaatarrada iyo garoomada ciyaaraha
43) Siyaasadda qaran ee waxbarshada dalka, hannaanka dejinta manhajka iyo imtixaannada shahaaddada dugsiga sare.
44) Siyaasadda qaran ee tacliinta sare, tiknoolijiyada iyo hay'adaha cilmibaarista.

## JADWALKA 2B: AWOODAHA WADAAGGA AH

1) La-dagaallanka nabaadguurka, ilaalinta deegaanka iyo duurjoogta
2) Arrimaha shaqaalaha dowladda iyo shagaalaha gaarka ah.
3) Horumarinta iyo kobcinta awoodaha maamullada dowladaha hoose.
4) Warfaafinta.
5) Gargaarka iyo maareynta musiibooyinka.
6) Ilaalinta ilaha iyo kaydka biyaha.
7) Horumarinta xannaanada xoolaha.
8) Qorshaha horumarineed ee waxbarashada iyo illaalinta tayadeeda.
9) Arrimaha kheyraadka dabiiciga ah.
10) Arrimaha dalxiiska.
11) Goobaha iyo astaamaha taariikhiga ah ee qaranka
12) Beeraha iyo waraabka.
13) Kalluumaysiga iyo khayraadka badda.
14) Nidaaminta ganacsiga u dhexeeya DXDF.
15) Ka hortagga faldambiyeedyada abaabulan.
16) Arrimaha Xabsiyada.
17) Tallaalka iyo ka hortagga cudurrada faafa
18) Ilaalinta tayada iyo korjoogteynta adeegyada caafimaadka.
19) Tayaynta kuliyadaha caafimaadka, iskuullada kalkaaliyayaasha iyo xirfadleyda caafimaadka.
20) Arrimaha daryeelka qoyska iyo dadka baahiyaha gaarka ah qabo

## JADWALKA 2C: AWOODAHA U GAARKA AH DAWLAD GOBOLEEDKA

1) Soo saaridda iyo ku dhaqanka dastuur iyo shuruuc u gaar ah DXDF oo aan ka hor imaanayn Dastuurka iyo Shuruucda Federaalka.
2) Maamulka doorashooyinka heer DXDF iyo heer deegaan (hal guddi oo maamula doorashooyinka seddaxda heer)
3) Dejinta siyaasad dhuleed ee DXDF.
4) Hirgelinta istiraatiijiyadaha gargaarka iyo maareynta musiibooyinka.
5) Taabbagelinta siyaasadda dowladaha hoose
6) Diyaarinta iyo hirgelinta qorshaha horumarinta reer miyiga.
7) Soo-saarista iyo hirgelinta shuruucda shaqaalaha rayidka DXDF.
8) Diyaarinta iyo hirgelinta qorshaha horumarinta dhaqaalaha ee DXDF
9) Qorsheynta iyo hirgelinta mashaariicda horumarineed ee DXDF
10) Ururinta canshuuraha iyo ilaha dakhliga gaarka u ah DXDF
11) Diyaarinta iyo maamulidda miisaaniyadda DXDF
12) Diiwaangelinta shirkadaha ka shaqeeya DXDF.
13) Taaba-gelinta siyaasadda beeraha, waraabka iyo cilmibaarista.
14) Garoomada diyaaradaha ee maxalliga.
15) Diiwaangelinta iyo bixinta taarkada iyo ruqsadda gadiidka
16) Rugsadda gaari wadista.
17) Dhisidda iyo dayactirka waddooyinka DXDF.
18) Maamulka warfaafinta iyo isgaarsiinta DXDF.
19) Dhisidda iyo maamulidda ciidanka booliska DXDF/daraawiishta
20) Dhisidda, tayaynta iyo tababarka ciidanka ilaalada deegaanka
21) Maxkamadda Sare, Maxkamadda Racfaanka iyo Maxkamadda Darajada Kowaad ee DXDF, iyo xafiiska Xeer-ilaalinta DXDF.
22) Nidaaminta iyo korjoogteynta isbitaallada iyo goobaha caafimaad
23) Nidaaminta iyo maamulka xarumaha DXDF sida:
    a. Maktabadaha.
    b. Matxafyada.
    c. Beeraha Nasashada.
    d. Xarumaha hiddaha dhaqanka.
    e. Dalxiiska iyo xeebaha.
    f. Tiyaatarrada iyo Garoomada ciyaaraha
24) Taabbagelinta siyaasadda gaxootiga, magangeliyo doonka iyo barakacayaasha.
25) Bixinta adeegyada tamarta iyo biyah
26) Siyaasadaha DXDF ee diiwaangelinta dhalashada, dhimashada iyo guurka iyo bixinta warqadaha aqoonsiga.
27) Qorshaha horumarineed iyo baahinta waxbarashada dugsiyada hoose, dhexe iyo sare.
28) Imtixaanaadka iyo shahaaddada dugsiyada hoose/ dhexe
29) Maamulidda dugsiyada sare iyo macaahidda farsamada gacanta.

## JADWALKA 2D: AWOODAHA U GAARKA AH DAWLADAHA HOOSE

1) Isku-duwidda iyo habsami u socodka howlaha maamulka degmada.
2) Naqshadaynta degmada, ruqsadaha dhul bixinta iyo dhismooyinka.
3) Qorsheynta iyo fulinta mashaariicda horumarinta dhaqaalaha Degmada.
4) Dhawrista deegaanka.
5) Maamulka goobaha iyo astaamaha taariikhiga ah e degmada
6) Horumarinta dalxiiska.
7) Uruurinta canshuuraha iyo ilaha dakhliga gaarka u ah Dowladaha Hoose.
8) Bixinta shatiyada goobaha ganaciga.
9) Suuqyada iyo kawaannada.
10) Kalluumeysiga maxalliga
11) Nidaaminta iskaashatooyinka
12) Nidaaminta gaadiidka dadweynaha
13) Dhisidda, dayactirka iyo iftiiminta waddooyinka.
14) Maamulidda amniga iyo xasiloonida Degmada.
15) Ilaalinta anshaxa iyo asluub wanaagga dadweynaha.
16) Kobcinta daryeelka caafimaadka asaasiga ah
17) Horumarinta Isbitaallada hooyada iyo dhallaanka
18) Goobaha adeegyada caafimaadka sida farmashiyada iyo adeegga ambalasyada.
19) Nadaafadda iyo fayadhowrka deegaanka sida qashinka, wasakhda iyo sunta IWM
20) Kormeerka tayada cuntada, hoteelada, maqaayadaha iyo guryaha dadweynaha.
21) Nidaaminta Xabaalaha.
22) Adeegyada xannaanada xoolaha
23) Horumarinta iyo tayaynta arrimaha dab-demiska
24) Korjoogtaynta adeegyada korontada iyo biyaha
25) Horumarinta dhalliyarada iyo Isboortiga
26) Maamulka arrimaha dhaqanka, beeraha nasashada iyo xeebaha.
27) Arrimaha daryeelka qoyska iyo dadka baahiyaha gaarka qabo
28) Diiwaangelinta dhalashada, dhimashada, guurka, furiinka iyo bixinta waraagaha sugnaanta dhalashada
29) Taakuleynta qaxootiga iyo barakacayaasha si waafaqsan shuruucda dalka.
30) Maamulka waxbarashada ee dugsiyada hoose, dhexe lyo sare
31) Waxbarashada dadka waaweyn.
32) Fulinta Siyaasadda Dhiirigelinta waxbarashada Islaamka ee asaasiga ah sida dugsiyada qur'aanka iyo masaajidda.

# CUTUBKA LIXAAD:
# BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Cutubka lixaad wuxuu ka koobanyahay labaatan iyo sagaal (29) qodob oo ka billaabanaya Qodobka 80aad ilaa 108aad, halka asalka Dastuurka uu ka koobnaa labaatan iyo afar (24) qodob. Waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyay shan (5) qodob iyo afartan iyo shan (45) faqradood cusub, oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Waxaa la tiray shan (5) qodob iyo sagaal (9) faqradood, oo asalka Dastuurka ku jiray.

Cutubkan waxaa loo kala qaybiyey afar madax oo kala ah:

- Madaxa Kowaaad: Qodobbo Guud;
- Madaxa Labaad: Kalfadhiyada Baarlamaanka;
- Madaxa Saddexaad: Maamulka iyo Kalfadhiyada Baarlamaanka; iyo
- Madaxa Afaraad: Xeerdejinta Baarlamaanka.

Arrimaha lagu soo kordhiyay cutubkan waxaa ka mid ah:

- Dhaarta xubnaha labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka;
- Shuruudaha Doorashada Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka;
- Guddiga Adeegga Baarlamaanka, oo laga soo raray Qodobka 111D ee asalka Dastuurka;
- Awoodda Korjoogteynta iyo Baaritaanka Baarlamaanka Federaalka; iyo
- Heshiisyada Caalamiga.

| CUTUBKA LIXAAD:<br>BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA | | |
|---|---|---|
| **Asalka Dastuurka KMG** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD** | **Faallo** |
| **Cutubka 6aad: Baarlamaanka Federaalka** | **Cutubka 6aad: Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya** | Cinwaanka Cutubka 6aad waxba lagama beddelin. |
| **Madaxa Koowaad:<br>Qodobo Guud ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya** | **Madaxa Koowaad:<br>Qodobbo Guud** | Cinwaanka Madaxa Koowaad ee Cutubka 6aad, oo asalka Dastuurka ahaa "Qodobbo Guud ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya" waxaa laga dhigay "Qodobbo Guud", waana lasoo koobay. |
| **Qodobka 55aad: Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka** | **Qodobka 80aad: Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka** | Cinwaanka Qodobka 80aad ee soojeedinta wax- kabeddelka Dastuurka oo ahaa Qodobka 55aad ee Asalka Dastuurka waxba lagama beddelin. |
| | (1) Awoodda xeerdejinta qaranka waxaa u xilsaaran Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddani waxay caddaynaysaa in BFS yahay hay'adda u xilsaaran awoodda xeer dejinta qaranka. Qodobkan oo Asalka Dastuurka ahaa laba faqradood, hadda soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka, waxaa uu noqday saddex faqradood. |
| (1) Baarlamaanka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ka kooban yahay: | (2) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu ka koobanyahay laba gole oo kala ah Golaha Shacabka | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, keliya waxaa la |

| | | |
|---|---|---|
| (a) Golaha Shacabka, iyo;<br>(b) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | iyo Golaha Aqalka Sare, wuxuuna gole walba waajibaadka u gaarka ah u gudanayaa goonidiisa, xilalka wadaagga ahna si wadajir ah. | tiray xarfaha (a) iyo (b), waxaa sidoo kale lagu soo kordhiyay "wuxuuna gole walba xilalka u gaarka ah u gudanayaa goonidiisa, xilalka wadaagga ahna si wadajir ah." |
| (2) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah iyo Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waxay masuuliyadaha sharci-dejinta u gutaan si waafaqsan Madaxa Afraad ee Dastuurkan oo ku saabsan habraaca sharci-dejinta Heerka Qaran. | | **Faqraddan waa la tiray:**<br>Nuxurkeeda waxaa lagu xeeriyay Qodobka 81aad ee Xilaka Xubnaha Baarlamaanka Federaalka. |
| **Qodobka 56aad: Xilgudashada Baarlamaanka Federaalka** | | **Qodobkan waa la tiray:** |
| Golayaasha Baarlamaanka Federaalku:<br>(a) Xilalka ay wadaagaan waa inay u gutaan si wadajir ah;<br>(b) Xilalka uu gole waliba gaarka u leeyahay wuxuu u gutaa gaar ahaantiisa. | | Qodobkan nuxurkiisa waxaa lagu daray Qododbka 80 (2) ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| | **Qodobka 81aad: Xilka Xubnaha Baarlamaanka Federaalka** | Cinwaanka Qodobka 81aad oo asalka Dastuurka waxaa laga soo raray Qodobka 61aad. |
| | (1) Xubin kasta, oo ka mid ah Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka marka ay waajibaadkeeda gudaneyso waa in ay ku shaqaysaa sida ay ku jirto danta ummadda iyo qaranka Soomaaliyeed. | Faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa la hagaajiyay siiqada. "Labada Aqal" waxaa lagu beddelay "Golayaasha". Waxaa kale oo lagu kordhiyay "ummadda iyo qaranka Soomaaliyeed". |

| | | |
|---|---|---|
| | (2) Xubin kasta, oo ka mid ah Golaha Shacabka, iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan, waxaa xil gaar ah ka saaranyahay matalaadda dhammaan muwaaaddiniinta oo idil, gaar ahaan ahaan degaanka laga soo doortay ayada oo aan loo eegin siyaasadda uu raacsanyahay iyo xisbi uu ka tirsanyahay midna. | Farqddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, laakiin waxaa lagu sameeyay siiqo toosin. "Deegaancodbixiyayaasha laga soo doortay" waxaa lagu beddelay "codbixiyayaasha deegaanka laga soo doortay". |
| | (3) Xubin kasta oo ka mid ah Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waxaa xil gaar ah ka saaranyahay matalaadda danaha Dawlad Goboleedka ay matalayso iyo in ay ilaaliso nidaamka federaalka, ayada oo ahmiyad sare siineysa iskaashiga ka dhaxeeya Dawlad Goboleedyada dhexdooda iyo Dawlad Goboleedyada iyo Dawladda Federaalka, kuna shaqeyneysa dareen qarannimo. | Nuxurka Faqradda 3aad waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo dib-u-qorid. Sidoo kale, "Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda federaalka ah" waxaa lagu beddelay "Dawlad Goboleedka". Waxaa kale oo lagu kordhiyay "Dawlad Goboleedyada dhexdooda iyo Dawlad Goboleedyada iyo Dawladda Federaalka". |
| | **Qodobka 82aad: Tirada Xubnaha Baarlamaanka Federaalka** | Cinwaanka Qodobka 82aad ee wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa qodobka 64aad, "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay "Baarlamaanka Federaalka", sidoo kale qodobkan waxaa lagu soo daray Qodobka 72aad ee asalka Dastuurka. |
| | (1) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu ka koobanyahay Golaha Shacabka oo laba boqol todobataan iyo shan (275) xildhibaan ah iyo Golaha | Faqradda 1aad waxaa lagu mideeyey qodobka 64(2) iyo qodobka 72aad oo labaduba |

| | | |
|---|---|---|
| | Aqalka Sare oo konton iyo afar (54) Senatar ah oo laga soo dooranayo 18 kii gobol. | sheegaya tirada xubnaha Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare. |
| | (2) Tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waa in ay matalaad isu dheellitiran ku yeeshaan dhammaan qaybaha bulshada. | Faqradda 2aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad waxay tilmaamaysaa in labada Gole ee Baarlamaanka ay dhammaan qaybaha bulshadu metalaad ku yeeshaan. |
| | (3) Qof kasta oo noqda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, marka uu xilka banneeyo si nabad iyo dimuquraadiyad ah, wuxuu xubin sharafeed ka noqonayaa Golaha Aqalka Sare inta uu noolyahay haddii aan xil-ka-xayuubin lagu samayn ayada oo aanay muddadii xil-hayntiisu dhammaan si waafaqsan Qodobka 117aad ee Dastuurka. Xuquuqda, waajibaadka iyo xaddidaadaha la xiriira xubinnimadan sharafeed waxaa lagu nidaamin doonaa xeer gaar ah. | Faqradda 3aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 4aad waxay xeerinaysaa in Madaxweynaha JFS oo xilka ka dega uu xubin sharafeed ka noqonayo Golaha Aqalka Sare haddii aan xil-ka-xayuubin lagu samayn iyada oo aan muddadii xilhayntiisu dhammaan. Waxaa kale oo faqraddan tilmaamaysaa in xeer gaar ah nidaamin doono xuquuqda, waajibaadka iyo xaddidaadda xubinnimadan sharafeed. |
| **Qodobka 57aad: Xilka Xeerdejinta ay Wadaagaan Labada Gole** | | **Qodobkan waa la tiray:** |
| Xilka sharci-dejinta ee ay wadaagaan labada gole waxaa ka mid ah: | | Nuxurka qodobkan waxaa lagu daray Qodobka 94aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| (a) Markii loo baahdo Aqalka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka iyo Aqalka Dawladaha | | |

| | | |
|---|---|---|
| Federaalka ka mid ah waxay qabsanayaan fadhiyo wadajir ah, waxaana fadhiyadaa hoggaaminaya Guddoomiyaha Aqalka Sare ama xubin kale oo ka tirsan Baarlamaanka Federaalka ah hadba sida ay xeerka iyo nidaamka aqalladu dhigayaan. | | |
| (b) Inta uu guddoominayo fadhiyada wadajirka ah, Guddoomiyaha Aqalka Sare Federaalka ah, ama Guddoomiyaha Golaha shacabka ama xubintii kale ee la isla garto in ay guddoonka qabataa, kuma laha wax cod ah arrimaha loo codeynayo, marka laga reebo xaaladda ay cododkii tiro ahaan sinnaadaan. | | |
| (c) Iyadoo aan wax loo dhimeyn awoodda uu Baarlamaanku ku habeynayo hawlihiisa iyo shaqo-fulintiisa, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waxaa laga yaabaa, marka uu u arko in ay ku haboon tahay, in uu ku codsado/ay ku codsato farriin loo diro labada guddoomiye ee aqallada in la qabto fadhi wadajir ah oo ku saabsan:<br>(i) Dejinta habraacyada haga hawlaha guddiyada isku dhafan ee labada Gole;<br>(ii) Dhaqangalinta habraacyada meel-marinta go'aannada ay gaaraan guddiyada isku dhafan;<br>(iii) Wax kabaddalidda iyo dib-u-eegidda Dastuurka si waafaqsan Cutubka 15aad. | | |

| Qodobka 58aad: Shuruudaha Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka | Qodobka 83aad: Shuruudaha Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka | Cinwaanka Qodobka 83aad ee wax-kabeddelka Dastuurka, oo asalka Dastuurka ahaa, Qodobka 58aad waxba lagama beddelin. |
|---|---|---|
| (1) Qofka loo dooranayo xubinnimadda Baarlamaanka Federaalka waa in:<br>(a) Uu yahay Muwaaddin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dhimirkiisu dhan yahay da'diisunaaanay ka yarayn shan iyo labaatan (25) sano, codbixiye ahaanna u diiwaangashan;<br>(b) Aan xuquuqdiisa muwaaddinnimo go'aan maxkmadeed lagu hakin shantii (5) sano ee ugu dambaysey;<br>(c) Uu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo'aragnimo u dhiganta. | (1) Xubnaha Golayaasha Baarlamaanka Federaalka waxaa loo dooran karaa qof kasta, oo soo buuxiya shuruudaha soo socda:<br>(a) Muwaaddin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>(b) Xuquuqdiisa muwaadinnimo go'aan maxkmadeed lagu hakin shantii (5) sano ee ugu dambaysay, maxkamadina ayna si kama dambays ah ugu xukumin dembi ciqaabtiisu gaarsiisantahay shan (5) sano;<br>(c) Dhimirkiisu dhanyahay;<br>(d) Da'diisu tahay 30jir haddii uu u sharraxanyahay Golaha Shacabka ama 35jir haddii uu u sharraxanyahay Golaha Aqalka Sare, codbixiye ahaanna u diiwaangashanyahay;<br>(e) Leeyahay aqoon heer Jaamacadeed, oo la aqoonsanyahay ama waaya-aragnimo u dhiganta;<br>(f) In musharraxa Golaha Shacabku leeyahay waaya-aragnimo shaqo ugu yaraan 3 sano, halka musharraxa Golaha Aqalka Sare leeyahay waaya-aragnimo shaqo ugu yaraan 5 sano;<br>(g) Ku sifoobay daacadnimo iyo ammaano;<br>(h) Ugu yaraan in uu dalka sii deggenaa 2 sano ka hor maalinta doorashada la qabanayo; iyo<br>(i) Uu xubin ka yahay xisbi siyaasadeed oo ka diiwaangashan Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha. | Faqraddan waxaa lagu sameeyay siiqo toosin iyo dib u qorid, waana la ballaariyay:<br><br>***Xarafka (a)*** oo kulminayey dhowr arrimood waa la kala qaaday waxaana lagu soo koobay shuruudda muwaaddinnimada oo keli ah.<br><br>***Xarafka (b)*** waxaa lagu soo kordhiyay shuruud kale oo tilmaamaysa in aan maxkamad si kamadambays ah ugu xukumin dembi ciqaabtiisu gaarayso shan sano.<br><br>***Xarafka (c)*** waxaa laga soo jaray xarafka (a) ee asalka Dastuurka.<br><br>***Xarafka (d)*** waxaa lagu xeeriyay shuruudda da'da ee qofka loo dooranayo Golaha Shacabka oo 30jir iyo Aqalka Sare oo 35jir ah.<br><br>***Xarafka (e)*** wuxuu shuruud ka dhigayaa haysashada shahaado |

| | | |
|---|---|---|
| | | heer jaamacadeed ama waayo-aragnimo u dhiganta.<br><br>***Xarafka (f)*** wuxuu xeerinayaa in musharraxa Golaha Shacabku leeyahay 3 sano oo waayo-aragnimo ah, halka musharraxa Aqalka Sare laga rabo waayo-aragnimo 5 sano ah.<br><br>***Xarafka (g)*** way cusubtahay waxayna xeerinaysaa in ku sifoobay daacadnimo iyo ammaano;<br><br>***Xarafka (h)*** waxay xeerinaysa in musharraxu uu joogay dalka 2 sano ka hor maalinta doorashada la qabanayo; khasabna ma ah in ay xiriir noqoto;<br><br>***Xarafka (i)*** waxay xeerinaysaa in murashaxu xubin ka yahay Xisbi Siyaasadeed. |
| (2) Ka hor inta aan qofka la oggolaan murashaxnimadiisa, Guddiga Qaranka ee Madax Bannaan ee Doorashooyinka waa inuu hubiyo in murashaxu buuxiyey shuruudaha ku cad qodobkan. | (2) Ka hor inta aan qofka la oggolaan musharraxnimadiisa, Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waa inuu hubiyo in musharraxu buuxiyey shuruudaha ku cad qodobkan. | Faqraddan waxba lagama beddelin, keliya waxa lagu daray "Soohdimaha" maaddaama guddiga magaciisa uu isbeddelay. |

| Qodobka 59aad: Sababaha Lagu Lumiyo Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka | Qodobka 84aad: Sababaha Lagu Lumiyo Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka | Cinwaanka Qodobka 84aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo asalka Dasuurka ahaa Qodobka 59aad waxba lagama beddelin. |
|---|---|---|
| (1) Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka waxaa lagu lumin karaa:<br>(a) Xubinta oo Geeriyoota<br>(b) Xubinta oo ay la soo gudbonaato xaalad xilgudasho la'aaneed oo joogto ah.<br>(c) Xubinta oo istiqaalad u gudbisa aqalka ay xubinta ka tahay, lagana oggolaado.<br>(d) Ka-maqnaansho labo kalfadhi oo caadi ah, iskuna xiga ayada oo aanay jirin sabab maangal ah.<br>(e) Haddii ay xubintu aqbasho xil Dawladeed aan wasiir ka ahayn<br>(f) Haddii la hakiyo xuquuqdiis muwaaddinnimo, sida ku cad Sharciga. | (1) Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka waxaa lagu lumin karaa arrimaha soo socda midkood:<br>(a) Geeri;<br>(b) Iscasilaad uu xildhibaanku si rasmi ah ugu gudbiyo guddoomiyaha golaha uu ka tirsanyahay, si qoraal ahna looga aqbalo;<br>(c) Xil gudasho la'aan joogta ah sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed, oo uu caddeeyay dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsayahay;<br>(d) Ka maqnaansho labo kalfadhi oo caadi ah, iskuna xiga ayada oo aanay jirin cudurdaar maangal ah.<br>(e) Xukun maxkamadeed oo kama dambays ah, oo gaaraya ugu yaraan shan (5) sano oo xabsi ah;<br>(f) Aqbalaadda xil kale oo dawladeed ee heerarka kala duwan ee dawladda; iyo<br>(g) Muddada xil haynta oo dhammaata. | Faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib-usiiqayn iyo dib-uhabayn.<br><br>***Xarafka (a)*** waxa la tiray "xubinta oo".<br><br>***Xarafka (b)*** wuxuu xeerinayaa iscasilaad rasmi ah oo xildhibaanku u gudbiyo guddoonka golaha uu ka tirsanyahay, lagana aqbalo.<br><br>***Xarafka (c)*** waxa uu xeerinayaa in sababaha lagu weyn karo xubinnimada ay ka mid tahay xilgudasho la'aan joogto ah sababa la xiriira mid jireed iyo mid maskaxeed. Asalka Dastuurka xarafka (b) ayaa arrinkan xeeriyay, waxaana lagu daray "sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed oo uu caddeeyay dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsayahay". |

| | | |
|---|---|---|
| | | ***Xarafka (∂)*** waxaa uu tilmaamayaa in xubinta ka maqnaata labo kalfadhi oo caadi ah, iskuna xiga ayada oo aanay jirin cudurdaar maangal ah.<br><br>***Xarafka (f)*** oo asalka Dastuurka ahaa xarafka (e) waxaa lagu soo kordhiyay "heerarka kala duwan".<br><br>***Xarafka (e)*** waxay xeerinaysaa in xubintii maxkamad si kamadambays ah ugu xukunto xabsi gaaraya shan (5) sano ay luminayso xubinnimada.<br><br>***Xarafka (g)*** waxa uu tilmaamayaa in dhammaanshaha xilhaynta ay keenayso lumin xubinnimada. |
| | (2) Sababaha lagu luminayo xubinnimada ku xusan faqradda 1 (c) iyo (d) ee Qodobkan waxaa loo baahanyahay aqlabiyadda golaha uu ka tirsanyahay. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxaa lagu xeeriyay in loo baahanyahay oggoolaanshaha golaha uu ka tirsanyahay xildhibaanka ama senatorka haddii uu ka maqnaado sababo maangal ah la'aantood muddada ku xusan Dastuurka, iyo haddii qofka lagu sheego in uu xilka gudan karin sababo la xiriira |

| | | |
|---|---|---|
| | | mid jireed ama maskaxeed oo uu caddeeyey dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsayahay. |
| (2) Haddii xubin ka mid ah Baarlamaanka Federaalka lumiso xubinnimadeeda waxaa baddelaya qofka doorashadii hore ku xigey. | (3) Haddii xubin ka mid ah Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka booskeeda bannaanaato, habraaca buuxinta booska bannaan waxaa loo raacayaa Xeerka Doorashooyinka. | Faqradda 3aad waxay xeerinaysaa in haddii xubin ka tirsan Goleyaasha Baarlamaanka booskeedu bannaanaado sababaha faqradda kore lagu tilmaamay midkood, buuxinta xubinnimadaas waxaa loo raacayo si waafaqsan habraaca ku xusan Xeerka Doorashooyinka. |
| (3) Sharciga doorashada ayaa caddaynaya habraaca loo marayo xulashada xubin- sugaha, waana in lagu dhaariyo 30 beri gudohood laga bilaabo maalinta xildhibaanka uu beddelayaa lumiyey xubinnimada Baarlamaanka. | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeediina waxaa lagu daray faqradda 3aad ee isla qodobkan, iyada oo habraaca loo marayo doorashada loo raacayo Xeerka Doorashooyinka. |
| **Qodobka 60aad: Muddada xil-haynta** | | **Qodobkan waa la tiray:** |
| (1) Muddada xil-haynta Baarlamaanka Federaalku waa (4) afar sano oo ka bilaabata maalinta natiijada doorshada lagu dhawaaqo. | | Waxaa nuxurkiisa lagu xeeriyay Qodobka 50aad ee Cutubka 4aad ee wax-kabeddelka Dastuurka oo uu baarlamaanku ansixiyay. |
| (2) Xildhibaan kasta oo Baarlamaanka Federaalka ka mid ah dib ayaa loo dooran karaa. | | |
| **Qodobka 61aad. Xilka Xubnaha Baarlamaanka Federaalka** | | Qodobkan waxaa loo raray Qodobka 81aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| (1) Xubin kasta oo ka mid ah labada Aqal ee Baarlamanka Federaalka marka ay xilkeeda | | |

| | | |
|---|---|---|
| gudaneyso waa in ay ku shaqaysaa sida ay danta qaranku ku jirto. | | |
| (2) Iyada oo oofinaysa waajibaadka ku cad faqradda (1) ee qodobkan, xubin kasta oo ka mid ah Golaha Shacabka, xil gaar ah ayaa ka saaran matilaadda degaan-codbixiyeyaasha laga soo soo doortay, iyadoon loo eegin siyaasad iyo taageerid xisbiyo kale. | | |
| (3) Xubin kasta oo ka mid ah Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu xil gaar ahi ka saran yahay matalaadda danaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ee uu matalayo iyo in uu ilaaliyo nidaamka Federaalka, kuna shaqeeyo dareen iskaashi Federaalnimo. | | |
| | **Qodobka 85aad: Dhaarta Xubnaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka** | **Qodob cusub:** |
| | Kulanka ugu horreeya xubnaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, dhaartaas oo ah sidatan:<br><br>Aniga oo ah ______________________________, waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan si dhab ah daacad ugu noqdo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; dhawrana una hoggaansamo Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka dalka; iyo inaan u guto waajibaadkayga xildhibannimo oo ay ka midyihiin matalaadda, xeer-dejinta iyo kormeerka si hufanaan, sharaf, xilkasnimo iyo mas'uuliyad ay ku jirto. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa dhaarinta xubnaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. |

| | | |
|---|---|---|
| | **Qodobka 86aad: Xasaanadda iyo Xuquuqda Xubnaha Baarlamaanka Federaalka** | Cinwaanka Qodobka 86aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo ahaa Qodobka 70aad ee asalka Dastuurka waxaa laga dhigay "Xasaanadda iyo Xuquuqda Xubnaha Baarlamaanka Federaalka". |
| | (1) Xubin ka tirsan Baarlamaanka Federaalka dhibaato kama soo gaari karto fikradda ama codka uu ka hor dhiibto Golaha iyo guddiyadiisa. | Faqradda 1aad ee asalka Dastuurka nuxurkeeda waxba lagama beddelin. "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay Baarlamaanka Federaalka". |
| | (2) Haddii aan laga haysan oggolaansho Golaha Shacabka ama Golaha Aqalka Sare, Xildhibaanka ama Sanetarka laguma oogi karo dacwad ciqaabeed; lama xiri karo lamana baari karo qof ahaan, hoygiisa ama meeshii kale oo u gaar ah, haddaan lagu qaban isagoo faraha kula jira fal dembiyeed, sharci ahaan khasab ay tahay in la qabto. | Faqradda 4aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin. |
| | (3) Dacwadaha aan ciqaabta ahayn ee ka dhanka ah xildhibaanka waxaa la furi karaa ayada oo aan loo baahneyn oggolaanshaha golaha uu ka tirsanyahay. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin ee waxaa lagu sameeyay dib-uhabayn iyo siiqatoosin. |
| | (4) Gunnooyinka iyo daryeelka kale ee xaqa u leeyihiin xubnaha Barlamaanka Federaalka Soomaaliya waxaa toos looga bixinayaa khasnadda dhexe ee dawladda. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa lagu daray Ereyga "toos" oo muujinayo in kharashka toos looga bixinayo khasnadda dhexe ee dawladda. |

| | | |
|---|---|---|
| | **Qodobka 87aad: Doorasho Xilligeedda Laga Soo Hormariyey** | Qodobka 87aad ee soojeedinta wax-kabeddelka wuxuu ahaa Qodobka 67aad ee asalka Dastuurka. |
| | (1) Lama qaban karo doorasho xilligeedda laga soo hormariyay labada (2) sano ee ugu horreysa muddo xileedka Baarlamaanka Federaalka Sooomaaliya. | Faqraddan waxay xeerinaysaa in aan labada Gole ee Baarlamaanka loo diri karin doorasho xilligeeda laga soo hormariyey labada (2) sano ee ugu horreysa muddo xileedkooda. |
| | (2) Doorasho xilligeedda laga soo hormariyey waxaa la qaban karaa oo keliya saddexda (3) sano ee u dambeysa muddo xilleedka baarlamaanka haddii ay jiraan xaalado ay ku gudan waayaan waajibaadkooda dastuuriga ah ee la xiriira habraaca hawlgalka caadiga ah ee xeer dejinta. | **Faqrad cusub:** Waxay tilmaalaysaa in doorasho xilligeedda laga soo hormariyey la qaban karo oo keliya saddexda (3) sano ee u dambeysa muddo xilleedka baarlamaanka haddii ay jiraan xaalado ay ku gudan waayaan waajibaadkooda dastuuriga ah. |
| | (3) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ayaa soo saaraya xeer Madaxweyne ee lagu qabanayo doorashada xilligeedda laga soo hormariyey ee Goleyaasha Baarlamaanka, kaddib markuu dhageysto talada xisbiyada siyaasadeed ee dalka. | **Faqrad cusub:** Waxay xeerinaysaa in Madaxweynaha soo saarayo Xeer Madaxweyne lagu qabanayo doorasho xilligeeda laga soo hormariyey, kaddib markuu dhageysto talada xisbiyada siyaasadeed ee dalka. |
| | (4) Madaxweynaha Jamhuuriyadda, kaddib markii uu dhegeysto talooyinka Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha, wuxuu | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa habraaca ku dhawaaqidda |

| | | |
|---|---|---|
| | isla xeerka uu ku dhawaaqayo doorasho xilligeeda laga soo hormariyey ku caddeynayaa taariikhda doorashada oo lagu qabanayo muddo 90 maalmood gudahood ah, laga billaabo maalinta xeerku soo baxo, si waafaqsan Dastuurka Federaalka. | doorashada xilligeeda laga soo hormariyay. |
| | (5) Baarlamaanka xilka ka degaya ayaa sii haynaya awoodda baarlamaanka ilaa iyo inta lagu dhawaaqayo natiijooyinka doorashooyinka xubnaha Goleyaasha Baarlamaanka cusub. | **Faqrad cusub:** Waxay tilmaamaysaa baarlamaanka xilka ka degaya uu sii haynayo awoodda baarlamaanka ilaa inta laga dooranayo xubno cusub. |
| | **Qodobka 88aad: Xeer Hoosaadyada Baarlamaanka** | Cinwaanka Qodobka 88aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 68aad "Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah" waxaa laga dhigay "Xeer Hoosaadyada Baarlamaanka". |
| | (1) Si waafaqsan Xeer Hoosaadka wadajirka ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya, Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare wuxuu mid walba goonidiis u sameysanayaa xeer hoosaadkiisa, kaas oo uu ku nidaaminayo habsami u socodka hawlihiisa. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaana lagu xeeriyay in Goleyaasha Baarlamaanka mid walba yeelanayo xeer hoosaad u gaar ah. |
| | (2) Kulammada Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare iyo guddiyadooduba waa inay u furanyihiin dhegeysiga dadweynaha si loo xaqiijyo mabaadi'da daahfurnaanta, marka laga reebo xaaladaha ay lagama maarmaan noqonayso in goluhu yeesho fadhiyo ay albaabadu u xiranyihiin si loo ilaaliyo xaqa | Faqraddan oo asalka Dastuurka ahayd farqadda 5aad, nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib-uhabayn. "fadhiyada" waxaa lagu beddelay "kulammada" |

| | | |
|---|---|---|
| | qofeed ama danta qaranka kaas oo uu qeexayo xeer hoosaadkiisu. | waxaa kale oo lagu daray "Golaha Aqalka Sare". |
| | **Madaxa Labaad: Kalfadhiyada iyo Maamulka Baarlamaanka Federaalka** | **Madax cusub:** Madaxan wuxuu xeerinayaa Kalfadhiyada iyo Maamulka Baarlamaanka. |
| | **Qodobka 89aad: Kalfadhiyada Baarlamaanka** | Cinwaanka Qodobka 89aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 66aad "Kal-fadhiga Golaha Shacabka Federaalka" iyo Qodobka 74aad "Kal-fadhiga Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka" waa la mideeyey waxaana laga dhigay "Kalfadhiyada Baarlamaanka" |
| | (1) Baarlamaanka Federaalka ee la doortay, fadhigiisa koowaad waa inuu ku qabsoomaa soddon (30) maalmood gudahood kaddib marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada guud. Taariikhda fadhiga la qabanayo waxaa goynaya Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha. | Faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin. "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay "Magaca Guddiga waxaa lagu daray "Qaranka iyo Soohdimaha" |
| | (2) Baarlmaanka Federaalku wuxuu yeelanayaa sanadkiiba labo kalfadhi oo caadi ah oo ugu yaraan midkiiba soconayo afar (4) bilood. | Faqradda 2aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqatoosin. Sidoo kale, "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay "Baarlamaanka Federaalka". |

| | | |
|---|---|---|
| | (3) Xeer hoosaadka wadajirka ah ee Barlamaanka Federaalka ayaa lagu xaddidayaa waqtiyada iyo taariikhda kalfadhiyada caadiga ah ee labada gole iyo xilliyada fasaxa; | Faqradda 3aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin. "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay "Baarlamaanka Federaalka". Ereyga "Nasashada" waxaa lagu beddelay "fasaxa". |
| | (4) Mid ka mid ah labada gole ee Barlamaanka Federaalku wuxuu yeelan karaa fadhiyo aan caadi ahayn haddii:<br>a) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku isugu yeero;<br>b) Guddoomiyaha Goluhu isugu yeero; ama<br>c) Ay codsi qoraal ah ku weyddiistaan ugu yaraan boqolkiiba soddon (30%) xubnaha gole walba ama xubnaha hal Dawlad Goboleed ee ku matalaya Golaha Aqalka Sare. | Faqradda 4aad waxay xeerinaysaa marxaladaha ay golayaasha Baarlamaanka Federaalku yeelan karaan fadhiyo aan caadi ahayn. Xarafka (a) waxaa laga tiray "kaddib marka uu helo codsi ka yimaada Golaha Wasiirrada". "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay "xubnaha golaha". Sidoo kale, Xarafka (c) waxaa lagu daray "ama xubnaha hal Dawlad Goboleed. |
| | (5) Fadhiyada golaha ee labada gole midkood waxaa shir-guddoominaya:<br>a) Guddoomiyaha Golaha; ama<br>b) Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad marka uu maqanyahay Guddommiyaha Golaha, ama<br>c) Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Golaha, haddii ay seddexdooduba maqan yihiin waxaa shirguddoominaya xubinta ku xusan Xeer Hoosaadka Golaha. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddaan waxay xeerinaysaa shir guddoonka golaha waxayna tilmaaysaa in golaha uu shir-guddoominayo oo keliya Guddoomiyaha, haddii u maqanyahay Guddoomiye ku xigeenka 1aad, ama 2aad ama xubinta ku xusan Xeer Hoosaadka golaha. |

| | Qodobka 90aad: Shuruudaha Doorashada Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka | Qodob cusub: Qodobkan wuxuu xeerinayaa shuruudaha doorashada guddoonka labada gole. |
|---|---|---|
| | (1) Shuruudaha Xilka Guddoomiyaha iyo Ku-xigeennadiisa waa:<br>a) in uu xubin ka yahay golaha uu ka sharraxanyahay;<br>b) in da'da musharraxa Guddoonka labada gole aysan ka yaraan soddon iyo shan (35) sano;<br>c) in labadiisa waalid ay yihiin muwaaddiniin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>d) in uusan/aysan qabin xaas/nin ajnabi ah;<br>e) In musharraxa haysata jinsiyad dal kale uu caddeeyo ka noqoshada jinsiyaddaas haddii uu ku guulaysto guddoonka mid ka mid ah labada gole ee Baarlamaanka Federaalka;<br>f) In uu caddeeyo hantida uu leeyahay una gudbiyo hab qoraal ah xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo<br>g) Shuruudaha kale ee ku xusan xeerarka kale ee dalka | **Faqrad cusub:**<br><br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa shuruudaha looga baahanyahay in uu buuxiyo qofkii raba in loo doorto guddoonka labada gole ee Baarlamaanka Federaalka midkood. |
| | (2) Guddoonku inta uusan qaban xilka xafiiska Guddoonka mid ka mid ah labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka waa in uu ka tanaasulo xil kasta oo rasmi ah oo uu ka hayo xisbi siyaasadeed, xilkiisana u guto si dhexdhexaad ah. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxaa laga soo raray Qodobka 65(3) ee asalka Dastuurka waxayna xeerinaysaa in guddommiyaha loo doorto mid ka mid ah labada gole ee Barlamaanka Federaalka inta uusan qaban xilka looga |

| | | |
|---|---|---|
| | | baahanyahay in uu si rasmi ah uga tanaasulo xilkasta oo uu ka hayey xisbi siyaasadeed, waajibaadkiisana u guto dhexdhexaadnimo. |
| | **Qodobka 91aad: Doorashada Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka** | Qodobka 91aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ku kala jiray Qodobbada 65aad iyo 73aad waxaa lagu mideeyay qodobkan. Cinwaankana waxaa laga dhigay "Doorashada Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka" |
| | (1) Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare, kulammadooda koowaad, oo uu guddominayo xildhibaanka ama sanatarka ugu da'da weyn, Gole kasta wuxuu gaarkiisa iska dhex dooranayaa Guddoomiye iyo labo (2) ku-xigeen. | Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa in kulanka koowaad ee gole kasta uu shirguddoominayo xubinta ugu da'da weyn. Sidoo kale in labada gole ee Baarlamaanka mid kasta kulankiisa koowad ku dooranayo guddoomiye iyo laba (2) kuxigeen. |
| | (2) Guddoomiyaha iyo ku-xigeennada gole kasta waxaa codayn qarsoodi ah ku dooranaya xubnaha golihiisa, ayada oo la raacayo habraaca soo socda:<br><br>(a) Wareegga koowaad musharraxii hela saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee golaha uu ka tirsanyahay ayaa guulaysanaya. Haddii la waayo | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddani waxay xeerinaysaa habraaca lagu dooranayo guddoonka labada gole ee Baarlamaanka Federaalka.<br><br>***Xarafka (a)*** wuxuu tilmaamayaa in musharraxa hela saddex |

| | | |
|---|---|---|
| | musharrax guulaysta, waxaa loo gudbayaa wareeg labaad;<br><br>(b) Wareegga labaad waxaa u soo gudbaya afarta musharraax ee ugu codka badan wareegga koowaad. Musharraxii hela cod aqlabiyad boqolkiiba konton iyo hal dheeri (50%+1) tirada guud ee xubnaha golihiisa ayaa ku guuleysanaya doorashada. Haddii la waayo musharrax guulaysta waxaa loo gudbayaa wareeg saddexaad.<br><br>(c) Wareegga saddexaad waxaa u soo gudbaya labada musharrax ugu codka badan wareeggii labaad, waxayna ku kala guulaysanayaan cod hal dheeri ah ee tirada guud ee golaha. | meelood laba (2/3) tirada guud ee golaha uu ka tirsanyahay uu guulaysanayo. Haddii la waayo qof ku guulaysata wareegga koowaad ee codaynta in afarta musharrax ee ugu codka badan u gudbi doonaan wareegga labaad.<br><br>***Xarafka (b)*** wuxuu xeerinayaa habraaca doorashada wareegga labaad ee codbixinta iyo in lagu kala guulaysanayo boqolkiiba konton iyo hal dheeri (50%+1). Haddii aan musharraxna ku guulaysan wareeggan waxaa loo gudbayaa wareeg saddexaad oo codeyn ah.<br>***Xarafka (c)*** wuxuu tilmaamayaa habraaca doorashada wareegga saddexaad ee ugu dambeeya doorashada guddoonka labada gole, waxayna caddeynaysaa in labada musharrax ee ugu codka badan u gudbayaan wareegga saddexaad, uuna guulaysanayo musharraxa hela cod hal dheeri ah ee tirada guud ee golaha. |

| | Qodobka 92aad: Xilwaayidda Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka | Qodob cusub: Qodobka 92aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa mid cusub oo la soo kordhiyay. |
|---|---|---|
| | (1) Guddoomiyaha iyo labada Ku-xigeen waxay xilka ku lumin karaan:<br>a) Geeri;<br>b) Xilgudasho la'aan joogto ah sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed oo uu caddeeyay dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsanyahay;<br>c) Khayaano qaran;<br>d) Iscasilaad qoraal ah uu u gudbiyo golaha lagana aqbalo; iyo<br>e) Ku xadgudub weyn oo joogto ah ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo Xeer hoosaadka Golaha; | **Faqrad cusub:** Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa sababaha ay guddoomiyayaasha golayaasha Baarlamaanka iyo ku-xigeennadooda xilka ku waayi karaan. Sababaha xilwaayidda waxaa ka mid ah geeri, xilgudasho la'aan joogto ah sababo jireed ama maskaxeed, istiqaalo loo gudbiyo golaha iyo xadgudub Dastuurka Federaalka. |
| | (2) Xil kaqaadista Guddoonka labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka waxaa soojeedin kara saddex meelood meel (1/3) tirada guud ee golaha uu ka tirsanyahay, soojeedintana lagu horgeeynayo golaha muddo sagaal maalmood gudahood oo ka billaabmaysa taariikhda ay xubnuhu soo gudbiyaan, ayada oo aan lagu sameyn karin hor-istaagid iyo faragelin. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay nidaaminaysaa habka mooshinka xil kaqaadista Guddoonka. |
| | (3) Guddoomiyaha iyo ku-xigeennada waxaa xilka looga qaadi karaa codayn qarsoodi ah oo saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee golaha uu ka tirsanyahay. | **Faqrad cusub:** Faqradda 3aad waxay tilmaamaysaa in guddoomiyaha iyo ku-xigeennadiisa xilka looga qaadi karo codayn saddex |

| | | |
|---|---|---|
| | | meelood laba (2/3) ee tirada guud ee golaha uu ka tirsanyahay. |
| | **Qodobka 93aad: Kulammada Wadajirka Labada Gole** | Qodobka 93aad ee soojeedinta wax-kabeddelka, oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 57aad, cinwaankiisa waxaa laga dhigay "Kulamada Wadajirka ah ee Labada Gole". |
| | (1) Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxay wada yeelanayaan kulammo wadajir ah markii loo baahdo si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka. | Faqraddan oo ahayd xarafka (a) ee qodobka 57aad asalka Dastuurka waxaa lagu sameeyay dib-usiiqayn Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa in Golayaasha Baarlamaanku yeelanayaan kulamo wadajir ah markii loo baahdo si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka. |
| | (2) Kulammada wadajirka ah ee labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka waxaa shirguddoominaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka; marka uu maqan yahayna waxaa shirguddoominaya Guddommiyaha Golaha Aqalka Sare. Haddii ay labadooduba maqan yihiin waxaa shirguddoominaya Guddoomiye Kuxigeenka koowaad ee Golaha Shacabka si waafaqsan Xeer Hoosaadka Baarlamaanka Federaalka. | **Faqrad cusub:** Faqradda 2aad waxay tilmaamaysaa in kulamada wadajirka ah ee labada gole ee BFS uu shirguddoominayo Guddoomiyaha Golaha Shacabka, haddii uu maqanyahayna Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare. Faqraddan waxa kale oo ay xeerinaysaa cidda shirguddoominaysa kulammada wadajirka ah markii labada guddoomiye wada maqanyihiin. |

| | | |
|---|---|---|
| | (3) Go'aannada kulanka wadajirka ee labada gole waxay ku ansaxayaan in ugu yaraan aqlabiyad hal dheeri ah tirada guud ee xubnaha gole walba ay goobjoog yihiin oo codaynaya, haddii aan Dastuurku si kale u dhigin. | **Faqrad cusub:** Faqradda 3aad waxay xeerinaysaa guntanka kulammada wadajirka ah ee labada gole. |
| | (4) Marxaladda codaynta, shir-guddoomiyaha kulanka wadajirka ah ma codeynayo, marka laga reebo haddii codadku barbardhac noqdaan. Xaaladdas keliya ayuu codkiisa dhiiban karaa, dhankii codkiisu maro ayayna aqlabiyaddu raaceysaa. | **Faqrad cusub:** Faqradda 4aad waxay tilmaamaysaa in guddoomiyaha kulanka wadajirka ah ee labada gole uuna codaynayn, marka laga reebo haddii codadku barbardhac noqdaan. Xaaladdaas, dhanka codka guddoomiyuhu aado ayey aqlabiyaddu raacaysaa. |
| | (5) Kulammada wadajirka ah waxaa loo qabanayaa arrimaha ay ka mid yihiin:<br>(a) Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>(b) Miisaaniyad sanadeedka iyo Xisaab-xirka;<br>(c) Furitaanka rasmiga ah ee Kalfadhiyada Baarlamaanka ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka sanadkiiba hal mar.<br>(d) Wax-kabeddel kasta ee Dastuurka Federaalka; iyo<br>(e) Ansixinta xaaladaha degdegga ah iyo xaaladaha dagaalka. | **Faqrad cusub:** Faqradda 5aad waxay tilmaamaysaa arrimaha kulammada wadajirka ah ee labada gole loo qabanayo. Faqraddan waxaa ku jira nuxur ka mid ah faqradda 1aad, Xarafka (c) ee Qodobka 57aad ee asalka Dastuurka. |
| | (6) Ayada oo aan wax loo dhimayn awoodda uu baarlamaanku ku gudanayo waaajibaadkiisa shaqo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka, haddii uu lagama maarmaan u arko, wuxuu guddoonka | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in Madaxweynuhu uu guddoonka |

| | | |
|---|---|---|
| | labada gole ka codsan karaa in la qabto fadhi wadajir ah. | labada gole ka codsan karo fadhi wadajir ah. |
| | (7) Xeer Hoosaadka wadajirka ah ee Baarlamaanka Federaalka ayaa xeerinaya habraacyada kulamada wadajirka ah ee labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in xeer hoosaad wadajir ah ee labada gole lagu nidaaminayo habraaca kulammada wadajirka ah. |
| **Qodobka 62aad. Guddiyada Wadaagga ee Baarlamaanka Federaalka** | **Qodobka 94aad: Guddiyada Baarlamaanka Federaalka** | Qodobka 94aad ee soojeedinta wax-kabeddelka, oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 62aad. |
| (1) Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ahi waxa ay dhisan karaan guddiyo wadaag ah oo hawlahooda u fududeeya. | (1) Labada gole ee Baarlamaanka Federaalka ah waxay dhisan karaan guddiyo wadaag ah, oo hawlahooda u fududeeya. | Faqradda 1aad waxba lagama beddelin oo sideeda ayaa loo qaatay. |
| | (2) Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxay yeelanayaan guddiyo u xilsaaran hawlaha gole kasta si gooni ah u gudanayo. Guddoomiyaha guddi kasta wuxuu ka mid noqonayaa guddiga joogtada ah oo shaqadiisu tahay oo keliya in uu dejiyo ajandayaasha golahiisa. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa dhismaha guddiyada labada Aqal iyo guddiya joogtada ah. |
| (2) Xeer-nidaamiye labada Gole ay wadajir u mariyaan ayaa lagu go'aanminayaa tirada guddiyada iyo habraacyada xil-fulintooda. | (3) Xeer Hoosaadka wadajirka ah ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa go'aaminaya tirada guddiyada iyo habraacyada xilgudashadooda. | Faqradda 2aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin. "Xeer-nidaamiye" waxaa lagu beddelay "xeer-hoosaad", sidoo kale "xil-fulintooda" waxaa lagu beddelay "xilgudashadoodda". Xeer hoosaadka wadajirka ah waxaa |

| | | |
|---|---|---|
| | | tilmaamaya Qodobka 94aad, Faqradda 7aad. |
| | **Qodobka 95aad: Guddiga Adeegga Baarlamaanka** | Qodobka 95aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa laga soo raray Qodobka 111D ee Cutubka 10aad ee asalka Dastuurka. Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin. |
| | (1) Waxaa jiraya Guddiga Adeegga Baarlamaanka Federaalka, oo muddada jiritaankiisu ku sargo'antahay isla muddada xilhaynta Baarlamaanka Federaalka. | Faqradda 1aad waxaa lagu sameeyay dib u qorid iyo siiqayn, waxayna xeerinaysaa in la dhisayo Guddiga Adeegga Baarlamaanka oo muddada uu jirayo ay la socoto muddada xilhaynta Baarlamaanka Federaalka. |
| | (2) Guddiga Adeegga Baarlamaanka wuxuu ka koobanyahay shan (5) xubnood oo ka kala imanaya labada gole ee Baarlamaanka Federaalka, waxayna kala yihiin:<br>(a) Guddoomiyaha Golaha Shacabka, oo noqonaya Guddoomiyaha Guddiga;<br>(b) Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare, oo noqonaya Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga;<br>(c) Laba (2) xubnood oo ay dooranayaan xubnaha Golaha Shacabka, oo ay ugu yaraan hal xubin haween tahay;<br>(d) Hal (1) xubin oo ay dooranayaan xubnaha Golaha Aqalka Sare. | Faqradda 2aad waxay xeerinaysaa tirada xubnaha Guddiga Adeegga Baarlamaanka Federaalka iyo meelaha ay ka kala imaanayaan. Xubnaha faqraddan soojeedinayso waa shan (5) xubnood halka ay asalka Dastuurka ka ahayd sagaal (9) xubnood. |

| | | |
|---|---|---|
| | (3) Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Adeegga Baarlamaanka waxay xubinnimada ku lumin kartaa:<br>(a) Marka ay dhammaato muddada xilhaynta Baarlamaanka; ama<br>(b) Haddii ay xubintu lumiso xubinnimada Baarlamaanka Federaalka. | Faqradda 3aad waxay xeerinaysaa luminta xubinnimada Guddiga Adeegga Baarlamaanka iyo sababaha lagu weyn karo. |
| | (4) Guddiga Adeegga Baarlamanku wuxuu mas'uul ka noqonayaa:<br>a) Diyaarinta qiyaasta kharashka Baarlamanka sannadkiiba hal mar;<br>b) Diyaarinta kulammada wadajirka ah ee labada gole;<br>c) La socodka iyo maaraynta miisaaniyadda iyo kharashaadka ku baxaya adeegyada Baarlamaanka;<br>d) Dejinta siyaasadda lagu hormarinayo aqoonta, xirfadda iyo garaadka xubnaha iyo shaqaalaha Baarlamaanka;<br>e) Xallinta aragti kala duwanaanshaha labada Gole haddii ay soo ifbaxaan; iyo<br>f) Qabashada hawl kasta oo kale oo lagu daryeelayo xubnaha iyo shaqaalaha Baarlamaanka. | Faqradda 4aad oo xeerinaysa masuuliyadda Guddiga Adeegga Baarlamaanka nuxurka waxba lagama beddelin waxaa lagu sameeyay siiqo toosin iyo dib u qorid. Waxaa kale oo lagu soo kordhiyay xarfaha (b), oo tilmaamaysa diyaarinta kulammada wadajirka ah ee labada gole iyo Xarafka (c), oo sheegaya la socodka iyo maaraynta kharashaadka ku baxa adeegyada Baarlamaanka. |
| | (5) Xoghayaha Guddiga Adeegga Baarlamaanka waxaa noqonaya Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare, ayada oo ku-xigeenkiisa uu noqonayo Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka, wuxuuna kaabayaa Guddiga Adeegga Baarlamaanka Federaalka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Xoghayaha Guddiga uu noqonayo Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare, halka uu ku-xigeen u noqonayo Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka. |

| | | |
|---|---|---|
| | (6) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu yeelanayaa sanduuq miisaaniyadeed u gaar ah. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa in Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya yeelanayo sanduuq miisaaniyadeed u gaar ah. |
| | **Madaxa Saddexaad: Awoodaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka** | Cinwaanka Madaxa Saddexaad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa laga dhigay "Awoodaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka". Asalka Dastuurka waxa uu ahaa "Madaxa Labaad: Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka". |
| **Qodobka 63aad: Awoodaha Xeer-dejinta Golaha Shacabka** | **Qodobka 96aad: Awoodaha u Gaarka ah Golaha Shacabka** | Cinwaanka Qodobka 96aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 63aad. Ereyga "xeer-dejinta" waxaa lagu beddelay ereyada "u gaarka ah". |
| Golaha Shacabku ee Baarlamaanka Federaalku wuxuu matilaa dhammaan shacabka Soomaaliya, Awoodda sharci-dejinta ee Golaha shacabku keligii leeyahay waxaa ka mid ah:<br><br>(a) Ka-qaybgalka wax ka beddelidda Dastuurka, si waafaqsan Cutubka 15aad;<br>(b) Ansixinta, wax ka beddelidda iyo diidmada sharciyada la horgeeyo, si waafaqsan Cutubkan iyo Cutubka15aad; | Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka wuxuu gaar u leeyahay awoodaha soo socda:<br><br>(a) Kalsooni siinta Ra'iisul Wasaaraha, Golaha Wasiirrada iyo Baarnaamijaka Xukuumadda;<br>(b) Xilkaqaadidda Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada si waafaqsan Qodobka 128aad ee Dastuurka;<br>(c) Doorashada Guddoomiyaha iyo labada ku-xigeen; | Faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, balse waxaa lagu sameeyay dib u siiqayn iyo hagaajin waxayna xeerinaysaa awoodaha gaarka ah ee Golaha Shacabka.<br><br>***Xarafka (a)*** wuxuu tilmaamayaa Kalsooni-siinta Ra'iisul Wasaaraha, Golaha Wasiirrada |

| | | |
|---|---|---|
| (c) Ka-baaraandegidda sharciyada uu ansixiyo Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka;<br>(d) U-igmashada Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka awoodaha sharci-dejinta marka laga reebo wax ka beddelidda Dastuurka. | (d) Ansixinta magacaabista Guddiga Madaxabannaan ee Ladagaalanka Musuqmaasuqa;<br>(e) Ansixinta magacaabista Guddiga Madaxabannaan ee Shaqaalaha Rayidka ah;<br>(f) Eedaynta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka; iyo<br>(g) Hawl kasta ee kale oo Dastuurku ama xeerarka kale ee dalka u xilsaaraan. | iyo Baarnaamijaka Xukuumadda; ay tahay awood uu gaar u leeyahay Golaha Shacabka.<br><br>***Xarafta (b)*** wuxuu tilmaamayaa xilkaqaadista Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada<br><br>***Xarafka (c)*** wuxuu tilmaamayaa awoodda Golaha Shacabka ee doorashada guddoomiyaha iyo ku-xigeennadiisa.<br><br>***Xarafka (d)*** wuxuu tilmaamayaa ansixinta Guddiga Ladagaalanka Musuqmaasuqa uu ansixinayo Golaha Shacabka.<br><br>***Xarafka (e)*** wuxuu tilmaamayaa ansixinta magacaabista Guddiga Madaxabannaan ee Shaqaalaha Rayidka ah.<br><br>***Xarafka (f)*** waxa uu tilmaamayaa in Golaha Shacabku gaar u leeyahay awoodda eedaynta Madaxweynaha.<br><br>***Xarafka (g)*** waxa uu tilmaamayaa in awoodaha gaarka ah ee Golaha Shacabka ay ka mid |

| | | |
|---|---|---|
| | | tahay hawl kasta oo Dastuurka ama xeerarka kale ee dalku u xil saaraan. |
| **Qodobka 64aad. Tirada xubnaha Golaha Shacabka** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 82aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| (1) Xubnaha Golaha Shacabka waxaa si toos ah, qarsoodi ah, oo madaxbanaani ku dooranaya shacabka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya. | | |
| (2) Tirada xil-dhibaannada caadiga ah ee Golaha Shacabka (Aqalka Hoose) ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa Laba boqol shan iyo todobaatan (275). | | |
| (3) Tirada guud ee xubnaha Golaha shacabka waa in ay matilaad isu dheellitiran ku yeeshaan dhammaan qaybaha bulshada | | |
| (4) Qof kasta oo noqda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya, marka uu xilka banneeyo, wuxuu noqonayaa xildhibaan Golaha Shacaba inta uu nool yahay haddii aan xil-ka-qaadis lagu samayn iyadoo aanay muddadii xil-hayntiisu dhammaan si waafaqsan qodobka 92aad ee Dastuurkan, tirada xildhibaanadana dheeraad ayuu ka yahay | | |
| **Qodobka 65aad: Guddoomiyaha iyo Ku-xigeennada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 91aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| (1) Golaha Shacabka, fadhigiisa koowaad oo uu guddoominayo qofka ugu da'da weyn, waa inuu | | |

| | | |
|---|---|---|
| iska dhex doorto Guddoomiye iyo laba (2) Ku-Xigeen. | | |
| (2) Haddii ay dhacdo waqtiyada qaar in ay maqanaadaan Guddoomiyaha iyo ku-xigeennadiisu, Goluhu waa in uu mid ka mid ah xubnihiisa u doortaa in uu noqdo shir-gudoomiye ku- meel-gaar ah. | | |
| (3) Guddoomiyuhu inta uusan qaban xilka waa in uu ka tanaasulo xil kasta oo uu ka hayo xisbi siyaasadeed, waana in uu noqdo dhexdhexaad marka uu gudanayo/gudaneyso xilalkiisa/xilalkeeda. | | |
| (4) Guddoomiyaha iyo ku-xigeennadiisa waxaa codayn qarsoodi ah ku doorta aqlabiyadda tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka ee Federaalka ah, xilkana kaga qaada codbixinta saddex dalool laba dalool xubnaha Golaha Shacabka Federaalka ah. | | |
| **Qodobka 66aad: Kal-Fadhiyada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 83aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| (1) Golaha Shacabka ee Federaalka ah ee cusub, fadhigiisa koowaad waa inuu ku qabsoomaa soddon (30) maalmood gudahood kaddib marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada guud. Taariikhda fadhiga la qabanayo waxaa goynaya Guddiga Qaranka ee Madax Bannaan ee Doorashooyinka. | | |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Golaha Shacabku ee Federaalka ihi waa inuu sannad kasta yeeshaa labo kalfadhi oo caadi ah oo ugu yaraan midkiiba socdo afar (4) bilood. | | |
| (3) Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka Federaalka ah ayaa lagu xaddidayaa waqtiyada iyo taariikhda kalfadhiyada caadiga ah ee Golaha Shacabka iyo xilliyada nasashada. | | |
| (4) Golaha Shacabku wuu yeelan karaa Kalfadhiyo aan Caadi ahayn haddii:<br>(a) Madaxweynaha Federaalku isugu yeero, ka dib marka uu helo codsi ka yimaada Golaha Wasiirrada;<br>(b) Guddoomiyaha Goluhu isugu yeero;<br>(c) Haddii ay codsi qoraal ku weydiistaan ugu yaraan boqolkiiba labaatan (20%) xubnaha Golaha Shacabka ee Federaalku. | | |
| **Qodobka 67aad. Kala-dirista Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 87aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| Lama kala diri karo Golaha Shacabka ka hor dhammaadka muddadiisa afarta sano ah marka laga reebo haddii uu Goluhu awoodi waayo in uu ansixiyo golaha wasiirrada iyo barnaamijka Dawlada sida ku xusan qodobka 100aad (c) ee Dastuurkan | | |
| **Qodobka 68aad: Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 88aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| (1) Golaha Shacabku ee Baarlamaanka Federaalka ah waa in uu samaystaa xeer-hoosaadkiisa, kaas oo siinaya ka-qaybgal buuxa xubnihiisa. | | |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Golaha Shacabku ee Baarlamaanka Federaalka ah wuxuu isu qaybinayaa guddiyo u kala xilsaaran hawlihiisa. | | |
| (3) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah marka la horkeeno sharci qabyo ah wuxuu u xil-saarayaa guddiga qaabilsan, si uu uga soo baaraandego, talana uga soo jeediyo fadhiga loo dhan yahay ee Golaha | | |
| (4) Sharci qabyo ah oo Goluhu diidey dib looguma soo celin karo Golaha ilaa ay ka soo wareegato soddon (30) maalmood maalinta Goluhu diidey. | | |
| (5) Fadhiyada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah iyo guddiyadiisaba waa inay u furan yihiin dhegeysiga dadweynaha iyada oo maanka lagu hayo mabaadii'da guud ee daahfurnaanta Dawladda. Xeer-hoosaadka Golaha waa inuu qeexo mararka ay lagama maarmaan noqonayso in Golaha Shacabku yeesho fadhiyo ay albaabadu u xiranyihiin. | | |
| **Qodobka 69aad: Awoodaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 96aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| (1) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah wuxuu leeyahay awood sharci-dejin oo ah:<br>(a) Inuu ansixiyo, wax ka beddelo ama diido sharciyada la horkeeno;<br>(b) Inu curiyo sharci kasta oo cusub oo aan ka ahayn | | |

| | | |
|---|---|---|
| (2) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka waxaa kale oo uu leeyahay awoodahan dheeriga ah ee soo socda:<br>(a) Inuu oggolaado ama diido guddiyada madaxa bannaan ee ra'iisul wasaarahahor-keeno Golaha Shacabka;<br>(b) Awoodda la-xisaabtaanka iyo kor-joogtaynta hay'dahaDawladda ee Heerka Qaranka, gaar ahaan dhinaca hubinta dhaqangelinta sharciyada dalka;<br>(c) U yeeridda Ra'isul Wasaaraha xubnaha golaha wasiirrada, Gudoomiyayaasha Guddiyada Qaranka iyo Xafiisyada Madaxa Bannaan, Mas'uulkastaoo uu u hoggansami waaya u-yeeridda, wuxuu Golaha Shacabku awood u leeyahay inuu dib-u-eegid ku sameeyo xilkiisa;<br>(d) Inuu Ra'isul Wasaaraha xubnaha Golaha Wasiirrada iyo barnaamijika xukumadda kalsooni ku siiyo codayn gacan-taag ah ee aqlabiyadda tirada guud ee Golaha Shacabka 50% +1;<br>(e) Inuu cod aqlabiyadda tirada guud ee Golaha Shacabka 50% +1 oo gacan-taag ah kalsoonida Golaha Shacabka ugala noqdo Ra'iisul Wasaaraha iyo ku- xigeenka/kuxigeennada Ra'iisul Wasaaraha;<br>(f) Doorashada iyo xil-ka-qaadidda Madaxweynaha sida ku cad Dastuurka;<br>(g) Hirgelinta muhiimadaha kale ee uu u oggolaadey Dastuurku, si loo hubiyo dhaqan-gelin habboon iyo dib-u-eegid Dastuurka. | | |

| **Qodobka 70aad: Xasaanadda Xildhibaannada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 86aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
|---|---|---|
| (1) Xildhibaanka Golaha Shacabka dhibaato kama soo gaari karto fikradda ama codka uu ka hor dhiibto Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah iyo guddiyadiisa. | | |
| (2) Haddii aan laga haysan oggolaansho Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah, Xildhibaanka laguma qaadi karo dacwad ciqaabeed; lama xiri karo lamana baari karo qof ahaan, hoygiisa ama meeshii kale ee u gaar ah, haddaan lagu qaban isagoo faraha kula jira dembi sharci ahaan khasab ay tahay in laga soo saaro amar qabasho ah. Sidoo kale haddii aan laga helin oggolaansho Golaha Xildhibaanka lama qaban karo, xabsina laguma hayn karo iyadoo la fulinaayo xukun maxkamadeed oo xataa kama dambays ah. | | |
| (3) Dacwad aan ahayn mid ciqaabeed Xildhibaanka waa lagu furi karaa, iyadoo aan oggolaansho la weydiisan Golaha Shacabka. | | |
| (4) Sharci gaar ah ayaa qeexaya xasaanadda Xilidhibaanada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka. | | |
| (5) Gunnooyinka iyo daryeelka kale ee ay xaqa u leeyihiin Xildhibannada Golaha Shacabka waxaa laga bixinaya Khasnadda Dhexe ee Xukuumadda Federaalka. | | |

| Qodobka 71aad: Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | Qodobka 97aad: Awoodaha u Gaarka ah Golaha Aqalka Sare | Cinwaanka Qodobka 97aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa laga dhigay "Awoodaha Golaha Aqalka sare u Gaarka ah". Asalka Dastuurka waxa uu ahaa Qodobka 71aad "Aqalka Sare ee Baarlamaanka". |
|---|---|---|
| (1) Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku wuxuu matalaa Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, masuuliyadihiisa sharci-dejintaba waxaa ka mid ah:<br>(a) Ka qayb qaadashada wax ka beddelidda Dastuurka, si waafaqsan Cutubka 15aad;<br>(b) Ansixinta, wax ka beddelidda iyo diidmada sharciyada la horkeeno, si waafaqsan Qodobbada 82-83;<br>(c) Eegidda sharciyada loo igmadey si waafaqsan Qodobbada 82-83;<br>(d) Ka qayb qaadashada doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 89aad;<br>(e) Xil ka qaadida Madaxweynaha si waafaqsan Qodobka 92aad;<br>(f) Ka qayb qaadashada habraaca ku-dhawaaqista xaalad dagaal si waafaqsan Dastuurkan;<br>(g) Hirgalinta muhiimadaha kale ee uu u oggolaaday Dastuurka si loo hubiyo dhaqangalin habboon iyo dib-u-eegid Dastuurka; | (1) Golaha Aqalka Sare wuxuu matalaa Dawlad Goboleedyada, awoodihiisa waxaa ka mid ah:<br>(a) Ansixinta dhismaha Dawlad Goboleedyada;<br>(b) La-xisaabtanka iyo Korjoogtaynta Dawlad Goboleedyada;<br>(c) Ansixinta iyo oggolaanshaha soo dhexgalka Dawlad Goboleedka;<br>(d) Ilaalinta nidaamka federaalka iyo midnimada qaranka;<br>(e) Xallinta khilaafaadka soo kala dhexgala hay'adaha Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada ama Dawlad Goboleedyada dhexdooda;<br>(f) Xil kaxayuubinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka;<br>(g) Ansixinta magacaabista soo socota:<br>i. Danjirayaasha; iyo<br>ii. Taliyeyaasha Ciidanka.<br>(h) Hawl kasta ee kale oo Dastuurku ama xeerarka kale ee dalka u xilsaaraan. | Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa in Golaha Aqalka Sare uu matalo Dawlad Goboleedyada, waxayna taxaysaa awoodaha gaarka ah ee Golaha Aqalka Sare. Awoodahaas waxaa ka mid ah, ansixinta dhismaha Dawlad Goboleedyada; la xisaabtanka iyo korjoogtaynta Dawlad Goboleedyada; ansixinta iyo oggolaashaha faragelinta Dawlad Goboleedyada; ilaalinta midnimada federaalka iyo midnimada qaranka; khilaafka soo kala dhexgala Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada iyo Dawlad Goboleedyada dhexdooda, xil kaxayuubinta Madaxweynaha JFS; iyo fulinta xilalkii kale oo Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka u xilsaaraan. |

| | | |
|---|---|---|
| (h) Ka qayb qaadashada habraaca ku dhawaaqa xaalad deg-deg ah si waafaqsan Dastuurkan; iyo<br>(i) Ka qayb qaadashada nidaamka lagu magacaabayo xubnaha soo socda ee ha'aydaha Dawladda ee soo socda si waafaqsan Dastuurkan:<br>i. Xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka;<br>ii. Guddoomiyaha iyo Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuuriga ah;<br>iii. Xubnaha Guddiga Qaranka ee Madax-bannaan ee Doorashooyinka;<br>iv. Xubnaha Guddiga Xuduudaha iyo Federaalaynta;<br>v. Xubnaha Guddiga Xalinta Khilaafaadka. | | |
| **Qodobka 72aad: Tirada Xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 83aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| Xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waxaa si toos ah, qarsoodi ah oo madaxbannaan u dooranaya shacabka Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, tiradoodana waa ugu badnaan konton iyo afar (54) Xildhibaan oo ka imaanaya toban iyo sideed (18) gobol ee Soomaaliya lahayd ka hor 1991kii, iyada oo saldhig looga dhigayo:<br>(a) Tirada Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka;<br>(b) Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxay Aqalka Sare ku yeelanayaan xubno tiro isle'eg ah; | | |

| | | |
|---|---|---|
| (c) Tirada guud ee xubnaha Golaha Aqalka Sare waa in ay matilaad isu dheellitiran ku yeeshaan dhammaan qaybaha bulshadu. | | |
| **Qodobka 73aad: Guddoomiyaha iyo ku-xigeenada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 92aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waxaa loo doortaa xilkana looga qaadaa habraac la mid ah kan Guddoomiyaha/Ku Xigeenada Golaha Shacabka. | | |
| **Qodobka 74aad: Kalfadhiyada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 90aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| (1) Golaha cusub ee Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka, fadhigiisa koowaad waa inuu ku qabsoomaa 30 maalmood gudahood, kaddib marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada guud. Taariikhda fadhiga la qabanayo waxaa goynaya Guddiga Qaranka ee Madax-bannaan ee Doorashooyinka. | | |
| (2) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waa inuu sannad kasta yeeshaa labo kalfadhi oo caadi ah oo ugu yaraan midkiiba socdo afar (4) bilood. | | |
| (3) Xeer-hoosaadka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ayaa lagu xaddidayaa, waqtiyada iyo taariikhda kalfadhiyada caadiga ah ee Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka iyo xilliyada nasashada. | | |

| | | |
|---|---|---|
| (4) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka wuu yeelan kara Kalfadhiyo aan Caadi ahayn haddii:<br>(a) Ra'iisul-wasaaraha isugu yeero;<br>(b) Guddoomiyaha Goluhu isugu yeero;<br>(c) Haddii ay codsi qoraal ku weydiistaan ugu yaraan laba (2) Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka. | | |
| **Qodobka 75aad: Xeer-hoosaadka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka** | | Qodobkan waxaa loo raray Qodobka 87aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| (1) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku waa in uu samaystaa xeer-hoosaadkiisa, kaas oo ka-qaybgal buuxa siinaya xubnihiisa. | | |
| (2) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu isu qaybinayaa guddiyo u kala xilsaaran hawlihiisa. | | |
| (3) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka marka la horkeeno sharci qabyo ah wuxuu u xilsaarayaa guddiga qaabilsan si uu uga soo baaraandego talana uga soo jeediyo fadhiga loo dhanyahay ee Golaha. | | |
| (4) Sharci qabyo ah oo Goluhu diiday dib looguma soo celin karo Golaha ilaa ay ka soo wareegato soddon (30) maalmood maalinta Goluhu diiday. | | |
| (5) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka iyo guddiyadiisuba waa inay u furan yihiin dhegeysiga dadweynaha iyada oo maanka lagu hayo mabaadii'da guud ee daahfurnaanta Xukuumadda. | | |

| Qodobka 76aad: Go'aan- qaadashada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka | | Qodobkan waa la tiray: |
|---|---|---|
| (1) Haddii aan Dastuurku si kale u sheegin, xubin walba oo ka tirsan Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ahi waxay yeelaneysaa hal cod. | | |
| (2) Haddii aan Dastuurku si kale u sheegin, go'aamada Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ihi waxay ku ansaxayaan codad aqlabiyad ah marka loo eego tirada guud ee xubnaha aqalka. | | |
| **Qodobka 77aad: Ka-qaybgalka Wasiirrada ee Fadhiyada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka** | | **Qodobkan waa la tiray:** |
| (1) Wasiirradu waxay ka soo qayb geli karaan fadhiyada, kana hadli karaan, iyaga oo aan cod ku lahayn. Xeer-hoosaadka Aqalka Sare ee Baarlamaanku Federaalka ah wuxuu oggolaan karaa in kalfadhiyada caadiga ah ay wasiirradu, qoraal ama tiraab, kaga jawaabaan su'aalaha xubnaha. | | |
| (2) Golaha Aqalka Sare ama Guddiyada Golaha Baarlamaanka Aqalka Sare waa ay u yeeri karaan Ra'iisul Wasaaraha iyo xubnaha Golaha Wasiirrada si ay wax uga weydiiyaan arrimaha xilkooda la xiriira. | | |
| (3) Golaha Baarlamaanka Aqalka Sare ama Guddiyadiisu waa in ay si qoraal ah ugu diraan arrimaha ay ugu yeeranayaan ugu yaraan toddobaad ka hor maalinta ay u muddeeyeen. | | |

| | | |
|---|---|---|
| **Qodobka 78aad: Xasaanadda Xubnaha Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka** | | Qodobka waxaa loo raray Qodobka 87aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| (1) Xubnaha Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku waxay leeyihiin xasaanad la mid ah tan xubnaha Golaha Shacabka sida ku xusan Dastuurkan. | | |
| (2) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka lama kala diri karo. | | |
| | **Qodobka 98aad: Awoodaha Wadaagga ah ee Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka** | Cinwaanka Qodobka 98aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa laga dhigay "Awoodaha Wadaagga ah Golayaasha Baarlamaanka Federaalka". |
| | Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka waxay leeyihiin awoodaha wadaagga ah ee soo socda:<br><br>(a) Curinta, ansixinta, wax-kabeddelidda xeerarka ama diidmada hindise xeereed ee la horkeeno si waafaqsan habraaca xeer-dejinta ee ku xusan Dastuurka;<br>(b) Ka qaybgalidda wax-kabeddelka Dastuurka si waafaqsan habraaca wax-kabeddelka Dastuurka;<br>(c) Ansixinta, diidmada ama ka bixidda heshiisyada xukuumaddu gashay ama heshiisyada caalamiga ah;<br>(d) Ansixinta magacaabista Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Guddoomiyaha | Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa awoodaha wadaagga ah ee Golayaasha Baarlamaanka.<br><br>***Xarafka (a)*** waxa uu xeerinayaa in awoodaha wadaagga ah ay ka mid yihiin curinta, ansixinta, wax-kabeddelka xeerarka ama diidmada hindise xeer oo la horkeeno si waafaqsan habraaca xeer dejinta ee ku xusan Dastuurka.<br><br>***Xarafka (b)*** wuxuu tilmaamayaa awoodda wadaagga ah ee ka |

| | | |
|---|---|---|
| | Maxkamadda Dastuurka, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo xubnaha kale ee Golaha Sare ee Garsoorka;<br>(e) Ansixinta magacaabista Guddoomiyaha Bankiga Dhexe;<br>(f) Ansixinta Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha;<br>(g) Ansixinta Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka;<br>(h) Ansixinta Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka;<br>(i) La-xisaabtanka iyo korjoogtaynta hay'adaha Dawladda Federaalka, si loo xaqiijiyo dhaqangalka xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>(j) Ansixinta ama diidmada ku dhawaaqidda xaalad degdeg ah iyo mid dagaal si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka. | qaybgalidda wax-kabeddelka Dastuurka si waafaqsan habraaca wax-kabeddelka Dastuurka.<br><br>***Xarafka (c)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta, diidmada ka bixidda heshiisyada xukuumaddu gashay ama heshiisyada caalamiga ah.<br><br>***Xarafka (d)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta iyo magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo xubnaha kale ee Golaha Sare ee Garsoorka.<br><br>***Xarafka (e)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta Guddoomiyaha Bankiga Dhexe.<br><br>***Xarafka (f)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.<br><br>***Xarafka (g)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta Guddiga |

| | | |
|---|---|---|
| | | Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka.<br><br>***Xarafka (h)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka;<br><br>***Xarafka (i)*** wuxuu xeerinayaa la-xisaabtanka iyo korjoogtaynta hay'adaha Dawladda ee heer Federaal.<br><br>***Xarafka (j)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta ama diidmada ku dhawaaqidda xaalad degdeg ah iyo mid dagaal. |
| | **Qodobka 99aad: Korjoogtaynta iyo Baaritaanka Baarlamaanka Federaalka** | **Qodob cusub:**<br>Wuxuu nidaaminayaa korjoogtaynta iyo Baaritaanka Baarlamaanka. |
| | (1) Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxay awood u leeyihiin korjoogtaynta iyo kormeerka hay'ada dawladda. | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 1aad waxay tilmaamaysaa in labada Gole ee Baarlamaanka ay leeyihiin awood korjoogtayn iyo kormeer. |
| | (2) Labada Gole ama Guddiyadda Baarlamaanka waxa ay u yeeri karaan xubnaha Golaha Wasiirrada. Wasiirraduna waxaa waajib ku ah in ka soo qaybgalaan fadhiyada baarlamaanka. Xeer hoosaadka Goluhu wuxuu oggolaan karaa in | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysa in mid ka mid ah labada Gole u yeeri karo wasiirrada, faqraddan waxay sidoo kale xeerinaysa |

| | | |
|---|---|---|
| | kalfadhiyada caadiga ah ay wasiirradu qoraal ama tiraab, kaga jawaabaan su'aalaha xubnaha Golaha. Wasiirradu waa in ay ku dedaalaan niyad iskaashi inay kalfadhiyada uga soo qaybgalaan. | habka laga rabo wasiirrada inay uga qeybgalaan. |
| | (3) Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka waxay leeyihiin awood baaritaan ee la xiriirta arrimaha soo socda:<br>(a) Arrin kasta oo ku jirta awoodda golahaas; iyo<br>(b) Habdhaqanka qof, hay'ad, wasaarad ama waax dawladeed oo loo igmaday waajibaadka ah:<br>i. Fulinta ama hirgelinta xeerarka uu ansixiyay Baarlamaanka Federaalka; ama<br>ii. Maamulka iyo maareynta lacagaha ay labada gole u qoondeeyeen. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay nidaaminaysaa awoodaha baaritaan arrimaha la xiriira awoodaha goleyaasha iyo habdhaqanka mas'uuliyiinta dawladda. |
| | (4) Awoodda baaritaan ee Baarlamaanka Federaalka waxa keliya lagu dhaqangelin karaa ujeeddooyinka hoos ku xusan:<br>(a) In la saxo khaladaadka la xiriira hirgelinta iyo fulinta xeerarka;<br>(b) In la ogaado musuqmaasuq, habacsanaan, ama khasaaraha dhaqaale ee ka dhasha fulinta xeerarka ama maamulka hantida dadweynaha ee ay Baarlamaanku ansixiyeen. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay qeexaysaa ujeedooyinka baaritaanka, oo ah in la helo xog ku saabsan khaladaadka farasamo ee fulinta iyo hirgelinta xeerarka, iyo in helo xog ku saabsan musuqmaasuq iyo habacsannaan ee ka jira hay'adaha dawladda. |
| | (5) Baaritaannada waxaa qaban kara guddi rasmi ah oo uu magacaabo mid ka mid ah labada gole, ama guddi wadajir ah oo uu magacaabo Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare. | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 4aad waxay tilmaamaysaa in hawsha baaritaanka ay qaban karaan mid ka mid ah guddiyada labada gole ama guddi wadajir ah. |

| | | |
|---|---|---|
| | (6) Guddiga baaritaanka fulinaya wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:<br>(a) In uu helo caddayn kasta, ha ahaato qoraal ama af, toos ama dadban, haddii uu u arko inay muhiimtahay ama ay khuseyso baaritaanka, isla markaana uu su'aalo weydiin karo dhammaan cid kasta oo ay khuseeyso ama muhiim u tahay arrinta baaritaanka; iyo<br>(b) In uu u yeeri karo qof kasta si uu u bixiyo caddayn ama u keeno dokumenti ama agab uu gacanta ku hayo; | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 5aad waxay xeerinaysaa awoodaha guddiga ee baaritaannada. |
| | (7) Qofkii ama hay'addii diidda in ay u hoggaansanto u yeeridda, keenista caddaymo ama fulinta qaraarrada Baarlamaanka ama guddiyadooda, wuxuu galayaa xadgudub waxaana laga qaadi karaa tallaabo sharci ah oo ay ka mid tahay xilkaqaadis haddii uu yahay mas'uul dawladeed ama tallaabadii kale oo uu go'aamiyo Baarlamaanka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 6aad waxay nidaaminaysaa tallaabada laga qaadayo qofkii ama ha'yadii u hoggaansami weyda u yeeridda Baarlamaanka. |
| | **Qodobka 100aad: Heshiisyada Caalamiga ah** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Baarlmaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu ansixiyaa ama diidaa heeshiisyada caalamiga ah ee ay Xukuumadda Federaalku gasho ee:<br>a) Saameeya: difaaca, nabadda, gobannimada iyo madaxbannaanida Jamhuuriyadda; ama<br>b) Ku saabsan: siyaasadda, dhaqaalaha, ganacsiga iyo kuwa dawladda u keenaya mas'uuliyad maaliyadeed. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa in Baarlamaanka Federaalku uu ansixiyo ama diido heshiiyada ee ay Xukuumadda Federaalka gasho. |
| | (2) Xukuumadu waa in ay u soo gudbisaa Baarlaamanka Federaalka heshiisyada caalamiga ah ee ay gasho ugu badnaan 60 maalmood, oo ka bilaabaneysa maalinta la | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddani waxay Xukuumadda Federaalka faraysaa in ay |

| | | |
|---|---|---|
| | saxiixay heshiiska, ayadoo baarlamaanka ay waajib ku tahay inuu ku ansixiyo ama ku diido muddo aan ka badneyn 120 maalmood. | Baarlamaanka Federaalka ah ugu gudbiso heshiisyada caalamiga ah, oo ay gasho muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah. Sidoo kale, Baarlamaanka Federaalka waa in uu ugu badnaan 120 maalmood gudahood ku ansixiyo ama diido. |
| | (3) Heshiis caalami ah kama dhaqangeli karo geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya haddii uusan ansixin Baarlamaanka Federaalka. | **Faqrad cusub:** Faqradda saddexaad waxay xeerinaysaa in heshiis caalami ah oo aan Baarlamaanka Federaalku oggolaan, uusan ka dhaqangeli karin geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. |
| | **Madaxa Afaraad: Xeer dejinta Baarlamaanka** | **Madax cusub:** |
| **Qodobka 79aad: Sharci-dejin qabyo ah** | **Qodobka 101aad: Hindise xeereed** | Cinwaanka Qodobka 101aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 78aad, "Sharci-dejin" waxaa lagu beddelay "Hindise xeereed" |
| (1) Si waafaqsan Dastuurka, habraaca sharci-dejintu waa hindise sharciyeed qabyo ah oo ku saabsan:<br>(a) Dib-u-eegidda iyo soo jeedinta wax ka beddelka Dastuurkan dib ugu noqoshada Dastuurkan;<br>(b) Qoridda iyo diyaarinta sharci qabyo ah oo cusub oo aan la xiriirin miisaaniyad-sanadeedda; | (1) Si waafaqsan Dastuurka, hindise xeereed waa soojeedin hindise xeer ku saabsan:<br>a) Wax-kabeddelka Dastuurka;<br>b) Diyaarinta xeer cusub; iyo<br>c) Dib-u-eegis lagu sameeyo xeer hore. | Nuxurka Faqradda 1aad ee qodobkan waxba lagama beddelin ee waxaa lagu sameeyay siiqatoosin iyo dib-uhabayn ayadoo la mideeyay xarfaha (b) iyo (c) si loo kulmiyo nuxurkooda. Faqraddan waxay xeerinaysaa waxa noqon kara hindise-xeer oo ay ka mid yihiin |

| | | |
|---|---|---|
| (c) Soo-jeedinta sharci-qabyo ah oo cusub oo aan la xiriirin miisaaniyad-sanadeedda;<br>(d) Dib-u-eegid sharci hore u jirey. | | wax-kabeddelka Dastuurka; xeer cusub ama dib-u-eegis lagu sameeyo xeer hore. Waxa la tiray ereyada "aan la xiriirin miisaaniyadda sanadlaha", oo ku jirtay xarfaha (b) iyo (c) ee asalka Dastuurka". |
| (2) Ka doodidda sharci qabyo ah oo la xariira wax ka beddelka Dastuurkan waxay ka billabanayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka. | (2) Hindise xeereed kasta wuxuu ka bilaaban karaa mid ka mid ah labada gole ee Baarlamaanka Federaalka, si waafaqsan qodobbada 104aad iyo 105aad ee Dastuurka. | Faqradda 2aad waxay xeerinaysaa in hindise xeer uu ka billaaban karo mid kasta oo ka mid ah labada gole ee Baarlamaanka si waafaqsan awoodaha labada gole ee xeer-dejinta oo ku xusan Qodobbada 104aad iyo 105aad ee Dastuurka. |
| (3) Ka-doodidda sharci kasta oo qabyo ah wuxuu ka bilaaban karaa mid kasta oo ka mid ah labada aqal ee Baarlamaanka | | **Faqraddan waa la tiray:** nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 2aad ee isla qodobkan. |
| **Qodobka 80aad: Curinta sharciyada** | **Qodobka 102aad: Soo Bandhigidda iyo Curinta Hindise Xeereed** | Cinwaanka Qodobka 102aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu asalka Dastuurk ahaa Qodobka 80aad, "Curinta sharciyada" waxaa lagu beddelay "Soo Bandhigidda iyo Curinta Hindise Xeer". |
| (1) Sharci qabyo ah oo heer qaran ah, waxaa curin kara:<br>(a) Golaha Xukuumadda; ama | (1) Hindise xeereed waxaa Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka hor keeni kara:<br>a) Golaha Wasiirrada; | Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa cidda hindise xeereed hor keeni karta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka. |

| | | |
|---|---|---|
| (b) Ugu yaraan toban (10) xildhibaan oo ka mid ah xubnaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah, marka laga reebo sharci qabyo ah oo la xiriira arrimaha miisaaniyadda sanadlaha ah oo Golaha Xukuumadda oo keliyihi curin karo. | b) Ugu yaraan toban (10) xildhibaan oo ka tirsan Golaha Shacabka; ama<br>c) Ugu yaraan toban kun (10,000) oo muwaaddin oo buuxiyey shuruudaha codbixinta. | Nuxurka faqraddan waxba lagama beddelin, waxaana lagu sameeyay dib-uhabayn sidoo kale lagu kordhiyay ***Xarafka (c),*** oo tilmaamaysa in ugu yaraan toban kun (10,000) oo codbixiye ay hindise xeereed horkeeni karaan Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka. |
| | (2) Xukuumadda Federaalka oo keli ah ayaa soojeedin karta hindise xeer oo la xiriira miisaaniyadda sanadlaha ah. | **Faqrad cusub:**<br>Nuxurka qayb ka mid ah faqradda 2aad waxa uu ku jiray Faqradda 1(b) ee asalka Dastuurka. Faqraddan waxa ay xeerinaysaa in Xukuumadda Federaalka Soomaaliya oo keli ah soojeedin karto hindise xeer oo la xiriira miisaaniyadda sanadlaha ah. |
| | (3) Hindise xeereed oo ay dadweynuhu soojeediyaan kama mid noqon karaan arrimaha la xiriira canshuuraha iyo dakhliga dawladda. | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 3aad waa mid cusub, oo tilmaamaysa in hindisaha xeer oo dadweynuhu soojeediyo ayna ka mid noqon karin arrimaha la xiriira canshuuraha iyo dakhliga dawladda. |
| (2) Sharciyada qabyada ah waxaa Golaha Sare ee Baarlamaanka Federaalka ah u soo bandhigi kara:<br>(a) Ugu yaraan hal wakiil oo ka socda Dowladaha Xubinta ka ah Federaalka; ama | (4) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waxaa hindise xeereed u soojeedin kara:<br>(a) Golaha Wasiirrada; | Faqradda 4aad, oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad waxay xeerinaysaa cidda hindise xeer horkeeni karta Golaha |

| | | |
|---|---|---|
| (b) Guddi kasta oo ka mid ah Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ah. | (b) Ugu yaraan shan (5) senatar oo ka tirsan Golaha Aqalka Sare; ama<br>(c) Ugu yaraan senatarrada hal (1) Dawlad Goboleed. | Aqalka Sare, waxaa laga soo kordhiyay xarafka (b) "ugu yaraan shan (5) senatar oo ka tirsan Golaha Aqalka Sare" nuxurkeedana waxba lagama beddelin. |
| | (5) Hindise xeereed kasta wuxuu marayaa saddex akhrin, waxaana ka baaraandagaya guddiga ay khuseyso ee gole kasta ee baarlamaanka, kaas oo ka diyaarinaya warbixin ka hor inta aan doodda la billaabin. | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 5aad waxay tilmaamysaa in hindisuhu uu marayo saddex akhrin, waxayna xeerinaysaa in inta aan dooddda laga billaabin hindise xeer kasta ay ka baaraandegayaan guddiga khuseeya ee Baarlamaanka, isaga oo diyaarinaya warbixin. |
| | (6) Goluhu wuxuu hindise xeereed kasta uga doodayaa, kaddibna ugu codeynayaa si waafaqsan Xeer Hoosaadka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 6aad waxay timaamaysaa in Golayaasha Baarlamaanku hindise xeer kasta ka doodayaan, kaddibna u codeynayaan. |
| **Qodobka 81: Go'aamo Siyaasadeed** | **Qodobka 103aad: Xallinta Khilaafka ee Hindise Xeer** | Qodobka 103aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka, oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 81aad oo cinwaankiisu ahaa *"Go'aammo Siyaasadeed"* waxaa laga dhigay "Xallinta Khilaafka ee Hindise Xeer" oo nuxurka qodobka ka turjumaysa. |

| | | |
|---|---|---|
| (1) Labada Aqal ee Baarlamaankuba way curin karaan Sharci. | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeeda waxaa lagu daray qodobka 102aad ee Soojeedinta. |
| (2) Aqalka Shacabka oo keliya ayaa leh awoodda diidmada sharci qabyo ah. | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeeda waxaa lagu daray qodobka 104aad ee Soojeedinta. |
| (3) Haddii labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah uu dhex yimaado khilaaf ku saabsan sharci qabyo ah, mid kasta oo ka mid ah labada Aqal ayaa Guddi wadajir ah oo ka kooban labada Aqal ugu baaqi kara in uu isku dayo in uu xalliyo khilaafaadka iyo in uu labada Aqal u soo jeediyo sharci qabyo ah oo la is-waafajiyey iyada oo laga duulayo iskaashiga dowladaha ee ay dhigayaan Qodobbada 51aad iyo 52aad. | (1) Haddii labada gole uu ka dhasho khilaaf ku saabsan hindise xeer, waxaa la dhisayaa Guddi Wadajir ah oo labada gole ku yeelanayaan xubno isla'eg si ay xal uga gaaraan. | Faqradda 1aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad waxaa lagu sameeyay toosin iyo dib u habeyn, waxayna xeerinaysaa in haddii khilaaf xeer ka dhexdhasho labada gole in la dhisayo guddi wadajir ah si ay xal u gaaraan.<br>Qaybta danbe ee faqradda 3aad waxaa laga dhigay faqrad 2aad ee hoos ku xusan. |
| | (2) Hannaanka xallinta khilaafaadka waxaa lagu fulinayaa mabda'a iskaashiga sida ku cad Qodobbada 65aad iyo 66aad ee Dastuurka. | **Faqrad cusub:** Faqradda labaad waxaa lagu xeeriyay nuxurka qayb ka mid ah nuxurka Faqradda 3aad ee asalka Dastuurka, waxayna xeerinaysaa in dhexdhexaadinta loo marayo si waafaqsan mabda' iskaashiga si waafaqsan Dastuurka. |
| (4) Golaha Shacabka oo keliya ayaa sharci qabyo ah u diri kara Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, una faafiyo si rasmi ah. | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeeda waxaa lagu daray Qodobbada 104aad iyo 105aad ee Soojeedinta |

| **Qodobka 83aad. Hindise Sharci oo Qabyo ah oo ka bilowday Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka** | **Qodobka 104aad: Hindise Xeereed ka Billowday Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka** | Cinwaanka Qodobka 104aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 83aad, waxaa Ereyga "Sharci" lagu beddelay "Xeer", inta kale cinwaanka waxba lagama beddelin. |
|---|---|---|
| | (1) Hindise xeereed la xiriira awoodaha xeerdejinta gaarka ah ee Dawladda Federaalka iyo kuwa haraaga ah wuxuu ka billaabanayaa Golaha Shacabka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa in hindise xeer kasta oo qabyo ah, lana xiriira awoodaha gaarka ah ee Dawladda Federaalka iyo kuwa haraaga ah uu ka billaabanayo Golaha Shacabka. |
| (1) Golaha Shacabka marka la horkeeno handise sharci qabyo ah waxaa u furan inuu sameeyo mid ka mid ah sida soo socota:<br>(a) Inuu u ansixiyo sharcigaas sida uu yahay ama inuu ansixiyo isagoo wax ka beddelay, markaa loo diro Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka si uu u ansaxiyo;<br>(b) In uu diido, kuna wargeliyo Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka, isagoo raacinaya sababaha loo diidey. | (2) Marka hindise xeereed la horkeeno Golaha Shacabka, Goluhu wuxuu qaadi karaa mid ka mid ah tallaabooyinkan:<br>a) Inuu sidiisa ku ansixiyo ama wax-kabeddelo, kaddibna u gudbiyo Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka; iyo<br>b) Inuu diido, kuna wargeliyo cidda marka hore soo curisay iyo Golaha Aqalka Sare, isagoo raacinaya sababaha loo diiday. | Faqradda 2aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqo toosin. Xarafka (b) ee faqraddan waxaa lagu daray "cidda marka hore soo curisay" oo aan asalka ku jirin. Faqradda waxay xeerinaysaa tallaabooyinka u furan marka Golaha Shacabka la horkeeno hindise xeer qabyo ah. |
| (2) Marka Aqalka Sare uu soo gaaro sharci qabyo ah oo uu soo ansixiyay Golaha Shacabka, waxaa u furan mid ka mid ah arrimaha soo socda: | (3) Marka Aqalka Sare uu soo gaaro hindise xeereed oo Golaha Shacabka soo gudbiyey, waxaa u furan inuu qaado mid ka mid tallaabooyinka soo socda: | Faqradda 3aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad nuxurkeeda waxba lagama |

| | | |
|---|---|---|
| (a) Inuu u ansaxiyo sida Golaha Shacabka; Golaha Shacabku ugu soo gudbiyay sharcigaas ka dibna dib ugu diro<br>(b) In ay ku sameeyaan wax ka beddel iyagoo sababeynaya isbeddeladaa, dibna ugu diraan Golaha Shacabka;<br>(c) In ay diidaan una gudbiyaan Golaha Shacabka iyagoo raacinaya sababaha ay u diideen. | (a) Inuu hindisaha u ansixiyo sida Golaha Shacabku ugu soo gudbiyay, oo aan waxba laga beddelin, kaddibna dib ugu diro Golaha Shacabka;<br>(b) Inuu wax-kabeddel ku sameeyo, kaddibna, ayadoo wax-kabeddelka lagu sameeyay hindisaha oo sababaysan dib ugu dira Golaha Shacabka; iyo<br>(c) Inuu diido hindisaha xeerka, kaddibna dib ugu diro Golaha Shacabka, isaga oo raacinaya sababaha diidmada. | beddelin waxaa lagu sameeyay dibu-habayn. Faqraddan waxay xeerinaysaa in marka uu Golaha Aqalka Sare soo gaaro hindise xeer qabyo ah oo ka billowday Golaha Shacabka ay u furantahay saddex tallaabo midkood. Tan koowaad, in uu hindisaha u ansixiyo sida loogu soo gudbiyey, kaddibna dib ugu celiyo Golaha Shacabka. Tan labaad, in uu wax-kabeddel sababaysan ku sameeyo, ka bacdina dib ugu celiyo Golaha Shacabka. Tan saddexaad oo ah in uu diido hindisaha xeerka uuna dib ugu diro Golaha Shacbka isaga oo raacinaya sababta diidmada. |
| (3) Marka Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise sharci qabyo ah oo u soo ansixiyay Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ihi, waxay u dirayaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, uguna soo saaro faafinta rasmiga ah. | (4) Haddii Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise xeereed uu ansixiyay Golaha Aqalka Sare oo markii hore ka billowday Golaha Shacabka, iyada oo aan wax laga beddelin, wuxuu goluhu u gudbinayaa Madaxweynaha si uu u saxiixo, looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah. | Faqradda 4aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dibu-habayn. *"Sharci"* waxaa lagu beddelay *"Xeer"*. Faqraddan waxay tilmaamaysaa in haddii Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise xeereed oo markii hore golaha ka billowday, uuna soo ansixiyay Golaha Aqalka Sare, iyada oo aan wax laga beddelin, waxaa loo gudbinayaa |

| | | |
|---|---|---|
| | | Madaxweynaha si uu u saxiixo, looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah. |
| (4) Marka Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise sharci qabyo ah kaasoo uu soo beddelay Aqalka Sare waxaa u furan inuu sameeyo arrimaha soo socda middood:<br>(a) Inuu oggolaado wax ka beddelkaa lagu sameeyay hindisaha sharciga qabyada ah, ka dibna u gudbiyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu Saxiixo uguna soo saaro faafinta rasmiga ah;<br>(b) Inuu diido isbeddelada la sameeyay uuna ku baal maro go'aanka Aqalka Sare aqlabiyad 2/3 ah marka la eego tirada guud ee xubnaha aqalka, ka dibna uu u diro Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo uguna soo saaro faafinta rasmiga ah. | (5) Marka Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise xeereed uu Golaha Aqalka Sare wax ka soo beddelay ama diiday, waxaa u furan muddo 90 maalmo shaqo gudahood ah inuu qaado mid ka mid ah tallaabooyinka soo socda:<br>a) Inuu oggolaado wax-kabeddelka ama diidmada lagu sameeyay hindisaha xeerka una gudbiyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu saxiixo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah;<br>b) In la dhiso guddiga ku xusan qodobka 103(1) ee Dastuurka; ama<br>c) Inuu diido isbeddelada ama diidmada la sameeyay, uuna ku buriyo go'aanka Golaha Aqalka Sare aqlabiyad saddex meelood labo (2/3) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka, kaddibna uu u diro Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah. | Faqradda 5aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 4aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib-uqorid iyo siiqatoosin. Faqraddan waxay xeerinaysaa in marka Golaha Shacabku soo gaaro hindise xeer, oo golaha ka billowday oo Golaha Aqalka Sare wax ka soo beddelay in ay u furantahay saddex tallaabo midkood.<br><br>Tan koowaad, in uu oggolaado wax-kabeddelka sidaasna ku ansixiyo hindisaha xeerka, una diro Madaxweynaha si uu u saxiixo.<br>Tan labaadna waa in la dhiso guddiga xallinta khilaafaadka<br><br>Tan saddexaadna waa in uu diido isbeddelada Golaha Aqalka Sare sameeyay isaga oo ku burinaya diidmadaas aqlabiyad saddex meelood laba tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka, ka bacdina u diro hindisaha xeerka |

| | | |
|---|---|---|
| | | Madaxweynaha si uu u saxiixo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah. |
| (5) Marka Golaha shacabka uu soo gaaro sharci qabyo ah oo uu soo diiday Aqalka Sare, Aqalkaasi wuxu samyn karaa arrimahan midkood:<br>(a) Inuu uu aqbalo diidmada, sharcigaana uu faraha ka qaado;<br>(b) In uu ku baal maro diidmaddii Aqalka Sare aqlabiya 2/3 ah marka la eego tirade guud ee xubnihiisa, ka dibna uu u diro Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, uguna soo saaro faafinta rasmiga ah. | | **Faqraddan waa la tiray:**<br>Nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 5aad ee isla qodobkan. |
| **Qodobka 83aad. Hindise Sharci oo Qabyo ah oo ka bilowday Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka** | **Qodobka 105aad: Hindise Xeereed Ka Bilowday Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka** | Cinwaanka Qodobka 105aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa Ereyga "Sharci" lagu beddelay "Xeer", inta kale cinwaanka waxba lagama beddelin. Qodobkan asalka Dastuurka waxa uu ahaa Qodobka 83aad. |
| | (1) Hindise xeereed kasta oo la xiriira awoodaha wadaagga ah wuxuu ka billaabanayaa Golaha Aqalka Sare. | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 1aad waxa ay xeerinaysaa in hindise xeer kasta oo qabyo ah lana xiriira awoodaha xeer dejinta wadaagga ah uu ka billaabanayo Golaha Aqalka Sare. |

| | | |
|---|---|---|
| (1) Markuu Aqalka Sare soo gaaro hindise sharci oo qabyo ah, waxaa u furan inuu sameeyo mid ka mid ah, arimaha soo socda:<br>(a) Inuu ku ansixiyo sharcigaas sida uu yahay ama isagoo wax ka beddel ay kaddibna u gudbiyo Golaha Shacabka si uu u oggolaado;<br>(b) Inuu diido sharcigaas kuna wargaliyo Golaha Shacabka isagoo raacinaya sababaha uu ku diiday. | (2) Marka Aqalka Sare la horkeeno hindise xeereed oo golaha ka billowday, Aqalka Sare wuxuu qaadi karaa mid ka mid ah tallaabooyinka soo socda:<br>a) Inuu sidiisa ku ansixiyo ama wax-kabeddelo, kaddibna loo gudbiyo Golaha Shacabka; ama<br>b) Inuu diido kuna wargeliyo Golaha Shacabka iyo curiyaha sababaha loo diiday hindisaha xeerka. | Faqradda 2aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqatoosin. "Sharci" waxaa lagu beddelay "Xeer". Faqraddan waxay xeerinaysaa tallaabooyinka u furan Golaha Aqalka Sare marka la horkeeno hindise xeer qabyo ah oo golaha ka billowday oo kala ah in uu ansixiyo una gudbiyo Golaha Shacabka ama inuu diido kuna wargeliyo Golaha Shacabka iyo ciddii curisay hindisaha xeerka. Waxaa farqaddan lagu soo kordhiyay "curiyaha hindisaha xeerka". |
| (2) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalku marka uu helo hindise sharci oo qabyo ah, kaas oo Aqalka Sare oggolaadey, waxaa u furan inuu sameeyo mid ka mid ah arrimaha soo socda:<br>(a) In uu u oggolaado sharcigaas sida uu ugu soo gudbiyey Aqalka Sare, ka dibna uu u gudbiyo Madaxweynaha Dawlada Federaalka si uu ugu ogolaado, u saxiixo looguna soo saaro faafinta rasmiga;<br>(b) Inuu wax kabeddelo sharcigaas dibna ugu celiyo Aqalka Sare isagoo raacinaya sababaha uu wax ugu beddeley; | (3) Marka Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise xeereed oo Golaha Aqalka Sare u soo gudbiyey, waxaa u furan inuu qaado mid ka mid tallaabooyinka soo socda:<br>a) Inuu hindisaha u ansixiyo sida Golaha Aqalka Sare ugu soo gudbiyay oo aan waxba laga beddelin, kaddibna dib ugu diro Golaha Aqalka Sare;<br>b) Inuu wax-kabeddel ku sameeyo, kaddibna, ayadoo wax-kabeddellada lagu sameeyay hindisaha oo sababaysan dib ugu diro Golaha Aqalka Sare; ama | Faqradda 3aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn. Faqraddan waxay xeerinaysaa in marka uu Golaha Shacabka soo gaaro hindise xeer qabyo ah oo ka billowday Golaha Aqalka Sare ay u furan tahay saddex tallaabo midkood. Tan koowaad, in uu hindisaha u ansixiyo sida loogu soo gudbiyey, kaddibna dib ugu celiyo Golaha |

| | | |
|---|---|---|
| (c) Inuu diido, dibna uga celiyo Aqalka Sare, isagoo raacinaya sababaha uu u diidey | c) Inuu diido hindisaha xeerka, kaddibna dib ugu diro Golaha Aqalka Sare isaga oo raacinaya sababaha diidmada. | Aqalka Sare. Tan labaad, in uu wax-kabeddel sababaysan ku sameeyo, ka bacdina dib ugu celiyo Golaha Aqalka Sare. Tan saddexaad oo ah in uu diido hindisaha xeerka uuna dib ugu diro Golaha Aqalka Sare isaga oo raacinaya sababta diidmada. |
| (3) Markuu Aqalka Sare soo gaaro hindise sharci qabyo ah, kaas oo uu wax ka beddeley Golaha Shacabku, waxaa u furan inuu sameeyo mid ka mid ah arrimaha soo socda:<br>(a) Inuu aqbalo wax ka beddelidda sharciga qabyada ah, isagoon codayn una gudbiyo Madaxweynaha Dawlada Federaalka si uu u oggolaado, u saxiixo, looguna soo saaro faafinta rasmiga ah;<br>(b) Inuu diido wax kabeddelka sharcigaas, kagana gudbo/ku baalmaro go'aanka Golaha Shacabka cod aqlabiyad ah oo 2/3 tirada xubnihiisa ah, dibna ugu celiyo Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah. | (4) Haddii Golaha Shacabku ansixiyo hindisaha xeerka uu u soo gudbiyey Golaha Aqalka Sare, hindise xeereedka waxaa dib loogu celinayaa Golaha Aqalka Sare si Guddoomiyaha Aqalka Sare ugu diro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si uu u saxiixo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah. | Faqradda 4aad, oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dibuhabayn. "Sharci" waxaa lagu beddelay "Xeer". Faqraddan waxay tilmaamaysaa in haddii Golaha Aqalka Sare uu soo gaaro hindise xeer oo markii hore golaha ka billowday uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka iyada oo aan wax laga beddelin, waxaa goluhu u gudbinayaa Madaxweynaha si uu u saxiixo, looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah. |
| (4) Markuu Aqalka Sare soo gaaro hindise sharci qabyo ah, kaasoo uu diiday Golaha Shacabku, waxaa u furan inuu sameeyo mid ka mid ah arrimaha soo socda:<br>(a) Inuu aqbalo diidmada sharcigaas isagoon u codeyn, joojiyana hindaha sharciga qabyada ah; | (5) Haddii Golaha Shacabku wax-kabeddelo ama diido hindise xeereed oo u soo gudbiyay Golaha Aqalka Sare, Golaha Aqalka Sare muddo 90 maalmo shaqo gudohood ah wuxuu qaadayaa mid ka mid ah tallaabooyinka soo socda:<br>a) In uu aqbalo wax-kabeddelka ama diidmada hindise xeereedka una gudbiyo Madaxweynaha | Faqradda 5aad waxay xeerinaysaa in haddii hindise xeer oo ka billowday Golaha Aqalka Sare uu Golaha Shacabka wax-kabeddel ku sameeyo, Golaha Aqalka Sare waxaa u furan in uu muddo sagaashan (90) maalmood |

| | | |
|---|---|---|
| (b) Inuu kaga gudbo/ku-baalmaro diidmada Golaha Shacabka cod aqlabiyad 2/3 tirada xubnaha Aqalka ah, dibna ugu celiyo Golaha Shacabka Federaalka ah. | Jamhuuriyadda si uu u saxiixo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah;<br>b) In uu dhiso guddiga ku xusan qodobka 103(1) ee Dastuurka; ama<br>c) In uu diido wax-kabeddelka ama diidmada, iyadoo oo uu ku meelmarinayo 2/3 go'aan aqlabiyad ah ee tirada xubnaha guud ee golaha, kaddibna u gudbiyo hindisaha xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah. | ku qaato saddex tallaabo midkood.<br><br>Tan koowaad, in uu aqbalo wax-kabeddelka Golaha Shacabku sameeyay iyada oo la raacayo aqlabiyad fudud, kaddibna uu u gudbiyo hindisaha xeerka Madaxweynaha si uu u saxiixo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah.<br><br>Tan labaad waa in la dhiso Guddiga Xallinta Khaliifaadka.<br>Tallaabada saddexaad oo ah in uu diido wax-kabeddelka kuna buriyo go'aanka Golaha Shacabka aqlabiyad saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee Golaha Aqalka Sare, ka dibna hindisaha xeerka qabyada ah u gudbiyo Madaxweynaha si uu u saxiixo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah. |
| (5) Haddii uu Golaha Shacabka soo gaaro hindise sharci qabyo ah, kaasoo uu horay wax uga beddelay, isbeddeladdii uu hore u sameeyayna uu Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalku aqbalay, waa in uu Hindisahaa Sharci Qabyada ah u diraa Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, faafinta rasmiga ahna ugu soo saaro. | | **Faqraddan waa la tiray:**<br>Nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 5aad ee isla qodobkan |

| | | |
|---|---|---|
| (6) Haddii Golaha shacabka uu soo gaaro Hindise Sharci qabyo ah, kaasoo ay hore wax uga beddeleen ama ay hore u diideen, go'aankooda horena uu baal maray Aqalka Sare, Golaha Shacabku wuxuu sameyn karaa arrimahan midkood:<br>(a) In ay ku baal maraan go'aanka Aqalka Sare cod aqlabiyad 2/3 tirada xubnahooda ah, halkaa ayeeyna ku joojin karaan hindisahaa sharci ee qabyada ah;<br>(b) In ay aqbalaan go'aanka Aqalka Sare, ka dibna Hindisahaa Sharci ee qabyada ah u gudbiyaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda si uu u saxiixo, faafinta rasmiga ahna ugu soo saaro. | | Faqraddan waa la tiray: Nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 5aad ee isla qodobkan |
| **Qodobka 84aad: Faafinta iyo Xafidaadda Sharciyada** | **Qodobka 106aad: Kaydinta iyo Faafinta Xeerarka** | Cinwaanka Qodobka 106aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 84aad "Faafinta iyo Xafidaadda Sharciyada" waxaa laga dhigay "Kaydinta iyo Faafinta Xeerarka". "Sharciyada waxaa lagu beddelay "Xeerarka", halka "Xafidaadda" lagu beddelay "Kaydinta". |
| | (1) Xaafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda Federaalka ayaa mas'uul ka ah daabacaadda, xafidaadda, kaydinta iyo qaybinta Faafinta Rasmiga ah. | Qodobkan oo ka koobnaa hal farqad waxaa laga dhigay laba faqradood. Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa in Xaafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda mas'uul ka yahay daabacaadda, |

| | | |
|---|---|---|
| | | xafidaadda, kaydinta iyo Faafinta Rasmiga ah. |
| Kaydka sharciyada Dawladda waxaa mas'uul ka ah xoghayeyaasha Labada Aqal iyo Garyaqaanka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka oo faafinta rasmiga ah ku samaynaya. | (2) Labada Xoghaye Guud ee Golayaasha Baarlamaanka Federaalka waxay mas'uul ka yihiin xafidaadda iyo kaydinta nuqullada xeerarka, qaraarrada iyo hadalqoraaladda golayaashu ansixiyaan iyo in ay hubiyaan in xeerarka loo gudbinayo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda la mid yihiin kuwii asalka ahaa oo meelmarinta loogu gudbiyey Xafiiska Madaxweynaha Jamhuuriyadda. | Faqradda 2aad oo nuxurkeedu uu ku jiray Faqradda 1aad ee asalka Dastuurka waxay xeerinaysaa in labada xoghaye ee Golayaasha Baarlamaanka Federaalka mas'uul ka yihiin xafidaadda iyo kaydinta nuqullada xeerarka, qaraarrada iyo hadalqoraallada ay golayaashu ansixiyaan iyo in ay hubiyaan in xeerarka loo gudbinayo Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda yihiin nuqullada saxda ah oo golayaashu ansixiyeen loona gudbiyey Madaxweynaha Jamhuuriyadda. |
| **Qodobka 85aad. Dhaqangelidda Sharciyada** | **Qodobka 107aad: Dhaqangalidda Xeerarka** | Qodobka 107aad ee soojeedinta wax-kabeddelka wuxuu asalka Dastuurka ahaa Qodobka 85aad. Ereyga "Sharciyada" waxaa lagu beddelay Xeerarka". |
| Hindise sharci qabyo ah wuxuu dhaqan-gelayaa kaddib marka uu maro habraaca sharci-dejinta ee ku xusan qaybtan, Madaxweynaha Jamhuuriyadduna saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga. | (1) Xeer kasta oo uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalku waa in Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku saxiixaa ama ku diidaa muddo soddon (30) maalmood gudahood ah, oo ka billaabanaysa maalinta loo gudbiyo. | Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa in xeer kasta oo Baarlamaanka Federaalka ansixiyo uu Madaxweynuhu ku saxiixo muddo soddon (30) maalmood gudahood. |
| | (2) Madaxweynuhu haddii uu saxiixi waayo xeerka Baarlamaanku ansixiyay, waa inuu ku soo celiyaa | **Faqrad cusub:** |

| | | |
|---|---|---|
| | golihii u soo gudbiyey xeerka muddada ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, asagoo sababaynaya. | Faqradda 2aad waxay tilmaamaysaa in haddii uu Madaxweynuhu saxiixi waayo xeerka Baarlamaanka Federaalku ansixiyay muddada cayiman, waa in uu ku soo celiyaa golihii u soo gudbiyey marka uu xeerku ka hor imaanayo Dastuurka ama xeerarka kale ee dalka; uuna xeerku soo marin habraaca xeer dejinta ee ku xusan Dastuurka ama uu xeerku ka soo horjeedo danaha qaranka. |
| | (3) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya haddii uu ku saxiixi waayo xeerka ama ku soo celin waayo muddo 30 maalmood gudahood ah golihii u soo gudbiyey sabab la'aan, xeerku wuxuu noqonayaa mid dhaqangal ah laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda. | **Faqrad cusub:** Faqradda 3aad waxay tilmaamaysaa in haddii Madaxweynaha Jamhuuriyaddu muddo soddon maalmood gudahood ah ku saxiixi waayo ama dib ugu celin waayo golihii u soo gudbiyey sabab la'aan in xeerku noqonayo mid dhaqangal ah laguna soo saarayo Faafinta Rasmiga ah. |
| | (4) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya haddii uu soo celiyo xeerka si waafaqsan faqradda (2), gole kasta ee Baarlamaanka Federaalka ah wuxuu ku oggolaan karaa soojeedinta Madaxweynaha aqlabiyad (50%+1) ama wuxuu ku diidi karaa aqlabiyad saddex meelood labo (2/3) tirada guud ee xubnaha golahaas. Markaas, waa in | **Faqrad cusub:** Faqradda 4aad waxay xeerinaysaa in xeerka madaxweynuhu ku soo celiyo golihii u soo gudbiyey, uu gole kasta oggolaan karo ama ku diidi |

| | | |
|---|---|---|
| | Madaxweynuhu muddo shan iyo toban (15) maalmood gudahood ah ku saxiixaa hindise xeereedkaas. Haddiise uu Madaxweynuhu ku guuldarraysto inuu ku saxiixo muddadaas, xeerku wuxuu isla markiiba noqonayaa mid dhaqangal ah waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah. | karo soojeedinta Madaxweynaha ayagoo ku burinaya aqlabiyad saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha golaha ay khusayso. Madaxweynhu waa in uu xeerkaas saxiixaa, laakiin haddii uuna ku saxiixin muddadaas cayiman xeerku wuxuu noqonayaa mid dhaqangal ah oo lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah. |
| | (5) Garyaqaanka Guud ee Dawladdda waa in uu min hal nuqul oo asal ah Madaxweynuhuna saxiixay u diraa Xoghayeyaasha labada Gole si ay u hubiyaan in nuqalka loo dirayo Faafinta Rasmiga uu la mid yahay nuqulkii asalka ahaa oo goluhu ansixiyay una diray Xafiiska Madaxweynaha. | **Faqrad cusub:** Faqradda 5aad waxa ay xeerinaysaa in Garyaqaanka Guud ee Dawladda uu u diro min hal nuqul oo ah asalka xeerka Madaxweynuhu saxiixay Xogahayayaasha Labada Gole ee Baarlamaanka si loo hubiyo sax ahaanshaha nuqulka Madaxweynuhu saxiixay. |
| | (6) Xeer kasta uu Madaxweynaha saxiixo si waafaqsan Dastuurka, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, wuxuu dhaqangal noqonayaa shan iyo toban (15) maalmood kaddib oo laga billaabo maalinta xeerka lagu soo saaray Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, haddii uusan xeerkas si kale u sheegin. | **Faqrad cusub:** Faqradda 6aad waxa ay xeerinaysaa in xeerkasta oo Madaxweynuhu saxiixo si waafaqsan Dastuurka laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah uu dhagangal noqonayo shan iyo toban (15) maalmood ka bacdi, taas oo ka billaabanaysa maalinta |

| | | |
|---|---|---|
| | | xeerka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah. |
| **Qodobka 86aad: Durid Sharci** | **Qodobka 108aad: Durid Xeer** | Qodobka 108aad ee soojeedinta wuxuu asalka Dastuurka ahaa Qodobka 86aad, Ereyga "Sharci" waxaa lagu beddelay "Xeer". |
| (1) Sharci maray habraaca ansixinta sharciyada iyo dhaqangeliddaba waxaa lagu duri karaa oo keliya inuu ka soo horjeedo Dastuurka. | (1) Xeer maray habraaca ansixinta xeerarka iyo dhaqangeliddaba waxaa lagu duri karaa oo keliya inuu ka soo horjeedo Shareecada Islaamka, Dastuurka Jamhuuriiyadda Federaalka iyo danta qaranka. | Faqradda 1aad waxaa lagu sameeyay siiqo toosin, waxaana lagu soo korhiyay 'Shareecada Islaamka, iyo danta qaranka". Waxa Ereyga "Sharci" lagu beddelay "Xeer". Faqraddan waxay xeerinaysaa in marka keli ah oo xeer dhaqangal ah la duri karo ay tahay haddii uu ka soo horjeedo Shareecada Islaamka, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka. |
| (2) Sharci maray shuruudaha ku xusan cutubkan waxaa duri kara:<br>(a) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka, asagoo isu dhan ama ergo hal Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka ka mid ah;<br>(b) Saddax meelood meel ka mid ah xildhibaannada Golaha Shacabka Federaalka;<br>(c) Golaha Wasiirrada Federaalka;<br>(d) Ugu yaraan toban kun (10,000) oo cod bixiye oo diiwaangashan. | (2) Xeer maray habraaca ku xusan cutubkan waxaa duri kara:<br>a) Golaha Aqalka Sare ama sanatarrada hal Dawlad Goboleed;<br>b) Saddex meelood meel ka mid ah xildhibaannada Golaha Shacabka Federaalka;<br>c) Golaha Wasiirrada Federaalka; ama<br>d) Ugu yaraan toban kun (10,000) qof oo buuxiyey shuruudaha cod bixiye. | Faqradda labaad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo dib u habayn. Faqraddan waxay tilmaamaysaa cidda duri karta xeer maray habraacyada ku xusan Cutubka 6aad. |

| | | |
|---|---|---|
| (3) Duridda sharci si waafaqsan faqradaha 1 iyo 2 ee qodobkan waxaa la horgeyn karaa go'aanka gaari karta Maxkamadda Dastuuriga ah oo keliya. | (3) Duridda xeer si waafaqsan faqradaha 1aad iyo 2aad ee qodobkan waxaa la horgeyn karaa, go'aanna ka gaari karta Maxkamadda Dastuurka oo keliya. | Faqradda 3aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin. Faqraddan waxay xeerinaysaa in xeerka la duray si waafaqsan Faqradda 1aad iyo 2aad ee qodobkan la horgeyn karo Maxkamadda Dastuurka si ay go'aan uga gaarto. |
| (4) Haddii Maxkamadda Dastuurigu ay jebiso duriddii sharciga, kharajka ku baxay waxaa bixinaaya dhinacii hindisaha duridda Maxkammadda Dastuuriga hor- keenay. | (4) Haddii Maxkamaddu ay jebiso duriddii xeerka, kharashka ku baxay waxaa bixinaya dhinacii hindisaha duridda Maxkammadda horkeenay. | Faqradda 4aad waxba lagama beddelin ee sideeda ayaa loo qaatay. Faqraddan waxay tilmaamaysaa in haddii Maxkamadda jebiso duridda xeerka, kharashka ku baxay uu bixinayo dhinaca maxkamadda horgeeyay hindisaha duridda. |
| (5) Habraaca loo marayo duridda iyo go'aan-ka-gaarista waa in lagu qeexaa nidaamka garsoorka. | (5) Habraaca loo marayo duridda iyo go'aan ka gaarista waa in lagu qeexaa Xeerka Nidaamka Garsoorka. | Faqradda 5aad waxba lagama beddelin sideeda ayaa loo qaatay. Faqraddan waxay tilmaamaysaa in habraaca loo marayo duridda iyo go'aan gaarista lagu xeerin doono Xeerka Nidaamka Garsoorka. |

# CUTUBKA TODDOBAAD:
# MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**Cutubka toddobaad wuxuu ka koobanyahay kow iyo toban (11) qodob oo ka billaabanaya Qodobka 109aad ilaa Qodobka 119aad, halka asalka Dastuurku ka koobnaa toban (10) qodob. Waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyay laba (2) qodob iyo labaatan iyo toddoba (27) faqradood oo cusub oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Waxaa la tiray afar (4) faqradood oo ku jiray asalkii Dastuurka.**

**Cutubkan toddobaad arrimaha lagu soo kordhiyay waxaa ka mid ah:**

- **Xasaanadda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka; iyo**
- **Soo Saarista Digreetooyinka.**

| CUTUBKA TODDOBAAD: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | | |
|---|---|---|
| **Asalka Dastuurka KMG ah** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD** | **Faallo** |
| **Cutubka 7aad: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | **Cutubka 7aad: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | Cinwaanka Cutubka 7aad waxba lagama beddelin. |
| **Qodobka 87aad: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 109aad: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | Cinwaanka Qodobka 109aad, oo ahaa Qodobka 87aad ee asalka Dastuurka, waxba lagama beddelin.<br><br>Qodobkan oo asalka Dastuurka ka koobnaa laba faqradood waxaa lagu kordhiyay faqrad cusub oo saddexaad. |
| (1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa:<br>(a) Madaxa Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya;<br>(b) Astaanta midnimada qaranka;<br>(c) Ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka. | (1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Madaxa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, astaanta midnimada, dammaanad qaadaha madaxbannaanida qaranka iyo ilaaliyaha Dastuurka. | **Faqradda 1aad**, waxaa lagu sameeyay dib-uhabayn, oo waxaa laga dhigay hal farqad oo aan lahayn xarfo ka farcama. Nuxurkii ku jiray xarfaha kala duwan waxaa lagu ururiyey hal faqrad. "Ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka" waxaa lagu beddeley "ilaaliyaha Dastuurka". Waxaa faqraddan lagu |

| | | |
|---|---|---|
| | | kordhiyay "dammaanad qaadaha madaxbannaanida qaranka" oo ah mid aad u muhiim ah. |
| | (2) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu matalaa Jamhuuriyadda Soomaaliya gudaha iyo dibaddaba. | **Faqrad cusub:** Farqaddan waxay tilmaamaysaa in Madaxweynaha JFS uu Jamhuuriyadda ku matalayo gudaha iyo dibaddaba. |
| (2) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya wuxuu xilkiisa u gudanayaa si waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Jamhuuriyadda Federal Soomaaliya | (3) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in uu u gutaa waajibaadkiisa si waafaqsan Shareecadda Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka. | Faqradda 3aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad waxaa lagu sameeyay dib u siiqayn ayada oo aan nuxurka faqradda waxba laga beddelin, waxaana lagu kordhiyay "shareecada Islaamka". Sidoo kale, waxaa Ereyga "shuruucda" lagu beddelay "xeerarka". |
| **Qodobka 88aad: Shuruudaha u Doorashada Madaxweynennimada ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 110aad: Shuruudaha Doorashada Xilka Madaxweynaha** | Cinwaanka Qodobka 110aad oo ahaa Qodobka 88aad ee asalka Dastuurka waxaa lagu sameeyay qaabayn ayadoon nuxurka waxba laga beddelin.<br><br>Qodobkan oo ka koobnaa hal faqrad asalka Dastuurka |

| | | |
|---|---|---|
| | | waxaa lagu kordhiyay laba faqradood, ayada oo lagu sameeyay dib u qorid iyo siiqayn. |
| Waxaa loo dooran karaa xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Muwaaddin kasta oo:<br>a. Muwaadin Soomaali, Muslim ah;<br>b. Da'adiisu aanay ka yarayn afartan (40) sano;<br>c. Leh aqoon ama wayo'aragnimo u qalanta xilkaas;<br>d. Dhimirkiisu dhan yahay;<br>e. Gelin denbi culus oo ay maxkamadi xukuntay. | (1) Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa loo dooran karaa qof kasta oo buuxiya shuruudaha soo socda:<br>a) Muwaaddin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo Muslim ah;<br>b) Labadiisa waalid ay yihiin muwaaddiniin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>c) Da'adiisu aanay ka yarayn afartan (40) sano maalinta doorashada;<br>d) Aqoontiisa ay gaarsiisantahay heer jaamacadeed la aqoonsanyahay iyo waayo-aragnimo hoggaamineed oo aan ka yarayn 15 sano;<br>e) Dhimirkiisu dhanyahay, horayna aan dhakhtar si rasmi ah ugu caddayn xanuun dhimirka ah.<br>f) Gelin fal dambiyeed culus oo ay maxkamad awood u leh ugu xukuntay xukun si kamadambays ah;<br>g) In uu ku noolaa/degganaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya muddo aan ka yarayn 5 sano.<br>h) Qabin xaas ajnabi ah;<br>i) In lagu yaqaan dhaqan suubban bulshada dhaxdeeda;<br>j) In aan horay loogu samayn maamuus ka xayuubin jagada madaxweynennimo;<br>k) In musharraxa haysata jinsiyad dal kale uu caddeeyo ka noqoshada jinsiyaddaas haddii uu ku guulaysto xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo | **Faqradda 1aad**,<br><br>***Xarafka (a)*** *"Muwaaddin Soomaali, Muslim ah"* waxaa lagu beddelay *"Muwaaddin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo Muslim ah"*.<br><br>***Xarafka (b)*** ee farqadda 1aad waa mid cusub oo la soo kordhiyay tilmaamaysana labada waalid ee musharraxa Madaxweynaha in ay muwaaddiniin Soomaali ah yihiin.<br><br>***Xarafka (c)*** ee faqradda 1aad ee qodobkan waxay tilmaamaysaa in da'da musharraxa madaxweyne aysan ka yaraan 40 sano. Xarafkan asalka Dastuurka waxa lagu kordhiyay *"maalinta doorashada"*. |

| | | |
|---|---|---|
| | l) In uu caddeeyo hantida uu leeyahay una gudbiyo hab qoraal ah Xafiiska Hantidhowraha Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya". | ***Xarafka (d)*** ee faqradda 1aad ee qodobkan oo xeerinayey heerka aqoonta musharraxa oo hadda noqotay xarafka (c) waxaa lagu xiray ilaa heer jaamacadeed iyo khibrad hoggaamineed oo aan ka yarayn 15 sano.<br><br>***Xarafka (e)*** ee faqradda 1aad oo ahayd xarafka (d) ee asalka Dastuurka waxay tilmaamaysaa in musharraxa Madaxweynaha uu dhimirkiisu dhanyahay, waxaa lagu kordhiyay *"horayna aan dhakhtar si rasmi ah ugu caddayn xanuun dhimirka ah"*.<br><br>***Xarafka (f)*** ee faqradda 1aad oo ahayd xarafka (e) ee asalka Dastuurka waxay tilmaamaysaa in musharraxa madaxweyne uusan gelin fal-dambiyeed culus oo ay maxkamad xukuntay, waxaa lagu daray *"madaxbannaan ugu* |

| | | |
|---|---|---|
| | | *xukuntay xukun si kamadambays ah";*<br><br>Faqraddan waxaa lagu soo kordhiyay xarfaha g,h,i,j,k,l oo xeerinaya shuruudaha in uuna musharraxu qabin xaas ajnabi ah, maamuus kaxayuubin horay loogu samayn, shuruudda degganashaaha dalka muddo shan sano ah, in uusan haysan karin dhalasho dal shisheeye, iyo ugu dambeyn soo bandhigidda hantida guurtada iyo ma guurtada. |
| | (2) Musharraxa madaxweynaha waxaa soo gudbinaya xisbi siyaasadeed ama isbahaysi xisbiyo siyaasadeed. | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 2aad waxay xeerinaysa soo sharraxidda musharraxa ee xisbi ama isbahaysi xisbiyo siyaasadeed. |
| **Qodobka 89aad: Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 111aad: Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | Cinwaanka Qodobka 111aad oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 89aad waxba lagama beddelin. |
| (1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waa in ay doortaan labada gole ee Baarlamaanka oo wada fadhiya, waxaana guddoominaya fadhigaa | (1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa kulan wadajir ah ku dooranaya labada gole ee Baarlamaanka Federaalka. | Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa in Madaxweynaha JFS ay |

| | | |
|---|---|---|
| guddoomiyaha golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah. | | dooranayaa labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka, waana soojeedinta wax-kabeddelka Qodobka 49(4) ee cutubka 4aad oo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ansixiyay kaas oo lagu xeeriyay in Madaxweynaha ay dooranayaan muwaaddiniinta. |
| (2) Ugu yaraan saddex meelood labo tirada guud ee gole walba ee Baarlamaanka Federaalku waa inay joogaan u codaynta doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka. | (2) Ugu yaraan saddex meelood labo meel (2/3) tirada guud ee gole walba ee Baarlamaanka Federaalku waa inay joogaan u codaynta doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka. | Faqraddan sideeda ayaa loo qaatay. |
| (3) Waa in ay murashaxnimadiisa u soo jeediyaan fadhiga labada gole ee Baarlamaanka ugu yaraan labaatan (20) xildhibaan Golaha Shacabka ah ama ugu yaaraan hal (1) Dawlad goboleed. | (3) Musharraxa Madaxweynaha waa in ay musharraxnimadiisa u soojeediyaan kulanka wadajirka labada gole ee Baarlamaanka ugu yaraan labaatan (20) xildhibaan oo ka tirsan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | Faqraddan dib-u-siiqayn ayaa lagu sameeyay, ayadoo musharraxa Madaxweynaha musharraxnimadiisa ay soojeedinyaan ugu yaraan labaatan (20) xildhibaan oo ka tirsan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. |
| | (4) Musharraxa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa musharraxnimadiisa soojeedin kara saddexda xisbi siyaasadeed ee ka mid ka ah xisbiyada qaran ee dalka, kuwaas oo helay tirada ugu badan ee xildhibaannada labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, wuxuuna barnaamijkiisa ku soo bandhigayaa kulanka wadajirka ah ee labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka. | **Faqrad Cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in musharraxa Madaxweynaha ay soojeedin karaan saddexda xisbi siyaasadeed ee ka mid ka ah xisbiyada qaran ee dalka, iyo sidoo kale in barnaamijkiisa |

| | | |
|---|---|---|
| | | ku soo bandhigo kulanka wadajirka ahLabada Gole ee Baarlamaanka Federaalka. |
| (4) Xubnaha golaha Aqalka Sare markii ay u codeynayaan dorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka wuxuu qof kasta leeyahay hal cod. | (5) Marka loo codaynayo doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda xildhibaan ama senatar kasta wuxuu leeyahay hal cod. | Faqradda 5aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 4aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay toosin. |
| (5) Murashax Madaxweyne oo kasta waa in uu murashaxnimadiisa gaarsiiyaa Baarlamaanka Federaalka waana in uu barnamijkiisa doorashada u soo bandhigaa Baarlamaanka Federaalka, oo markaa ka dib dooranaya isaga oo la raacaya geeddi-socodkan:<br>(a) Codeynta doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waa qarsoodi;<br>(b) Labada gole ee Barlaamanka Federaalka waxay Madaxweyne u dooranayaan murashaxa ku guleeysta aqlabiyad seddax meelood laba, tirada guud ee xubnaha Labada gole ee Baarlamaanka Federaalka ah;<br>(c) Haddii murashax ku guuleeysan waayo waxaa codayn labaad loo qaadayaa afarta murashax ee ugu cod badan waxaana ku guleeysanayaa Madaxweyninimada Jamhuuriyadda Federaalka murashaxa hela aqlabiyad ah seddax meelood laba codadka tirada guud ee xubnaha labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah;<br>(d) Haddii murashaxna ku guleeysan waayo codbixinta wareegga laabad waxaa codbixin wareeg seddaxaad loo qaadayaa labada | (6) Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka waxay ku dooranaayaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda hab codayn qarsoodi ah, ayadoo la raacayo habraaca soo socda:<br>(a) Wareegga koowaad musharraxii hela aqlabiyadda boqolkiiba konton iyo haldheeri ah (50%+1) tirada guud ee xubanaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa ku guulaysanaya xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Haddii la waayo musharrax guulaysta, waxaa loo gudbayaa wareeg labaad.<br>(b) Wareegga labaad waxaa u soo gudbaya labada musharrax ee ugu codka badan wareeggii kowaad, haddiise uu jiro musharrax saddexaad oo helay codad barbardhac ah wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qaybgalo una gudbo tartanka doorashada wareegga labaad. Musharraxii hela cod | Faqradda 6aad oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 5aad waxay qeexaysaa habraaca ay Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ku dooranayaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. |

| | | |
|---|---|---|
| murashax ee ugu cod badan waxaana Madaxweynennimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku guuleysanaaya murashaxa hela tirada ugu badan ee codadka guud ee xubnaha labada aqal ee Baarlamaanka. | aqlabiyad boqolkiiba konton iyo haldheeri ah (50%+1) tirada guud ee xubanaha labada Gole ayaa ku guuleysana in uu noqdo Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | |
| | (7) Madaxwaynaha la doortay wuxuu xafiiska kula wareegayaa muddo shan iyo toban (15) maalmood guddahood ah kaddib markii lagu dhawaaqo natiijada kama dambaysta ah ee doorashada Madaxweynaha. | **Faqrad cusub:** Faqradadan waxay dhigaysaa muddada uu Madaxweynaha la doortay xilka kula wareegayo. |
| | **Qodobka 112aad: Dhaarta Madaxweynaha** | Qodobka 112aad wuxuu asalka Dastuurka ahaa Qodobka 96aad. Cinwaanka qodobkan waxba lagama beddelin ee sidiisa ayaa loo qaatay. |
| | Madaxweynaha ku guuleysta doorashada waxaa la dhaarinayaa marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada, waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Federaalka, wuxuuna marayaa dhaartan:<br><br>Aniga oo ah ________________________________, waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkayga u guto si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diintu ku jirto, ilaaliyo, dhawro, una hoggaansamo Dastuurka iyo xeerarka kale oo dalka u yaalla; difaacana madaxbannaanida, gobannimada iyo midnimada dalka; iyo inaan dadka Soomaaliyeed ku maamulo sinnaan, caddaalad iyo hufnaan. | Faqraddan waxay xeerinaysaa in Madaxweynaha xilka ku guulaystay la dhaarinayo maalinta lagu dhawaaqo natiijada doorashada. |

| | Qodobka 113aad: Xasaanadda Madaxweynaha | Qodob cusub: Qodobka 113aad ee soojeedinta waa mid cusub wuxuuna ka koobanyahay saddex faqradood |
|---|---|---|
| | (1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu leeyahay xasaanad inta uu xilka hayo lamana maxkamadayn karo. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa inuu Madaxweynahu leeyahay xasaanad. |
| | (2) Madaxweynaha laguma maxkamadayn karo gudashada waajibaadkiisa dastuuriga ah marka uu xilka ka dego, haddii uusan gelin gabood fal la xiriira xuquuqda aadanaha. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in aan Madaxweynaha lagu maxkamadayn karin hawlaha la xiriira waajibaadkiisa dastuuriga ah, haddii uusan gelin gabood fal la xiriira xuquuqda aadanaha. |
| | (3) Madaxweyne kasta oo xilka banneeya si nabad iyo dimuquraadi ah wuxuu xaq u leeyahay maamuus khaas ah oo lagu xusayo xeer gaar ah, haddii aanu xilka ku bannayn maamuus ka xayuubin waafaqsan Dastuurka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay sheegaysaa in Madaxweynaha xilka banneeya uu leeyahay maamuus khaas ah haddii aan lagu samayn xil ka xayuubin. |

| **Qodobka 90aad: Xilka iyo Awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 114aad: Awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** | Cinwaanka Qodobka 114aad oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 90aad, waxaa lagu soo koobay "Awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya" |
|---|---|---|
| Awoodaha iyo xilka Madaxweynaha waxaa ka mid ah:<br><br>(a) Wuxuu ku dhawaaqaa Xaaladda Deg degga ah iyo Xaaladda dagaal, si wafaaqsan sharciga.<br>(b) Waa Taliyaha Guud ee Ciidammada Qalabka Sida.<br>(c) Wuxuu magacaabaa Taliyeyaasha Ciidammada Heer Federaal iyo ka qaadista xilalkooda, markii ay soo jeediyaan Golaha Wasiirradu.<br>(d) Wuxuu magacaabayaa xilka Wasiirka Koowaad wuxuuna xilka ka qaadayaa ama kala dirayaa Xukuumadda Federaalka haddii ay waydo codka kalsoonida Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka, oo ah cod hal-dheeri ah (50%+1).<br>(e) Wuxuu xilka ka qaadayaa Wasiirrada, Wasiiru-dawleyaasha, iyo Wasiir-ku-xigeennada, markuu soo jeediyo Wasiirka Koowaad.<br>(f) Wuxuu saxiixaa sharciyada uu soo ansixiyo Baarlamaanka Federaalku, si sharci looga dhigo.<br>(g) Wuxuu furaa Golaha Shacabka.<br>(h) Wuxuu la hadlaa fadhiga gaarka ah ee Golaha Shacabka sanadkiiba mar. | Awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa ka mid ah: | Waxaa lagu kordhiyay faqraddan "Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya".<br><br>Qodobkan wuxuu ka koobanyahay 13 faqradood oo inta badan cusub halka asalka Dastuurka uu ahaa hal faqrad oo ay ka farcamayeen xarfo badan. |

| | | |
|---|---|---|
| (i) Wuxuu la hadli karaa Golaha Shacabka mar kasta oo kale.<br>(j) Wuxuu magacaabaa Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga, Maxkamadda Sare iyo Garsooreyaasha kale Heer-Federaal, soo-jeedinta Guddiga Adeegga Garsoorka ka dib.<br>(k) Wuxuu magacaabayaa jagooyinka sare ee Xukuumadda Federaalka iyo madaxda ha'adaha Dawladda Federaalka, marka uu soo jeediyo Golaha Wasiirradu.<br>(l) Wuxuu magacaabaya jagooyinka danjireyaasha iyo qunsuliyadaha guud, markuu Golaha Wasiirradu soo jeediyo.<br>(m) Wuxuu qaabbilaa diblomaasiyiinta shisheeye iyo wakiillada qunsuliyadaha dalalka shisheeye.<br>(n) Wuxuu guddoonsiiyaa abaalmarinta Xushmada Qaranka markuu Golaha Wasiirradu soo jeediyo.<br>(o) Madaxweynuhu wuxuu kala diri karaa Golaha Shacabka marka ay muddadiisa xilku dhammaato, si doorasho ay u aadaan.<br>(p) In uu cafis u fidiyo ama ciqaab ka dhimo dembiilayaal marka uu ka talo-qaato Guddiga Adeegga Garsoorka.<br>(q) In uu saxiixo heshiisyada caalamiga ah kadib markii Golaha Wasiirrada soo jeediyo, Golaha Shacabkuna ansixiyo. | | |
| | (1) Wuxuu magacaabaa Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub:** |

| | | |
|---|---|---|
| | | Faqraddan waxay xeerinaysa magacaabidda Ra'iisul Wasaaraha. |
| | (2) Waa Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka Sida. | Faqradda 3aad oo ahayd xarafka (b) ee asalka Dastuurka waxba lagama beddelin. |
| | (3) Wuxuu ku dhawaaqaa doorasho xilligeeda laga soo hormariyey si waafaqsan Qodobka 87aad ee Dastuurka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaameysaa inuu Madaxweynaha awood u leeyahay ku dhawaaqaa doorasho xilligeeda laga soo hormariyay. |
| | (4) Wuxuu magacaabaa xilkana ka qaadaa, kaddib marka ay soo dhammaadaan habraacyada kale si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, xilalka soo socda:<br><br>a) Danjireyaasha iyo Qunsuliyadaha Guud;<br>b) Taliyeyaasha Ciidammada Federaalka;<br><br>c) Guddiyada iyo hay'adaha Madaxabannaan; iyo<br><br>d) Xilalka kale ee lagu xeeriyay Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqradda 4aad waa nuxurka xarfo ka mid ah qodobka 90aad ee asalka Dastuurka oo la isku uruuriyey ayadoo siineysa Madaxweynaha awood ah inuu magacaabo xilalkana ka qaado xilalka ku xusan faqradaan si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka, kaddib marka ay soo dhammaadaan habraacyada kale ee ku xusan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda, sida ansixinta Baarlamaanka iyo |

| | | |
|---|---|---|
| | | soojeedinta Golaha Wasiirrada. |
| | (5) Wuxuu magacaabaa xilkana ka qaadaa Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka kaddib soojeedinta Golaha Sare ee Garsoorka, si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqradda 5aad waa xarafkii (j) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka waxaana lagu sameeyay wax-kabeddel iyo toosin, waxaana lagu kordhiyay "si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya." |
| | (6) Wuxuu qaabbilaa, warqadaha aqoonsigana ka guddoomaa diblomaasiyiinta iyo wakiillada qunsuliyadaha guud ee dalalka shisheeye. | Faqradda 6aad waa xarafkii (m) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka. Faqraddan waxaa lagu soo kordhiyay "warqadaha aqoonsiga ka guddoomaa". |
| | (7) Wuxuu saxiixaa, celin karaana hindise xeereedyada uu u soo ansixiyo Baarlamaanka Federaalka si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka. | Faqradda 7aad waa xarafkii (f) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka oo lagu sameeyay siiqayn iyo dib-u-habayn. |
| | (8) Wuxuu saxiixaa heshiisyada caalamiga ah ee uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | Faqradda 8aad waa xarafkii (q) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka oo loo qoray hab qaanuuni ah lana gaabiyey. |
| | (9) Wuxuu ku dhawaaqaa xaalad dagaal iyo mid degdeg ah si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqradda 9aad waa xarafkii (a) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka. Waxaa |

| | | |
|---|---|---|
| | | "si waafaqsan sharciga" lagu beddelay "si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka." |
| | (10) Wuxuu iskugu yeeraa shir aan caadi ahayn ee Golayaasha Baarlamaanka mar kasta oo ay jiraan sababo muhiim ah. | Faqradda 10aad waxay koobaysaa nuxurka xuruufta (g), (h) iyo (i) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka.<br>Waxaana la tiray "furaa Golaha Shacabka", ayada lagu daray in uu furayo sanadkiiba hal mar sida ku xusan cutubka 6aad. |
| | (11) Wuxuu bixiyaa abaalmarinta Xushmadda Qaranka. | Faqradda 11aad waa xarafka (n) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka. Wuxuu "guddoonsiiyaa" waxaa lagu beddelay "wuxuu bixiyaa abaalmarinta xushamadda qaranka". |
| | (12) Wuxuu cafis u fidiyaa ama ciqaab ka dhimaa dembiilayaal marka uu u soo gudbiyo Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka si waafaqsan habraacyada ku xusan Dastuurka iyo xeerarka kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | Faqradda 12aad waa xarafkii "P" ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka. Faqraddan waxaa lagu sameeyay dib u qorid kooban. Waxaa "Guddiga Adeegga Garsoorka" lagu beddelay "Xeer-ilaaliyaha |

| | | |
|---|---|---|
| | | Qaranka si waafaqsan habraacyada ku xusan Dastuurka iyo xeerarka kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya." |
| | (13) Wuxuu fuliyaa dhammaan awoodaha kale ee Dastuurka iyo xeerarka dalku ay siiyaan. | **Faqrad cusub:** Faqraddaan waxay tilmaamaysaa in Madaxweynuhu fuliyo dhammaan hawlaha kale ee Dastuurka iyo xeerarka dalku u xil saaraan. |
| | **Qodobka 115aad: Soo Saarista Digreetooyinka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu soo saaraa digreetooyin iyo amarro khuseeya awoodaha u gaarka ah Dawladda Federaalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa awoodda Madaxweynaha in uu digreetooyin iyo amarro soo saaro kuwaas oo khuseeya awoodaha u gaarka ah Dawladda federaalka. |
| | (2) Digreetooyinka iyo amarrada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ka dhaqan galayaan guud ahaan geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in digreetooyinka iyo amarrada madaxweynaha ay ka hirgelayaan dhammaan geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. |

| | | |
|---|---|---|
| | (3) Digreetooyinka iyo amarrada Madaxweynaha JFS waa inayna ka hor imaan Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo xeerarka federaalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in digreetooyinka iyo amarrada Madaxweynaha ayna marna ka hor imaan karin Dastuurka iyo xeerarka federaalka. |
| **Qodobka 91aad: Muddada Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 116aad: Muddada Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | Cinwaanka Qodobka 116aad oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 91aad waxba lagama beddelin. |
| Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu xilka haynayaa muddo afar (4) sano ah oo ka bilaabata maalinta xilka loo dhaariyo, sida ku xusan qodobka 96 ee Dastuurka. | (1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu xilka haynayaa muddo shan (5) sano ah oo ka bilaabata maalinta xilka loo dhaariyo. | "Muddo afar (4) sano" waxaa laga dhigay "muddo shn (5) sano", sidoo kale waxaa la tiray "sida ku xusan qodobka 96aad ee Dastuurka" |
| | (2) Qofna looma dooran karo xilka Madaxweynennimada in ka badan laba muddo xileed oo xiriir ah. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in aan qofna loo dooran karin xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya in ka badan laba muddo xileed oo xiriir ah. |

| Qodobka 92aad: Maxkamadeynta iyo Maamus-Ka-qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya | Qodobka 117aad: Eedaynta iyo Maamuus Kaxayuubinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | Cinwaanka Qodobka 117aad oo ahaa Qodobka 92aad ee asalka Dastuurka waxaa la tiray ereyada "Maxkamadeynta iyo Maamus-Ka-qaadista", waxaana lagu beddelay "Eedeynta iyo Maamuus Kaxayuubinta". |
|---|---|---|
| (1) Xil-ka-qaadidda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa soo jeedin kara Golaha Shacabka marka lagu eedeeyo khiyaano-qaran, xadgudub culus oo Dastuuri ah ama ku-xad-gudub sharciyada kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | (1) Eedaynta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa soojeedin kara Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya marka lagu eedeeyo mid ka mid ah arrimaha soo socda:<br>a) Khiyaano qaran;<br>b) Ku xadgudubka Dastuurka iyo xeerarka kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; ama<br>c) Xilgudasho la'aan joogta ah sababo maskaxeed ama jireed awgood oo uu si rasmi ah u caddeeyay dhakhtar caafimaad oo la aqoonsanyahay. | Faqradda 1aad waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo dib u qoris. Waxaa la beddelay oo lagu soo kordhiyay in Golaha Shacabka u soo jeedin karo eedeynta Madaxweynaha ayadoo la raaciyay sababaha lagu soo eedayn karo eedeynta Madaxweynaha. |
| | (2) Khiyaano qaran Dastuurka dhexdiisa waxaa loola jeeda:<br>a) Fal kasta oo lagu hor istaagayo ama lagu baabi'inayo ku dhaqanka iyo sarraynta sharciga;<br>b) Fal kasta oo lid ku ah gobannimadda, madaxbannaanida iyo midnimadda Qaranka Soomaaliya; iyo<br>c) Daacad u noqoshada, gacan siinta iyo u basaasidda quwado shisheeye. | **Faqrad cusub:**<br>Faqradda 2aad waa mid cusub oo lagu qeexayo falka khiyaanada qaran oo ay soo hoos galayaan falalka ku xusan xarfaha "a, b, iyo c" ee isla faqraddan. |
| (2) Hindisaha xilka-qaadista Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka waxaa golaha hor-keeni kara ugu yaraan saddex dalool hal dalool (1/3) | (3) Hindisaha soojeedinta eedaynta Madaxweynaha ee ku xusan faqradda 1aad, waxaa Golaha Shacbka ee Baarlamaanka horkeeni kara ugu yaraan saddex | Faqradda 3aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka |

| | | |
|---|---|---|
| xubnaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka, Maxkamadda Dastuuriga ayaa galaysa dhageysiga eedeyntu inay sal leedahay. | meelood hal (1/3) xubnaha guud ee gole kasta ee Baarlamaanka Federaalka. Maxkamadda Dastuuriga ayaa go'aan ka gaaraysa in eedeyntu ay sal leedahay. | waxay ahayd faqradda 2aad ee asalka Dastuurka oo tilmaamaysa in habraaca hindisaha soojeedinta eedaynta ay soojeedin karaan saddex dalool hal dalool xubnaha Golaha Shacabka. Dhammaan waxaa meesha laga saaray kaalinta maxkamadda ayadoo awooddaas la siiyay Golaha Aqalka Sare. Sidaas darteed waxaa la tiray *"Maxkamadda Dastuuriga ayaa galaysa dhageysiga eedeyntu inay sal leedahay".* |
| | (4) Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa inuu go'aan ka gaaraa eedaymaha loo soojeediyey Madaxweynaha muddo aan ka badnayn soddon (30) maalmood oo ka bilaabanaysa maalinta loo gudbiyo Guddoomiyaha Golaha Shacabka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay faahfaahinaysaa muddada Golaha Shacabka laga rabo in uu go'aan uga gaarayo eedaymaha loo soojeediyey Madaxweynaha. |
| | (5) Go'aanka eedaynta Madaxweynaha waxa uu ku hirgalayaa coddayn qarsoodi ah oo saddex meelood labo (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka, waxaana go'aanka loo gudbinayaa Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare muddo aan ka badnayn saddex (3) maalmood. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waa mid cusub waxayna xeerinaysaa in go'aanka soojeedinta eedaymaha Madaxweynaha ku ansaxayo codadka saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee Golaha |

| | | |
|---|---|---|
| | | Shacabka oo kaddib loo gudbinayo Golaha Aqalka sare muddo saddex (3) maalmood ah. |
| | (6) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa ay ka doodayaan go'aanka eedaynta uu Golaha Shacabku u soo gudbiyey muddo aan ka badnayn shan iyo toban (15) maalmood oo ka billaabanaysa maalinta loo soo gudbiyey go'aanka Golaha Shacabka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa kaalinta Golaha Aqalka Sare iyo muddada uu ka doodayo go'aanka eedeynta ee uu Golaha Shacbku u soo gudbiyey. |
| | (7) Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxa uu go'aanka maamuus kaxayuubinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku ansixinayaa cod qarsoodi oo saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Aqalka Sare. Guddoomiyaha kulankaasi ayaa ku dhawaaqaya go'aanka maamuus ka xayuubinta Madaxweynaha oo noqonaya mid kama dambeys ah. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysa in Golaha Aqalka Sare uu leeyahay go'aanka kama dambaysta ah ee maamuus ka xayuubinta Madaxweynaha uuna ku ansaxayo oggolaashaha saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Aqalka Sare. Sidoo kale waxay xeerinaysaa in Guddoomiyaha kulanka uu ku dhawaaqayo go'aanka maamuus kaxayuubinta. |
| | (8) Haddii Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uu ansixiyo maamuus kaxayuubinta | **Faqrad cusub:** |

| | | |
|---|---|---|
| | Madaxweynaha, si waafaqsan faqradda 7aad ee qodobkan, waxaa uu weynayaa xilkiisa. Haddiise, la waayo codka saddex meelood laba (2/3) ee xubnaha guud ee Aqalka Sare, Madaxweynuhu wuxuu sii wadanayaa muddo xileedkiisa. | Faqraddan waxay dhigaysaa in haddii Golaha Aqalka sare uu u codeeyo go'aanka Golaha Shacabka ee maamuuska ka xayuubinta Madaxweynaha si waafaqsan Faqradda 7aad ee qodobkan in uu xilkissa weynayo. Laakiin haddii Golaha Aqalka sare diido go'aanka maamuus ka xayuubinta in Madaxweynuhu sii wadanayo muddo xileedkiisa. |
| | (9) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu sii gudanayaa waajibaadkiisa shaqo ilaa iyo inta Golaha Aqalka Sare go'aan kamadambays ah ku ansixinayo maamuus kaxayuubinta. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay caddaynaysa inta ay socoto habka eedaymaha uu Madaxweynuhu sii gudanayo waajibaadkiisa ayada oo aan wax u dhimeyn maamuuskiisa iyo mansabkiisa madaxweynennimo. |
| | (10) Madaxwaynuhu ma go'aamin karo doorasho ama afti dadweyne inta lagu guda jiro habraaca eedeynta iyo maamuus ka xayuubinta. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay nidaaminaysaa waxyaabaha ka reebban Madaxweynaha |

| | | |
|---|---|---|
| | | inta uu socdo habraaca eedaymihiisa. |
| (3) Haddii ay go'aamiso maxkamadu inay eedayntu sal sharci leedahay, saddex dalool labo (2/3) ee labada aqal ee Baarlamaanka ayaa Madaxweynaha xilka ka qaadaya. | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeedana waxaa lagu daray faqradaha qodobkan. |
| (4) Haddii Madaxweynaha xilka lagaga qaado si waafaqsan faqradaha 1 ilaa 3 ee qodobkan, waxaa xilka madaxweyninimo la wareegaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka. | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeedana waxa lagu daray Qodobka 118aad ee soojeedinta. |
| **Qodobka 93aad: Iscasilaadda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | | Nuxurka Qodobka 93aad ee asalka Dastuurka waxaa lagu daray Qodobka 119aad ee wax-kabeddelka Dastuurka. |
| Madaxweynuhu wuxuu u gudbinayaa istiqaaladiisa Barlamaaanka Federaalka, isaga oo marsiinaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah. | | |
| **Qodobka 94aad: Ku-simaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 118aad: Ku-simaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | Cinwaanka Qodobka 94aad ee asalka Dastuurka oo noqday Qodobka 118aad ee wax-kabeddelka Dastuurka sidiisa ayaa loo qaatay. |
| (1) Haddii Madaxweynuhu ka maqan yahay dalka ama caafimaad-darro ama sabab kasta oo kale darteed uusan awoodin inuu guto xilkiisa, Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah ayaa xilkiisa sii qabanaya ilaa inta uu Madaxweynuhu xilkiisa dib ugu soo noqonayo. | (1) Haddii Madaxweynuhu ka maqan yahay dalka ama caafimaad-darro ama sabab kasta oo kale darteed uusan awoodin inuu guto xilkiisa, Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah ayaa xilkiisa sii qabanaya ilaa inta uu Madaxweynuhu xilkiisa dib ugu soo noqonayo. Haddii Guddoomiyuhu maqanyahay | Faqraddan waxaa lagu kordhiyay oo keliya "Haddii Guddoomiyuhu maqanyahay waxaa ku-sime madaxweyne noqonaya Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare". |

| | | |
|---|---|---|
| | waxaa ku sime-madaxweyne noqonayaa Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare. | |
| (2) Ku-xigeenka koowaad ee Guddoomiyaha Baarlamaanka ayaa si kumeel gaar ah u haynaya Xilka Guddoomiyaha Baarlamaanka inta uu Guddoomiyaha Baarlamaanku sii hayo xilka Madaxweyninimo. | (2) Ku-xigeenka koowaad ee Guddoomiyaha Golaha ah ku-simaha Madaxweynaha ayaa si ku-meelgaar ah u haynaya Xilka Guddoomiyaha inta uu Guddoomiyuhu yahay ku-simaha Madaxweynaha. | Faqraddan waxaa lagu sameeyey siiqa toosin |
| **Qodobka 95aad: Bannaanaanta Xafiiska Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | **Qodobka 119aad: Bannaanaanta Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | Cinwaanka Qodobka 95aad ee asalka Dastuurka oo noqday Qodobka 119aad ee wax-kabeddelka Dastuurka sidiisa ayaa loo qaatay. |
| | (1) Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ku bannaanaan karaa sababaha soo socda midkood:<br>a) Geeri;<br>b) Iscasilaad qoraal ah oo uu u soo gudbiyo Guddoomiyaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;<br>c) Xilgudasho la'aan joogta ah ee xilka xafiiska sababo maskaxeed ama jireed awgood oo uu caddeeyey dhakhtar caafimaad oo la aqoonsanyahay, ayna go'aamisay maxkamadda awoodda u leh; iyo<br>d) Maamus ka xayuubin si waafaqsan Qodobka 117aad ee Dastuurka. | **Faqrad cusub:**<br>Farqaddan waxay qeexaysaa sababaha uu ku banannaan-karo xilka Madaxweynaha oo ay ka mid yihiin: geeri, iscasilaad oo uu qoraal ahaan ugu gudbiyo Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare, haddii xilka laga xayuubiyo si waafqsan Dastuurka, iyo xilgudasha la'aan joogta ah sababo maskaxeed ama jireed oo uu caddeeyey dhakhtar caafimaad la aqoonsanyahay. |
| | (2) Guddoomiyaha Aqalka Sare marka uu xaqiijiyo arrimaha ku xusan faqradda 1(a) iyo (b) ee qodobkan, | **Faqrad cusub:** |

| | | |
|---|---|---|
| | waxa uu u gudbinayaa Maxkamadda Sare si ay ugu dhawaaqdo bannaanaashaha xilka Madaxweynaha. | Farqaddan waxay xeerinaysaa habraaca in Guddoomiyaha Aqalka Sare uu warqadda iscasilaadda ee Madaxweynaha u gudbinayo Maxkamadda Sare iyo xaqiijinta dhab ahaanta warqadda iscasilaadda. |
| (1) Haddii uu bannaanaado xafiiska Madaxweyne, waxaa qabanaya xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka ilaa laga soo dooranayo Madaxweyne cusub muddo aan ka badnayn soddon (30) maalmood gudahood. | (3) Haddii uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu xilka banneeyo si waafqsan farqadda 1aad ee qodobkan, doorasho Madaxweyne oo gaar ah ayaa lagu qaban doonaa muddo soddon (30) maalmood gudahood ah. Xaaladdaas, Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa xilka sii hayn doona ilaa Madaxweyne cusub laga dooranayo. | Faqradda 3aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa nuxurkii faqradda 1aad ee asalka Dastuurka waxaana lagu kordhiyay in Guddoomiyaha Golaha Shacabka uu sii ahaanayo sii-haye inta madaxweyne laga dooranayo. |
| | (4) Haddii Guddoomiyaha Golaha Shacabka oo xilka ku-simannimada Madaxweynaha haya uu is casilo ama si buuxda oo joogto ah awood ugu waayo in uu guto waajibaadkiisa, Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa noqonaya sii hayaha Xilka Madaxweynaha. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysa haddii uu iscasilo ku-simaha madaxweynaha ama si buuxda oo joogto ah awood u waayo in uu guto waajibaadkiisa in Guddoomiyaha Aqalka Sare xilka |

| | | |
|---|---|---|
| | | Madaxweynennimada sii haynayo. |
| | (5) Siihayaha Xilka Madaxweynaha ma laha awoodaha soo socda:<br>(a) Ma kala diri karo xukuumadda, isbeddelna kuma samayn karo;<br>(b) Ma kala diri karo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>(c) Ma magacaabi karo xilalka dawladeed ee dhaca awoodda Madaxweynaha;<br>(d) Ma dallacsiin karo saraakiil amni ama saraakiisha kale ee dawladda;<br>(e) Dembi ma cafin karo, mana khafiifin karo;<br>(f) Ma iclaamin karo afti dadweyne; iyo<br>(g) Kuma dhawaaqi karo xaalad dagaal ama xaalad degdeg ah oggolaansho la'aanta Baarlamaanka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysa arrimaha Siihaya Madaxweynuhu qaban karin oo ka reebban. |
| (2) Haddii Madaxweynaha uu ku dhaco xanuun aan ka-raysasho lahayn mudo ka badan sadddex bilood oo ay caddeeyeen xeeldheereyaal caafimaad waxaa sharciyan bannaanaanaya xilka xafiiska Madaxweynaha. | | **Faqraddan waa la tiray:**<br>Faqradda 2aad ee Asalka Dastuurka waa la tiray, nuxuurkeedana waxaa loo raray faqradda 1aad ee isla qodobkan ee soojeedinta wax-kabeddelka. |
| | (6) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa dooranaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo buuxinaya xilka bannaanaaday si waafaqsan faqradda (1) ee qodobkan, doorashadana waa in lagu qabtaa soddon (30) maalmood gudahood laga billaabo maalinta uu xilku banaannado. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysa in Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uu dooranayo madaxweynaha cusub ee beddelaya. |

| | | |
|---|---|---|
| (3) Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka beddelaya Madaxweyne mansabkiisi bannaanaaday sida ku xusan farqadda (2) ee qodobkan waxaa loo maraya habraaca doorashada Madaxweynaha ku xusan ee Qodobka 89aad ee Dastuurka. | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurkeedana waxaa lagu daray faqradda 6aad ee isla qodobkan ee soojeedinta wax-kabeddelka. |
| (4) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka lagu doorto si waafaqsan faqradda (3) ee Qodobkan wuxuu dhamaystiraya muddada xilhaynta ee u harsanayd Madaxweynihii ka horeeyey. | (7) Madaxweynaha cusub ee la doortay si waafaqsan faqradda 6aad ee qodobkan wuxuu dhammaystirayaa muddada ka harsan muddo xileedka madaxweynihii hore. | Faqradda 7aad oo ahayd faqradda 4aad ee asalka Dastuurka waxba lagama beddelin ee siiqayn ayaa lagu sameeyay. |
| **Qodobka 96aad: Dhaarinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | | Qodobkan 96aad ee Asalka Dastuurka waxaa loo raray Qodobka 112aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |
| Inta uusan xilka bilaabin, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu Baarlamaanka Federaalka hortiisa ku marayaa dhaar, waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, dhaartaas oo ah sidan:<br><br>"Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkayga u gudanaayo si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diintu ku jirto, dhawrana Dastuurka qaranka iyo shuruucda kale oo dalka u yaalla" | | |

## CUTUBKA SIDDEEDAAD:
## XUKUUMADDA

**Cutubka siddeedaad wuxuu ka koobanyahay toban (10) qodob oo ka billaabanaya Qodobka 120aad ilaa 129aad, halka asalka Dastuurku ka koobnaa siddeed (8) qodob. Waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyay laba (2) qodob oo kala ah qodobbada 122aad iyo 128aad iyo sagaal (9) faqradood, oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Waxaa la tiray laba (2) faqradood, oo ku jiray asalkii Dastuurka.**

**Cutubkan siddeedaad arrimaha lagu soo kordhiyay waxaa ka mid ah:**

- **Xilwaayidda Xubnaha Golaha Wasiirrada; iyo**
- **Codka Xilkaqaadidda Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada.**

| CUTUBKA SIDDEEDAAD:<br>XUKUUMADDA | | |
|---|---|---|
| **Asalka Dastuurka KMG ah** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD** | **Faallo** |
| **Cutubka 8aad:<br>Laanta Fulinta** | **Cutubka 8aad:<br>Xukuumadda** | Magaca Cutubka oo ahaa "Laanta Fulinta" waxaa laga dhigay "Xukuumadda" |
| **Qodobka 97aad: Golaha Wasiirrada** | **Qodobka 120aad: Golaha Wasiirrada** | Cinwaanka Qodobka 97aad ee asalka Dastuurka oo noqday Qodobka 120aad, sidiisa ayaa loo qaatay. |
| (1) Awoodda fulinta ee Jamhuuriyadda Federaalka ah waxaa leh Golaha Wasiirrada, waxayna u qabanayaan sida Dastuurka ku tilmaaman. | | **Faqraddan waa la tiray**<br>Nuxurkeeda waxaa lagu daray qodobkan faqradihiisa. |
| (2) Golaha Wasiirradu waa ha'adda fulinta maamulka ugu sarraya Dowladda Federaalka, wuxuuna ka kooban yahay Ra'iisul Wasaaraha Ra'iisul-Wasaare ku-xigeen/ku-xigeenno, Wasiirro, Wasiirro-Dawlayaal iyo Wasiirro-ku-Xigeenno. | (1) Golaha Wasiirradu wuxuu ka koobanyahay Ra'iisul Wasaare, Ra'iisul Wasaare Kuxigeen/kuxigeenno, Wasiirro, Wasiiru Dowlayaal iyo Wasiir kuxigeenno. Xeerka nidaamka xukuumadda uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa lagu nidaaminayaa tirada iyo waajibaadka wasaaradaha. | Faqradda 1aad ee soojeedinta oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa la tiray "Golaha Wasiirradu waa hay'adda fulinta maamulka ugu sarreeysa Dowladda Federaalka". |
| | (2) Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu magacaaba xilka ka qaadaa Ra'iisul Wasaare kuxigeen/kuxigeenno, Wasiirro, Wasiir Kuxigeenno iyo Wasiiru Dawlayaal, kaddib marka uu helo oggolaanshaha Madaxweynaha. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Ra'iisul Wasaarahu magacaabayo xilkana ka qaadi karo Ra'iisul Wasaare kuxigeen/kuxigeenno, Wasiirro, Wasiir kuxigeenno iyo Wasiiru Dawlayaal, kaddib marka uu |

| | | |
|---|---|---|
| | | helo oggolaanshaha Madaxweynaha. |
| (3) Ra'iisul-wasaarahu wuxuu magacaabayaa Ra'iisul Wasaare ku-xigeenno, wasiirro, wasiirro-Dawlayaal iyo wasiirro-ku-xigeeno. Golaha Wasiirrada waa ay ka iman karaan xubin ka mid ah Golaha Shacabka iyo xubin aan ka mid aheyn Golaha Shacabkaba. | (3) Golaha Wasiirrada, oo uu hoggaamiyo Ra'iisul Wasaaraha, ayaa mas'uul ka ah dejinta iyo hirgelinta siyaasadda dawladda iyo maamulidda hawlaha qaranka, waxayna ku shaqeynayaan barnaamijka xukuumadda ee uu ansixiyo Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | Faqradda 3aad waxaa lagu xeeriyay nuxurkii qayb ka mid ah Faqradda 2aad ee asalka Dastuurka waxaana lagu kordhiyay "waxayna ku shaqeynayaan barnaamijka xukuumadda ee uu ansixiyo Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. |
| (4) Xil banneeynta jagada Ra'isul Wasaaraha oo sababaysa dhicitaanka Golaha Wasiiradda, waxay ku imaan kartaa istiqaalad, xil ka qaadid, xil gudasho la'aan iyo geeri. | | **Faqraddan waa la tiray:** Nuxurka Faqradda 4aad ee qodobkan waxaa lagu xeeriyay Qodobka 120aad |
| **Qodobka 98aad: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Wasiirrada** | **Qodobka 121aad: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Wasiirrada** | Cinwaanka Qodobka 121aad oo ahaa Qodobka 98aad ee asalka Dastuurka waxba lagama beddelin ee sidiisa ayaa loo qaatay. |
| (1) Qofka qabanaaya xilka Xafiiska Ra'iisul-Wasaarahaiyo Ku-xigeenkiisa:<br>(a) Waa in aan da'diisaka yaraan afartan (40) sano; iyo<br>(b) Waa in Aqoontiisu gaarsiisan tahay heer jaamacadeed. | (1) Waxaa xilka Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya loo magacaabi karaa muwaaddin kasta oo buuxiyay shuruudaha soo socda:<br>a) Inuu yahay muwaaddin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo muslim ah.<br>b) In da'diisu aanay ka yarayn afartan (40) sano;<br>c) In aqoontiisu ay gaarsiisantahay ugu yaraan heer jaamacadeed, uuna leeyahay aqoon maamul | Faqraddan waxay xeerinaysaa shuruudaha laga doonayo R/Wasaaraha oo asalka Dastuurka ahayd laba shuruudood oo ah: in da'diisu aysan ka yarayn 40 sano; iyo in aqoontiisu gaarsiisantahay heer jaamacadeed oo |

| | | |
|---|---|---|
| | iyo waayo aragnimo hoggaamineed oo aan ka yarayn 10 sano;<br>d) In labadiisa waalid ay yihiin muwaaddiniin Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya;<br>e) In uusan qabin xaas ajnabi ah;<br>f) In lagu yaqaanno dhaqan suubban bulshada dhexdeedda;<br>g) Inuu si joogto ah u deggenaa dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ugu yaraan saddex sano;<br>h) Inuu dhimirkiisu dhanyahay, horayna aan dhakhtar si rasmi ah ugu caddayn xanuun dhimirka ah;<br>i) In uusan haysan jinsiyad dal kale ama uu ka tanasulo kaddib magacaabistiisa; iyo<br>j) Inuu u soo gudbiyo xogta guud ahaan hantidiiisa oo ay ku jirto guurto iyo maguurtaba. | soojeedinta wax-kabeddelka ah xarfaha (b) iy (c).<br><br>Faqraddan waxaa lagu soo kordhiyay shuruudaha kale oo ku xusan xarfahan hoose:<br><br>***Xarafka (a)*** Inuu yahay muwaaddin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo muslim ah;<br><br>***Xarafka (ð)*** In labadiisa waalid ay yihiin muwaaddiniin Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya;<br><br>***Xarafka (e)*** In uusan qabin xaas ajnabi ah;<br><br>***Xarafka (f)*** In lagu yaqaanno dhaqan suubban mujtamaca dhexdiisa;<br><br>***Xarafka (g)*** Inuu si joogto ah u deggenaa dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ugu yaraan saddex sano; |

| | | |
|---|---|---|
| | | ***Xarafka (h)*** Inuu dhimirkiisu dhanyahay, horayna aan dhakhtar si rasmi ah ugu caddayn xanuun dhimirka ah;<br><br>***Xarafka (i)*** In uusan haysan jinsiyad dal kale ama uu ka tanasulo kaddib magacaabistiisa; iyo<br><br>***Xarafka (j)*** Inuu u soo gudbiyo xogta guud ahaan hantidiiisa oo ay ku jirto guurto iyo maguurtaba. |
| (2) Qofka loo magacaabayo Wasiir ama Wasiir Dawlo ama Wasiir-ku-xigeen:<br>(a) Waa inaan da'diisu ka yaraan soddon (30) sano;<br>(b) Waa in aqoontiisu gaarsiisan tahay heer jaamacadeed | (2) Xubin Golaha Wasiirrada waxaa loo magacaabi karaa muwaaddin kasta oo buuxiyey shuruudo la mid ah kuwa Ra'iisul Wasaaraha marka laga reebo shuruudda ku xusan xarfaha "b" ee faqradda 1aad ee qodobkan oo noqonaysa soddon (30) sano; xarafka (c) oo noqonaysa shan (5) sano; (e), iyo (i). | Faqraddan waxaa lagu sameeyay dib u qorid. Sidoo kale waxay tilmaamaysaa in isla shuruudihii faqradda 1aad laga rabo xubnaha Golaha Wasiirrada marka laga reebo xarfka (b) oo noqonaya soddon sano; xarafka (c) oo noqonaya (5) sano iyo xarfaha (e) iyo (i). |
| (3) Xubnaha Golaha Wasiirrada muddada ay xilka hayaan, waxaa ka reebban:<br>(a) In ay qabtaan xilal kale oo aan ahayn xilka xildhibaannimada Golaha Shacabka; | (3) Xubnaha Golaha Wasiirrada muddada ay xilka hayaan, waxaa ka reebban:<br>(a) In ay qabtaan xilal kale ee xafiis dawladeed ama mas'uuliyad kale ee heerarka kala duwan ee dawladda; | Faqradda 3aad waxay xeerinaysaa waxyaalaha ka reebban xubnaha Golaha Wasiirrada muddada ay xilka hayaan ayaa ahayd faqraddii 2aad ee asalka Dastuurka. |

| | | |
|---|---|---|
| (b) In ay qabtaan meherad madaxbannaan, hawl ganacsi, maaliyadeed ama warshadeed oo u gaar ah;<br>(c) In ay iibsadaan ama ijaartaan hanti Dawladeed;<br>(d) In ay hantidooda ka gadaan ama ka ijaaraan Dawladda. | (b) In ay ku shaqeeyaan xirfad gaar ah ama uu fuliyo hawlo ganacsi gaar ah, mid maaliyadeed ama hawlo warshadeed; iyo<br>(c) Inuu iibsado ama ijaarto hanti dawladeed, ama uu hantidiisa ka gado ama ka ijaaro dawladda. | ***Xarafka (a)*** waxaa laga saaray "aan ahayn xilka xildhibaannimada Golaha Shacabka"<br><br>***Xarafka (d)*** nuxurkiisa waxaa lagu biiriyey xarafka (c). |
| | **Qodobka 122aad: Xilwaayidda Xubnaha Golaha Wasiirrada** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Xubnaha Golaha Wasiirrada waxay xilkooda ku waayi karaan:<br>a) Geeri;<br>b) Iscasilaad qoraal ah;<br>c) Xilkaqaadis;<br>d) Awood la'aan joogta ah oo xagga xilgudashada oo ka timid cudur dhimireed ama jireed awgood oo uu caddeeyay dhakhtar caafimaad; iyo<br>e) Haddii uu galo fal khiyaano qaran, laaluush, ama xadgudub culus oo dastuuri ah ama xeerarka kale ee dalka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tibaaxaysaa sababaha Golaha Wasiirrada ay xilkooda ku weyn karaan oo ay ka mid tahay: geeri, iscasilaad qoraal ah, xil gudasho la'aan sababo maskaxeed, eedeyn khiyaano qaran iyo ku xadgudub culus oo dastuuri ah ama xeerarka kale ee dalka.<br>Faqraddan nuxurkeeda waxaa laga soo qaatay qodobka 97aad faqradda 4aad ee asalka Dastuurka. |
| | (2) Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay u baahantahay kalsooni-siinta Golaha Shacabka haddii uu isbeddel ku yimaado kala bar in ka badan xubnaha Golaha Wasiirrada. | **Faqrad cusub:**<br>waa mid cusub oo tilmaamaysaa in Xukuumadda FS ay u baahantahay kalsoonida Golaha Shacabka |

| | | |
|---|---|---|
| | | haddii uu isbeddel ku yimaado kala bar in ka badan xubnaha Golaha Wasiirrada. |
| **Qodobka 99aad: Xilalka Golaha Wasiirrada** | **Qodobka 123aad: Waajibaadka Golaha Wasiirrada** | Cinwaanka Qodobka 99aad ee asalka Dastuurka oo hadda noqday Qodobka 123aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka Ereyga "Xilalka", waxaa lagu beddelay "Waajibaadka" |
| Golaha Wasiirradu waxa uu leeyahay awoodaha soo socda:<br>(a) Dejinta siyaasadda guud ee Xukuumadda iyo dhaqangelinteeda;<br>(b) Ogolaanshaha iyo fulinta xeerarka maamulka, si waafaqsan shuruucda;<br>(c) Diyaarinta hindiso sharciyadeed iyo soo-hor-dhigiddooda Golaha Shacabka;<br>(d) Diyaarinta miisaaniyad-sannadeedka iyo xisaab-xirkooda;<br>(e) Dejinta qorshaha guud oo lagu hormarinaayo dalka;<br>(f) Dhaqangelinta shuruucda, sugidda nabadgelyada dalka iyo ilaalinta danaha Dawladda;<br>(g) Magacaabidda iyo xil-ka-qaadidda saraakiisha sare ee Dawladda;<br>(h) Golaha Wasiirradda waxay soo jeedinayaan magacaabidda/ xil kaqaadidda danjirayaasha, qunsiliyadda guud iyo diblomaasiyiinta. | Golaha Wasiirradu waxay leeyihiin awoodaha iyo waajibaadyada soo socda:<br>a) Dejinta iyo hirgalinta siyaasadda guud ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyaga oo ku shaqaynaya aragtida iyo hagidda Madaxweynaha;<br>b) Diyaarinta hindise-xeereed, miisaaniyad sannadeedka iyo xisaabxirkeeda ee loo gudbinayo Baarlamaaanka Federaalka;<br>c) Dejinta iyo hirgelinta xeer nidaamiyayaasha si waafaqsan xeerarka dalka;<br>d) Soojeedinta magacaabista iyo xil-ka-qaadista, si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda, xilalka soo socda:<br>i. Danjireyaasha iyo qunsuliyadaha guud;<br>ii. Taliyeyaasha Ciidammada Federaalka;<br>iii. Guddiyada iyo Hay'adaha Madaxabannaan; iyo<br>iv. Xilalka kale ee lagu xeeriyay Dastuurka iyo xeerarka dalka. | ***Xarafka (a)*** waxaa lagu sameeyay siiqayn ayadoo lagu kordhiyay *"iyaga oo ku shaqaynaya aragtida iyo hagidda Madaxweynaha."*, waxayna nidaaminaysaa dejinta iyo hirgelinta siyaasadda guud.<br><br>***Xarafka (b)*** ee soojeedinta waa nuxurkii xarfaha (c) iyo (d) ee asalka Dastuurka waxaana lagu sameeyay toosin, wuxuuna nidaaminayaa diyaarinta hindise-xeereedka.<br><br>***Xarafka (c)*** ee soojeedinta waa nuxurka xarafka (b) ee asalka Dastuurka waxayna xeerinaysaa dejinta xeer-nidaamiyayaasha. |

| | | |
|---|---|---|
| (i) Awoodaha kale ee Dastuurka ama shuruucda lagu siiyay. | e) Wadaxaajoodyada heshiisyada caalamiga ah iyo horgeyntooda Baarlamaanka Federaalka si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka;<br>f) Hirgelinta xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>g) Soojeedinta ku dhawaaqid xaalad degdeg ah ama mid dagaal si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka; iyo<br>h) Qabashada hawlaha kale oo uu u xilsaaray Dastuurku ama xeerarka kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | ***Xarafka (d)*** ee soojeedinta waa nuxurka xarfaha (g) iyo (h) ee asalka Dastuurka, waxaana lagu sameeyay faahfaahin dheeraad ah, oo ah soojeedinta magacaabidda iyo xil-kaqaadista Denjireyeyaasha, Taliyeyaasha iyo hay'adaha kale ee madaxabannaan.<br><br>***Xarafka (e)*** ee soojeedinta waa mid cusub oo xeerinaysa wada-xaajoodka heshiisyada caalamiga ah.<br><br>***Xarafka (f)*** waxaa lagu sameeyay siiqo toosin, waxayna xeerinaysaa dhaqangelinta xeerarka uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka.<br><br>***Xarafka (g)*** ee soojeedinta waa mid cusub, waxayna nidaamineysaa soojeedinta Golaha Wasiirrada xaalad degdeg ah iyo dagaal.<br><br>***Xarafka (h)*** ee soojeedinta waa nuxurkii xarafka (i) ee |

| | | |
|---|---|---|
| | | asalka Dastuurka oo toosin lagu sameeyay. |
| **Qodobka 100aad. Xilka iyo Awoodda Ra'iisul Wasaaraha** | **Qodobka 124aad: Awoodaha Ra'iisul Wasaaraaha** | Cinwaanka Qodobka 100aad ee asalka Dastuurka oo ah Qodobka 124aad ee wax-kabeddelka Dastuurka waxaa Ereyga "awoodda" laga dhigay "awoodaha", ayada oo la tiray "Xilka". |
| Awoodaha Ra'iisul Wasaaraha waa:<br>(a) Madaxa Xukuumadda Federaalka ah;<br>(b) Magacaabista iyo xil ka qaadista xubnaha Golaha Wasiirrada;<br>(c) Horgeynta Golaha Shacabka xubnaha Golaha Wasiirrada iyo Barnaamijka Xukuumadiisa si ay u siiyaan kalsooni.<br>(d) In uu qabto hawlaha kale ee loogu loogu xilsaaray Dastuurkan ama sharci kale ee waafaqsan Dastuurkan iyo qiyamkiisa. | Ra'iisul Wasaaraha oo ah Madaxa Xukuumadda Federaalka Soomaaliya wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:<br>a) Matalaadda Golaha Wasiirradda iyo shir-guddoominta kulammadooda;<br>b) Magacaabidda iyo xilkaqaadidda xubnaha Golaha Wasiirrada;<br>c) Isku xirka hawlaha wasaaradaha, hay'adaha iyo xafiisyada dawladda;<br>d) Saxiixidda go'aannada Golaha Wasiirrada;<br>e) Adkaynta xiriirka iyo Iskaashiga Xukuumadda Federaalka iyo Xukuumadaha Dawlad Goboleedyada;<br>f) Horumarinta iyo sare u qaadidda maamul wanaagga dhammaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo<br>g) Qabashada hawlaha kale uu u xilsaaray Madaxaweynaha si waafaqsan Dastuurka ama xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | ***Xarafka (a)*** waa mid cusub oo la soo kordhiyay oo tilmaamaya in Ra'iisul Wasaaruhu matalo Golaha Wasiirrada, uuna shirguddoomiyo.<br><br>***Xarafka (b)*** wuxuu nidaaminayaa magacaabidda iyo xilkaqaadidda xubnaha Golaha Wasiirrada.<br><br>Waxaa la tiray xarafka (c) ee Asalka Dastuurka oo ku saabsanaa kalsooni siinta Golaha Shacabka ee Golaha Wasiirada.<br><br>***Xarafka (c)*** waa mid cusub oo tilmaamaya mas'uuliyadda iskuxirka hawlaha |

| | | |
|---|---|---|
| | | wasaaradaha iyo xafiisyada dawladda.<br><br>***Xarafka (∂)*** waa mid cusub oo lagu nidaaminayo saxiixidda go'aannada Golaha Wasiirrada;<br><br>***Xarafka (e)*** waa mid cusub oo lagu xeerinayo adkaynta xiriirka iyo Iskaashiga Xukuumadda Federaalka iyo Xukuumadaha Dawlad Goboleedyada;<br><br>***Xarafka (f)*** waa mid cusub oo tilmaamaysa in Ra'iisal Wasaaruhu uu xilsaaranyahay horumarinta iyo sare u qaadidda maamul wanaagga; iyo<br><br>***Xarafka (g)*** waa xarafka (d) ee asalka Dastuurka waxaana lagu xeeriyay in Ra'iisalb Wasaaruha laga rabo in u fuliyo hawlaha kale uu u xilsaaray Madaxaweynaha si waafaqsan Dastuurka ama xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. |

| | | |
|---|---|---|
| **Qodobka 101aad: Ku-Xigeenka Ra'iisul Wasaaraha** | **Qodobka 125aad: Kuxigeenka Ra'iisul Wasaaraha** | Cinwaanka Qodobka 101aad ee asalka Dastuurka oo hadda ah Qoodbka 125aad waxba lagama beddelin. |
| Ku-Xigeenka Ra'iisul Wasaaraha wuxuu qabtaa xilka Ra'iisul Wasaraha marka uu dalka ka maqan yahay, iyo Xilalka kale uu u igmado Ra'iisul Wasaaraha. | Ra'iisul Wasaare Kuxigeenka waa sii hayaha xilka Ra'iisulwasaraha marka uu dalka ka maqanyahay, waxa uu sidoo kale qabtaa howlaha kale uu u igmado Ra'iisul Wasaaraha. | Qodobkan siiqada ayaa isbeddel lagu sameeyay, balse nuxurka lama beddelin. |
| **Qododbka 102aad: Xilka Wasiirka, Wasiir ku-xigeenka iyo Wasiir Dawlaha** | **Qododbka 126aad: Waajibaadka Wasiirka, Wasiiru Dawlaha iyo Wasiir Kuxigeenka** | Cinwaanka Qodobka 102aad ee asalka Dastuurka oo hadda noqday Qodobka 126aad, waxaa Ereyga "Xilka" lagu beddelay "Waajibaadka. |
| (1) Wasiir kasta wuxuu si shakhsi ah Mas'uul uga yahay hawlaha Wasaaraddiisa. | (1) Wasiir kasta wuxuu mas'uul ka yahay hawlaha wasaaraddiisa. | Faqradda 1aad nuxurkiisa waxba lagama beddelin oo sideeda ayaa loo qaatay. Waxaa la tiray "si shakhsi ah" |
| (2) Wasiir ku-xigeen kasta wuxuu qabta xilka wasiirka wasaaraddu u igmado. | (2) Wasiir kuxigeen kasta wuxuu qabta xilka wasiirka wasaaraddu u igmado, wuxuuna yahay kusimaha wasiirka marka uu maqanyahay. | Faqraddan siiqo toosin ayaa lagu sameeyay, waxaana lagu soo kordhiyay "wuxuuna yahay kusimaha wasiirka marka uu maqanyahay". |
| (3) Wasiiru Dawluhu wuxuu qabtaa xil gaar ah oo uu Ra'iisul Wasaaraha. | (3) Wasiiru Dawluhu wuxuu fulinayaa hadba hawlaha uu Ra'iisul Wasaaraha u wakiisho. | Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa lagu sameeyay dib-u-siiqayn. |
| | (4) Haddii wasiir xilka laga qaado ama uu xilka banneeyo sababo kale awgeed, waxaa xilka sii haynaya Wasiir Kuxigeenka inta laga soo magacaabayo wasiir cusub. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysa haddii Wasiir xilka laga qaado ama uu xilka banneeyo sababo kale awgeed in Wasiir |

| | | |
|---|---|---|
| | | Kuxigeenka uu siihaynayo xilka inta laga soo magacaabayo wasiir cusub. |
| **Qodobka 104aad: Dhaarta** | **Qodobka 127aad: Dhaarta Golaha Wasiirrada** | Cinwaanka Qodobka 104aad ee asalka Dastuurka oo hadda noqday Qodobka 127aad ee wax-kabeddelka Dastuurka waxaa lagu daray "Golaha Wasiirrada". |
| Raisul-Wasaaraha iyo Golihiisa Wasiirradu markay helaan codka kalsoonida inta aysan xilkooda bilaabin, waxa lagu dhaarinayaa kalfadhi gaar ah ee Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah, waxaana dhaarinaya Gudoomiyaha Maxkamadda sare, dhaartaasina waa sidatan:<br>"Waxaanku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkayga u gudanaayo si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diintu ku jirto, dhawrana Dastuurka qaranka iyo shuruucda kale oo dalka yaalla" | Xubnaha Golaha Wasiirrada waxaa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Federaalka, waxayna marayaan dhaarta soo socota:<br><br>Aniga oo ah____________________________________, waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan si dhab ah daacad ugu noqdo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; dhawrana una hoggaansamo Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka dalka; uguna adeego xilka la ii magacaabay dadka iyo dalka si sharaf, xilkasnimo, hufnaan iyo isla-xisaabtan ku jirto, aniga oo ilaalinaya sirta hawsha la igu aaminay. | Qodobkan dib u siiqayn ayaa lagu sameeyay, wuxuuna nidaaminayaa dhaarta Golaha Wasiirrada. |
| | **Qodobka 128aad: Xilkaqaadidda Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Hindisaha xilkaqaadista Ra'iisul Wasaaraha, waxaa soojeedin kara ugu yaraan shan meelood meel (1/5) xubnaha Golaha Shacabka, halka xilkaqaadista xubin ka mid ah Golaha Wasiirrada ay soojeedin karaan toban (10) xildhibaan oo Golaha Shacabka ah, si waafaqsan Qodobka 96aad xarfaha (b) ee Dastuurka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa soojeedinta xilkaqaadista Ra'iisal Wasaaraha iyo Wasiirrada. |

| | | |
|---|---|---|
| | (2) Guddoonka Golaha Shacabku waa in hindisaha xilkaqaadista ku horgeeyaa fadhiga guud ee Golaha Shacabka muddo 7 maalmood gudohood oo maalmo shaqo. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa muddada guddoonka Golaha Shacabku uu Golaha Wasiirrada ku horgaynayaan hindisha si ay uga doodaan. |
| | (3) Golaha Shacabka waa in go'aan uga gaaraa soojeedinta xilkaqaadista ugu badnaan muddo 15 maalmood ah ayadoo cidda uu hindisaha khuseeyo la siinayo fursad uu isku difaaco Golaha Shacabka hortiisa. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in Golaha Shacabka go'aan ugu gaarayo hindisaha xilkaqaadista ugu badnaan muddo 15 maalmood ah ayadoo cidda uu hindisaha khuseeyo la siinayo fursad uu isku difaaco Golaha Shacabka hortiisa |
| | (4) Haddii Golaha Shacabka ay cod gacan taag ah boqolkii konton hal dheeri (50%+1) tirada guud ee xubnahiisa ugu codeeyaan xilkaqaadista Ra'iisul Wasaaraha, Golaha Wasiirrada ama xubin ka tirsan Golaha Wasiirrada:<br>(a) Haddii ay xilkaqaadistu khuseyso Ra'iisul Wasaaraha, Madaxweynaha Jamuuriyadda wuxuu soo magacaabayaa Ra'iisulwasaare cusub si waafaqsan Qodobka 115aad faqraddiisa 1aad.<br>(b) Haddii xilkaqaadistu ay khuseyso xubin ka tirsan Golaha Wasiirrada, Ra'iisul Wasaaraha ayaa soo magacaabaya xubin buuxisa xilka bannaanaaday | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa habraaca hindisaha xilkaadista iyo magacaabista Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada. |

| | | |
|---|---|---|
| | si waafaqsan Qodobka 120aad, faqradiisa (2) ee Dastuurka. | |
| **Qodobka 103aad: Xukuumadda Xil-Gaarsiinta** | **Qodobka 129aad: Xukuumadda Xilgaarsiinta** | Ciwaanka Qodobka 103aad ee asalka Dastuurka oo hadda noqday Qodobka 129aad waxba iskama beddelin. |
| Inta u dhexaysa taariikhda doorashada guud iyo marka Raisul-Wasaare cusub la dhaarin doono, Raisul-Wasaarihii hore ee xilka hayey iyo Golihiisa Wasiirradu waxay sii haynayaan xilka, waxayna u fulinayaan waajibaadka caadiga ah ee Dawlada si xilgaarsiin ah | (1) Xukuumadda xilgaarsiinta oo ah xukuumadda xilliga kala guurka ee doorashadu qabsoontay isla markaana aan xukuumad cusub weli la soo dhisin ama kalsoonida lagala noqday, waxay sii ahaanayaan xukuumad xilgaarsiin, waxay fulisaa waajibaadka caadiga ah ee Dawladda. | Faqradda 1aad dib u siiqayn ayaa lagu sameeyay, laakiin nuxurka isbeddel laguma samayn, waxayna xeerinaysaa in xukuumaddu fulinayso waajibaadkeeda caadiga ah. |
| | (2) Xukuumadda xilgaarsiinta waxaa ka reebban arrimaha soo socda:<br>(a) Gelidda heshiisyo caalami ah ama kuwo wakhti dheer qaadanaya oo saamaynaya siyaasadda xukuumadda cusub;<br>(b) Soojeedinta magacaabidda iyo xilkaqaadista xilalka sare ee Dawladda;<br>(c) Curinta ama soo gudbinta hindise xeereed;<br>(d) Go'aano abuuraya qalalaase ama khilaaf siyaasadeed;<br>(e) Jaangooynta qiimaha badeecadaha, mushaaraadka iyo adeegyada saamaynaya dhaqaalaha qaranka; iyo<br>(f) Soojeedinta afti dadwayne iyo ku dhawaaqid xaalad degdeg iyo mid dagaal. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxaa lagu xeeriyay arrimaha ka reebban xukuumadda xilgaarsiinta:<br>***Xarafka (a)*** in xukuumaddu aysan geli karin heshiisyo calami ah;<br>***Xarafka (b)*** in aysan soojeedin karin magacaabidda iyo xilkaqaadista xilalka sare ee dawladda;<br>***Xarafka (c)*** in aysan soo gudbin karin hindise xeereed;<br>***Xarafka (d)*** in aysan qaadan karin go'aano abuuri kara qalalaase siyaasadeed; |

| | | |
|---|---|---|
| | | ***Xarafka (e)*** in aysan jaangoynkarin qiimaha badeecadaha iyo mushaharaadka;<br>***Xarafka (f)*** in aysan soojeedin karin aftidadweyne iyo ku dhawaaqidda xaalad degdeg ah iyo mid dagaal. |

# CUTUBKA SAGAALAAD:
# GARSOORKA

Cutubka sagaalaad wuxuu ka koobanyahay labaatan iyo shan (25) qodob oo ka billaabanaya Qodobka 130aad ilaa 154aad, halka asalka Dastuurku ka koobnaa siddeed (8) qodob. Waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyay labaatan (20) qodob iyo siddeetan (80) faqradood, oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Waxaa la tiray saddex (3) qodob oo asalka Dastuurka ku jiray.

Cutubkan waxaa loo kala qaybiyey afar madax oo kala ah:

- Madaxa 1aad: Qodobbo Guud;
- Madaxa 2aad: Maxkamadaha Jamhuuriyadda Federaalka;
- Madaxa 3aad: Xeer-ilaalinta Guud; iyo
- Madaxa 4aad: Maamulka Garsoorka.

Arrimaha lagu soo kordhiyay cutubkan waxaa ka mid ah:

- Dhismaha Maxkamadda Sare iyo awoodaheeda;
- Dhismaha Maxkamadda Dastuurka iyo awoodaheeda;
- Dhismaha Maxkamadda Kore oo ay yeelanayaan Dawlad Goboleedyada;
- Maxkamadda Racfaanka Dawlad Goboleedyada;
- Maxkamadda Ciidammada;
- Dhismaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud;
- Maamulka Garsoorka; iyo
- Sanduuq Maaliyadeed u gaar ah Garsoorka.

| CUTUBKA SAGAALAAD:<br>GARSOORKA | | |
|---|---|---|
| **Asalka Dastuurka KMG ah** | **Soojeedinta Wax-kabeddelka Dastuurka uu soo Diyaariyay GMDHD** | **Faallo** |
| **Cutubka Sagaalaad:<br>Awoodda Garsoorka** | **Cutubka 9aad:<br>Garsoorka** | Magaca Cutubka soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa lagu soo koobay "Garsoorka" halka uu asalka Dastuurka ka ahaa " Awoodda Garsoorka". |
| | **Madaxa Koowaad: Qodobbo Guud** | **Madax cusub.**<br>Madaxan wuxuu nidaaminayaa dhammaan qodobbada guud sida mabaadi'da iyo madaxabannaanida garsoorka |
| | **Qodobka 130aad: Mabaadi'da Garsoorka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Awoodda garsoorka waxay ka timaaddaa shacabka, waxaana u xilsaaran fulinta awoodda garsoorka Maxkamadaha iyo Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale. | Faqradda 1aad oo ahayd faqradda 1aad ee qodobka 105aad ee asalka Dastuurka waa la ballaariyey nuxurkeeda. Waxaana lagu kordhiyay in awoodda garsoorka ay ka timaaddo shacabka, mas'uulidda gaarka ah ee fulintana ay saarantahay maxkamadaha iyo xaafiiska xeer-ilaalinta guud. |

| | | |
|---|---|---|
| | (2) Hay'adaha Garsoorku marka ay xilkooda gudanayaan, waxa hagaya mabaadi'dan:<br>a) Ilaalinta maqaasidda sharaceeda Islaamka, dhawrista ujeeddooyinka iyo mabaadi'da Dastuurka;<br>b) Madaxbannaani, dhexdhexaadnimo iyo hufnaan;<br>c) Caddaalad loo dhanyahay, loona simanyahay;<br>d) Caddaalad aan la daahin; iyo<br>e) Dhiiregelinta hannaanka dadban ee xallinta khilaafaadka oo daahfuran, xeerna ku dhisan. | **Faqrad cusub:**<br>Waxayna nidaaminaysaa mabaadi'da hagaysa hay'adaha garsoorka marka ay xilkooda gudanayaan. |
| | (3) Hannaanka dadban xallinta khilaafaadka waa in uusan ka horimaanayn:<br>a) Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka u yaalla; i<br>b) Xuquuqaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee Dastuurkani dammaanad qaaday; iyo<br>c) Shareecada Islaamka. | **Faqrad cusub:**<br>Waxay xeerinaysaa in hannaanka dadban ee xallinta khilaafaadka in uusan ka hor imaan karin Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale ee Dalka. Sidoo kale xuquuqda iyo xorriyaadka aas-aasiga ah ee Dastuurka aysan ku xadgudbin. |
| **Qodobka 105aad: Awoodda Garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya** | | **Qodobkan waa la tiray**<br>Nuxurkiisa waxaa lagu daray qodobbada kale ee cutubkan. |
| (1) Awoodda Garsoorka waxaa u xil saaran Maxkamadaha. | | Faqraddan nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 1aad ee qodobka 130aad ee soojeedinta. |
| (2) Qaab dhismeedka garsoorka waxaa xeer ah kasoo saaraya Baarlamaanka Federaalka. | | Faqraddan waa la tiray, waxaa lagu daray Qodobka 133aad ee soojeedinta oo faahfaahinaya qaabdhismeedka Maxkamadaha. |

| Qodobka 106aad: Madaxbannaanida Garsoorka | Qodobka 131aad: Madaxbannaanida Garsoorka | Cinwaanka Qodobka 131aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 106aad waxba lagama beddelin. |
|---|---|---|
| (1) Garsoorku wuxuu ka madax bannaan yahay laamaha Dawladda ee Sharci-dejinta iyo Fulinta marka ay gudanayaan xilkooda. Xubnaha garsoorku waxay u hoggaansamayaan oo keliya sharciga. | (1) Garsoorku wuxuu ka madaxbannaanyahay laamaha fulinta iyo xeer dejinta ee dawladda, wuxuuna gudanayaa waajibaadkiisa ayadoo aanay jirin wax faragelin ah. | Faqraddan nuxurkeeda waxba laga beddelin, waxaa lagu daray *"ayadoo aanay jirin wax faragelin ah"* sidoo kale Ereyga "Sharci-dejinta" waxa lagu beddelay "Xeer dejinta". Nuxurka qaybta dambe ee faqradda asalka ahayd "Xubnaha garsoorku waxay u hoggaansamayaan oo keliya sharciga" waxaa lagu daray faqradda 2aad ee soojeedinta. |
| | (2) Garsoorku waxa uu u hoggaansamayaa Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka u yaalla oo keliya, umana hoggaansami karo awaamiir ama hagitaan qof ama hay'ad kale midna, waxayna u fulinayaan hawlahooda si dhexdhexaad, cabsi la'aan iyo eex la'aan ah oo aan cid gaar ah loogu daneynayn. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in garsoorku u hoggaansamayo oo keliya Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka. |
| | (3) Qofna ama hay'adna ma farogelin karto garsoorka iyo saraakiisha garsoorka marka ay gudanayaan xilkooda. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in aan garsoorka iyo hawlwadeennadiisa cidina faragelin ku samayn karin marka ay gudanayaan waajibaadkooda. |

| | | |
|---|---|---|
| | (4) Garsoorku wuxuu u madaxbannaanyahay maamulkiisa iyo maaliyaddiisa. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysa in garsoorku leeyahay madaxbannaani maamul iyo mid maaliyadeedba. |
| | (5) Go'annadda garsoorku waxa ay qabanayaan dhammaan dhinacyada ay khuseeyaan, ha noqoto hay'ad dawladeed ama shakhsiyaadba. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxaa looga golleeyahay in loo sinnaado xeerka, loona hoggaansamo fulinta go'aannada, amarrada, qaraarrada iyo xukunnada ka soo baxa maxkamadaha. |
| (2) Garsooraha laguma oogi karo dacwad ciqaab ah ama madani ah oo ka dhalatay fal la xiriira gudashada xilkiisa garsoorennimo. | (6) Xubin ka tirsan garsoorka laguma oogi karo dacwad ciqaab ah ama madani ah oo ka dhalatay fal la xiriira gudashada xilkiisa. | Faqradda 6aad waa faqradda 2aad ee asalka Dastuurka, waxaana lagu sameeyay siiqayn. "Garsooraha" waxaa lagu beddelay "xubin ka tirsan garsoorka". Sidoo kale, waxaa la tiray "garsoorennimo", oo waxaa lagu soo koobay "gudashada xilkiisa". |
| (3) Garsooraha lama baari karo qofnimadiisa ama hoygiisa, haddii aan oggolaansho laga haysan Golaha Adeegga Garsoorka. | (7) Xubin ka tirsan garsoorka lama xiri karo lamana baari karo oogadiisa ama hoygiisa, lamana basaasi karo, ayada oo aan oggolaansho laga haysan Golaha Sare ee Garsoorka haddii aan lagu qaban xubinta garsoorka isagoo faraha kula jira dembi ka dhigeya khasab xiritaankiisa. | Faqradda 7aad waa faqradda 3aad ee asalka Dastuurka oo lagu sameeyay dib u habeyn habka siiqada ah, waxaana la faahfaahiyey nuxurkeeda. |
| | (8) Go'aannadda garsoorka waxa lagu duri karaa oo keliya si waafaqsan habraacyada xeerku jideeyey. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa in sida keliya oo go'aan garsoor |

| | | |
|---|---|---|
| | | lagu duri karo ay tahay sida xeerku dhigayo. |
| | (9) Garsooraha xilka lagama qaadi karo, lama beddeli karo, howlgabna lagama dhigi karo marka laga reebo xaaladaha Dastuurka iyo Xeerka Nidaamka Garsoorku tilmaameen. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan sababta loogu soo kordhiyay ayaa ah in aan si fudud oo aan xeer ku qotomin loo beddelin garsoorayaasha, xilkana looga qaadin. |
| **Qodobka 107aad: Habka Dacwad Qaadista** | **Qodobka 132aad: Habka Dacwad Qaadista Maxkamadaha** | Nuxurka cinwaanka Qodobka 132aad oo asalka Dastuurka oo ahaa Qodobka 107aad waxba lagama beddelin, keliya waxaa lagu kordhiyay Ereyga "Maxkamadaha". |
| | (1) Maxkamadaha waxaa u dacwoon kara qof kasta ayada oo aan loo eegin xaaladda dhaqaalahiisa, jirkiisa, qofnimadiisa, jinsigiisa, diintiisa, maqaamkiisa ama duruufihiisa gaarka ah ee kale. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay ka hadlaysaa in qof kasta uu xaq u leeyahay in uu u dacwoodo maxkamadaha iyadoon lagu takoorayn duruufihiisa gaarka ah. |
| (1) Dacwad-qaadistu waxay u furan tahay dhegeysiga dadweynaha, hase yeeshee maxkamaduhu waxay go'aansankaraan in dacwadda lagu dhegeysto qol ka xiran dadweynaha sababo la xiriira anshaxa, nabadgelyada qaranka, badbaadinta markhaatiga, iyo haddii dacwaduhu khuseeyaan dhallaan ama kufsi. | (2) Dacwad qaadistu way u furantahay dhegeysiga dadweynaha, hase yeeshee maxkamaduhu waxay go'aansan karaan in dhageysiga dacwaddu noqoto mid albaabada u xiranyihiin sababaha soo socda midkood:<br>a) Sababo la xiriira nabadgelyada qaranka ama maslaxada guud;<br>b) Sababo la xiriira anshax wanaagga iyo bedqabka;<br>c) Badbaadinta markhaatiga; | Faqradda 2aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad, dibusiiqayn ayaa lagu sameeyay, waxaana lagu soo kordhiyay: "midda guud, anshax wanaagga iyo bedqabka, tacaddiyada haweenka iyo sababo kale oo uu garsooruhu go'aamin karo". |

| | | |
|---|---|---|
| | d) Dacwado khuseeya dhallaan;<br>e) Dacwad la xiriirta tacaddiyada haweenka; ama<br>f) Xaaladaha aan caadiga ahayn ee ay dhegeysiga furan ee maxkamaddu wax u dhimayso caddaaladda, kaddib marka uu qiimeeyo garsooraha dacwadda qaadaya. | |
| (2) Go'aan maxkamadeed lama gaari karo haddii aan la siinin dhinacyada fursado isku mid ah oo ay ku soo bandhigaan doodahooda. | (3) Go'aan maxkamadeed lama gaari karo haddii aan la siinin dhinacyada fursado isku mid ah oo ay ku soo bandhigaan doodahooda. | Faqradda 3aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad waxba lagama beddelin, waxayna xeerinaysaa in fursad isku mid ah la siiyo dhinacyada. |
| | (4) Go'aanka maxkamadda waa in la soo saaraa oo aan la daahin haddii aysan jirin sababo maangal ah. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay caddeynaysaa in go'aanka maxkamadda aan la daahin karin sabab suurtagal ah la'aanteed. |
| (3) Go'aan kasta oo maxkamadeed waa inuu ku qotomo sababo sharciyeed. | (5) Go'aan kasta oo Maxkamadeed waa in uu ku qotomo asbaab xeereed oo maangal ah, laguna bixiyaa qoraal. | Faqradda 5aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad waxaa lagu kordhiyay eray "maangal iyo lagu bixiyo qoraal". |
| | (6) Go'aanka maxkamadda waa in la oggeysiiyaa dhinacyada, la shaaciyaa lana keydiyaa. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa in la oggaysiiyo dhinacyada go'aanka la gaaray, sidoo kale la keydiyo. |

| | | |
|---|---|---|
| | (7) Go'aan kastoo maxkamadeed waa in uu tilmaamaa inay jirto fursad racfaan qaadasho, marka laga reebo xaaladaha xeerku si kale u sheegay. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysa in xukun ama go'aan kasta yeesho racfaan si waafaqsan xeerka. |
| | **Madaxa Labaad: Maxkamadaha Jamhuuriyadda Federaalka** | **Madax cusub.** |
| **Qodobka 108aad:** Qaabka Maxkamadaha Dalka | **Qodobka 133aad: Qaabdhismeedka Maxkamadaha Dalka** | Cinwaanka Qodobka 133aad ee soojeedinta oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 108aad, ereyga "Qaabka" waxaa lagu beddelay "Qaabdhismeedka" |
| (1) Garsoorka dalku wuxuu noqonayaa sadex Heer oo kala ah:<br>(a) Maxkamada Dastuurka;<br>(b) Maxkamadaha Heer Dawlad Federaal;<br>(c) Maxkamadaha Heerka Dawladaha xubinta ka ah Dawlada Federaalka.<br>(d) Maxkamada ugu saraysa dalka ee Heer Federaal waa Maxkamadda Sare ee Federaalka, iyadoo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyaguna yeelanayaan Maxkamad Sare ee heer Dawladaha Xubinta ka ah federaalka oo iyaga u gaar ah. | (1) Maxkamadaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ka koobanyihiin:<br>(a) Maxkamadda Sare ee Federaalka;<br>(b) Maxkamadda Dastuurka;<br>(c) Maxkamadaha Kore ee Dawlad Goboleedyada iyo Caasimadda Jamhuuriyadda;<br>(d) Maxkamadaha Racfaanka ee Dawlad Goboleedyada; iyo<br>(e) Maxkamadaha Derajada Koowaad ee Dawlad Goboleedyada iyo Caasimadda Jamhuuriyadda. | Faqradda 1aad waxa la beddelay nuxurkii asalka Dastuurka, waxayna si fiican u kala qeexaysaa qaabdhismeedka Maxkamadaha Dalka ee Nidaamka isku dhafka ah oo ku salaysan heshiiskii Hannaanka Federaalka oo la gaaray bishii December, 2022. |
| | (2) Lama dhisi karo hay'ado garsoor ama maxkamado gaar ah haddii uusan oggolaan Golaha Sare ee Garsoorka baahi jirta darteed. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay reebaysaa in la dhiso maxkamado gaar ah sharci la'aan. |

| Qodobka 109aad: Habka Hawlqabadka Maxkamadaha Qaranka | | Qodobkan waa la tiray. |
|---|---|---|
| (1) Maxkamad haddii la horgeeyo dacwad oo ay sharci ahaan dacwadaas quseyso Dawladda Fedraalka oo keliya, maxkamadaasi waa inay u celisaa dacwadaas maxkamad heer Dawladda Federaal ah. | | Qodobka 109aad ee asalka Dastuurka waa la tiray maaddaama si faahfaahsan loogu nidaamiyay hawlqabadka maxkamadaha qodobbada soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka ee soo socda. Sidoo kale, qodobbadaas waxaa lagu tilmaamay awoodda iyo ikhtisaaska maxkamad kasta heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed. |
| (2) Maxkamad haddii la horgeeyo dacwad oo ay sharci ahaan dacwadaas quseyso arin Dastuuri ah, maxkamadaasi waxay u celin kartaa dacwadaasi maxkamada Dastuuriga si ay uga gaarto go'aan:<br><br>(a) Maxkamad walba oo awood Garsoor lihi wey go'aankartaa in arrini la hor keenay ay tahay mid dastuuri ah iyo in kale, mar haddii aanay ka hor imanayn awoodaha gaarka aah ee Maxkamadda Dastuurka sida kuxusan Qodobka 109C ee Dastuurka;<br>(b) Maxkamadda Dastuurka ayaa ah garsooraha kama danbeysta ah ee arrimaha Dastuurka;<br>(c) Maxkamadda Dastuurka keliya ayaa leh awoodda garsoor ee qeexidda arrimaha | | |

| | | |
|---|---|---|
| Dastuurka ee aan ka iman kiisaska maxkamadeed;<br>(d) Shakhsi ama koox ama dawladdiba si toos ah ayeey ugu gudbin karaan maxkamadd Dastuurka codsi tixraac ah oo la xiriira arrimaha khuseeya danaha dadaweynaha. | | |
| (3) Marka laga reebo arrinta lagu xusay faqradaha (1) iyo (2) qodobkan, Baarlamaanku Federaalka wuxuu soo saarayaa sharci faahfaahin buuxda ka bixinaya sida ay u wada falgelayaan maxkamadaha heer Federaal iyo maxkamadaha heerka dawlad goboleedyada Xubanaha ka ah Federaalka. | | |
| **Qodobka 109A: Golaha Adeegga Garsoorka** | | Waxaa loo raray Qodobka 149aad ee isla cutubkan oo dhisaya Golaha Sare ee Garsoorka. |
| (1) Dastuurkani wuxuu asaasayaa Golaha Adeegga Garsoorka. | | |
| (2) Golaha Adeegga Garsoorku wuxuu ka koobnaanayaa sagaal (9) xubnood, oo kala ah sida soo socota:<br>(a) Garsooraha Sare ee Maxkamadda Dastuurka;<br>(b) Garsooraha Sare ee Maxkamadda Sare;<br>(c) Garyaqaanka Guud;<br>(d) Laba (2) Garyaqaan oo sare oo ka tirsan garyaqaanadda Soomaaliyeed, oo mid walba xilli afar (4) sanno ah ururka garyaqaanadda ay magacaabeen;<br>(e) Qofka Guddoomiyaha ka ah Guddiga Xuquuqul Insaanka; iyo | | |

| | | |
|---|---|---|
| (f) Saddex (3) qof oo xushmad sare ku dhex leh bulshada rayidka ah oo uu soo jeediyay Golaha Wasiiradu ka dibna uu u magacaabay madaxweynuhu xilli afar (4) sannadood ah. | | |
| (3) Xubnaha Guddiga Adeegga Garsoorku waxay dhexdooda ka dooranayaan qof u noqda Guddoomiyaha Golaha Adeegga Garsoorka. | | |
| (4) Xubinta Golaha Adeegga Garsoorku waxay xilka hayn kartaa hal xilli oo shan sannadood ah, oola cusbooneysiin karo mar keliya. | | |
| (5) Wixii Sharci ama qanuun ay sameystaan Golaha Adeegga Garsoorku), oo khuseeya anshax marinta Garsoorayaasha heer Federaal, wuxuu sharcigaasi sidoo kale qabanayaa xubinta Golaha Adeegga Garsoorka. | | |
| (6) Sida sharciga ama xeerkuba dhigayo, Golaha Adeegga Garsoorku waa in uu:<br>(a) Magcaabaa, anshax mariyaa isla markaana beddelaa xubnaha garsoorka ee Federaalka;<br>(b) Go'aamiyaa mushaharka iyo lacagta hawlgabka ee garsoorayaashaa;<br>(c) Dejiyaa shuruudaha shaqo ee garsoorka. | | |
| | **Qodobka 134aad: Maxkamadda Sare ee Federaalka** | **Qodob cusub:**<br>Qodobkan wuxuu faahfaahinayaa awoodda iyo ikhtisaaska Maxkamadda Sare ee Federaalka. |

| | | |
|---|---|---|
| | (1) Maxkamadda Sare ee Federaalka waa maxkamadda ugu sarraysa dalka, awooddeeduna waxa ay ku fidsantahay dhammaan geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Maxkamadda Sare ee Federaalka ay awooddeedu gaarsiisan tahay dhammaan geyiga Soomaaliya. |
| | (2) Xarunta Maxkamadda Sare ee Federaalku waa magaalomadaxda dalka, waxayse fadhiyadeeda ku qabsan kartaa meel kasta oo dalka ka mid ah, marka Guddoomiyaha Maxkamadda Sare u arko in danta caddaaladdu sidaas ku jirto. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in Maxkamadda sare xarunteedu tahay magaalada Muqdisho, balse fadhiyadeeda ay ku qabsan karto meel kasta oo ka mid ah dalka. |
| | (3) Maxkamadda Sare ee Federaalku waxa ay xaqiijisaa dhawrista ku dhaqanka xeerka, hubisaana si middaysan u dhaqangalinta iyo u dabaqidda xeerarka dalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in Maxkamadda Sare ee Federaalku u xilsaaran tahay xaqiijinta ku dhaqanka sharciga, iyo hubinta in xeerarka si mideysan loo dhaqangeliyo. |
| | (4) Maxkamaddu si ay u xaqiijiso hirgelinta farqadda 3aad ee qodobkan, waxa ay soo saaraysaa hageyaal, habraacyo, tafsiir sharci iyo awaamiir ay arrintan ku taabbogelinayso, sidoo kale waxay soo saaraysaa habraacyo ay ku jaangooynayso qiimaha dacwadaha madaniga. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay siinaysaa Maxkamadda Sare awoodda soo saaridda hageyaal, habraacyo awaamiir iyo tafsiir sharci. |
| | (5) Go'aannada Maxkamadda Sare waa kamadambays, waana in ay u hoggaansamaan dhammaan dhinacyada ay khuseeyaan. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in go'aannada Maxkamadda Sare ee Federaalka yihiin |

| | | |
|---|---|---|
| | | kamadambays, ayna khasab tahay in loo hoggaansamo. |
| | (6) Maxkamadda Sare ee Federaalka waxa ay ka koobantahay Guddoomiyaha Maxkamadda iyo sideed (8) garsoore. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa in Maxkamadda Sare ka koobantahay Guddoomiyaha iyo siddeed garsoore. |
| | (7) Maxkamadda Sare ee Federaalka waxa ay leedahay awoodahan asalka ah:<br>(a) Ka garnaqidda iyo ka go'aangaarista cabashooyinka la xiriira dacwadaha maamul ee lidka ku ah hay'adaha federaalka;<br>(b) Ka garnaqidda iyo ka go'aangaarista dacwadaha la xiriira muranka ikhtisaaska maxkamadaha kala duwan ee dalka;<br>(c) Ka garnaqidda iyo ka go'aangaarista dacwadaha la xiriira magacaabidda jagooyinka dawladda ee heer Federaal;<br>(d) Dhaarinta madaxda heer federaal;<br>(e) Siinta talo sharci Dawladda Federaalka marka la waydiiyo;<br>(f) Soo saaridda amarro ku socda hay'daha dawladda ee ku saabsan gudashada howl qaran oo uu xeerku ku waajibiyay ama ka joogsashada fulinta arrin aan xeerku awood u siin;<br>(g) Dhagaysiga iyo ka go'aangaarista cabashooyinka u baahan ku noqoshada ama ka noqoshada go'aaneed ee laga keeno go'aan ayada ka soo baxay; | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay faahfaahinaysaa awoodaha iyo ikhtisaaska ay Maxkamadda Sare ee Federaalka. |

| | | |
|---|---|---|
| | (h) Go'aan ka gaaridda cabashooyinka la xariira xuriyad ka qaadidda sharci darrada ah ee loo soo gudbiyo ayna ikhtisaaska u leedahay; iyo<br>(i) Awoodaha kale ee ku xusan Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo xeerarka kale ee dalka. | |
| | (8) Maxkamadda Sare ee Federaalka waxay kale oo leedahay ikhtisaaka rafcaan ee soo socda:<br>(a) Ka garnaqidda iyo ka go'aangaarista cabashooyinka laga soo qaato xukunnada iyo go'aannada Maxkamadaha Kore ee Dawlad Goboleedyada iyo Caasimadda ee la xiriira dacwadaha Federaaliga ah;<br>(b) Ka garnaqidda iyo ka go'aangaarista cabashooyinka laga soo qaato xukunnada iyo go'aannada Maxkamadaha Kore ee dawlad goboleedyada iyo Caasimadda ee la xiriira dacwadaha taabanaya xuquuqaha iyo xorriyaadka aas-aasiga ee aadamaha iyo dacwadaha ganacsi ee dabeecad caalami leh iyo kuwa qiimahoodu aadka u sarreeyo;<br>(c) Ka go'aangaarista laga soo qaato xukunnada dilka ah ee Maxkamadaha Kore ee Dawlad Goboleedyada iyo Caasimadda ay soo xukumeen; iyo<br>(d) Arrimaha kale ee ku xusan xeerarka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay nidaaminaysaa awoodaha rafcaan ee Maxkamadda Sare ee Federaalka. Waxayna leedahay ikhtisaaska racfaannada laga soo qaatay xukunnada iyo go'aannada Maxkamadaha kore ee arrimaha dacwadaha federaaliga ah iyo arrimaha la xiriira dacwadaha taabanaya xuquuqaha iyo xorriyaadka aasaasiga ee aadamaha; dacwadaha ganacsi ee dabeecad caalami leh iyo kuwa qiimahoodu aad ka u sarreeyo. |
| **Qodobka 109B: Asaaska Maxkamadda Dastuurka** | | Qodobkan waxaa loo raray Qodobka 135aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. |

| | | |
|---|---|---|
| (1) Dastuurkani wuxuu aasaasayaa Maxkamadda Dastuurka oo ka kooban shan (5) garsoore oo uu ku jiro Garsooraha Sare iyo ku xigeenka Garsooraha Sare. | | |
| (2) Golaha Adeegga Garsoorku, waa in uu u magacaabaa Garsoore Maxkamadda Dastuurka qof daacadnimo sare leh oo keliya, isla markaana si rasmi ah u bartay sharciga iyo Shareecada, khaas ahaanna ku xeel dheer sharciga Dastuurka. | | |
| (3) Golaha Adeegga Garsoorku waa in uu u soo jeediyaa Golaha Shacabka qofka noqonaya Garsoore Maxkamadda Dastuurka. | | |
| (4) Haddii Golaha Shacbigu ansixiyo magacii la soo jeediyay iyadoo la raacayo faqradda (3) ee Qodobkan, Madaxweynuhu waa in uu u magacaabaa qofkaa Garsoore Maxkamadda Dastuurka. | | |
| (5) Dhexdooda, garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurku waxay ka dooranayaan Garsooraha Sare iyo ku xigeenka Garsooraha Sare. | | |
| **Qodobka 109C: Awoodaha Maxkamadda Dastuurka** | **Qodobka 135aad: Maxkamadda Dastuurka** | Qodobka 135aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa Qodobka 109B iyo Qodob109C ee asalka Dastuurka oo la isku daray. |
| | (1) Dastuurkani wuxuu dhisayaa Maxkamadda Dastuurka oo xarunteedu tahay magaalamadaxda dalka kana kooban Guddoomiye iyo afar (4) garsoore. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa aasaasidda Maxkamadda Dastuurka oo xarunteedu noqonayso Muqdisho, kana |

| | | |
|---|---|---|
| | | kooban Guddoomiye iyo afar (4) garsoore. |
| (1) Maxkamadda Dastuurku waay yeelaneysaa awoodahan u garrka ah:<br>(a) Marka uu codsi ka yimaaddo Xubin ka Mid ah Golaha Wasiirada, Guddi ka tirsan aqalada Baarlamaanka midkood, ama toban Xubnood oo ka mid ah Aqalada midkood, in ay Maxkamaddu dib u eegto hindisa sharci, ayna go'aansato in sharcigaasi waafaqsan yahay Dastuurka;<br>(b) In Maxkamaddu dhegeysato go'aanna ka gaadho kiis ka soo unkamay sida ku cad Qodobka 86aad, oo la xidhiidha muran ka dhashay sida xeer uu u waafaqsan yahay Dastuurka;<br>(c) In maxkamaddu dhegeysato, go'aanaka gaadho kiis ka soo unkamay sida ku cad faqradda Qodobeedka 109(2)(c) kaasoo khuseeya in dhinac uu hor keenay maxkamad dood kiis macquul ah, kiiskaana loo gudbiyay Maxkamadda Dastuurka si ay go'aan uga gaadho;<br>(d) Inay go'amiso khilaafyada u dhexeeya dawladda federaalka ah iyo dawlad goboleedyada xubinta ka ah dawladda federaalka ah iyo Dawlad goboleedyada federaalka dhexdooda;<br>(e) In ay dhegeysato, go'aana ka gaadho Khilaafyada ka dhexeeya waaxaha Dawladda federaalka ah ee la xidhiidhaawoodaha dastuuriga ah iyo waajibaadka ay kala leeyihiin; iyo; | (2) Maxkamadda Dastuurka waa maxkamad madaxbannnaan oo gaar ah, oo leh ikhtisaaskan:<br>a) Fasiraadda Dastuurka Federaalka, Dastuurrada Dawlad Goboleedyada iyo xeerarka kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>b) Dhegaysiga iyo go'aan ka gaaridda murannada u dhaxeeya hay'adaha Federaalka dhexdooda, ama hay'adaha Federaalka iyo kuwo Dawlad Goboleedyada ama hay'adaha dawlad goboleedyada dhexdooda;<br>c) Dib-u-eegista iyo go'aan ka gaarista waafaqsanaanta dastuuriga ah ee hindise xeereedka la soojeediyay;<br>d) Go'aan ka gaaridda xadgudubyada xuquuqaha iyo xorriyadaha Dastuurka ee muwaaddinka;<br>e) Go'aan ka gaaridda dacwadaha la xiriira Dastuurka ee looga soo gudbiyey maxkamadaha kale;<br>f) Burinta xeerarka iyo go'aannada maamul ee aan waafaqsanayn shareecada Islaamka iyo Dastuurka;<br>g) Hubinta ansaxnimada hannaanka wax-kabeddelka Dastuurka, aftida dadweynaha iyo ku dhawaaqidda natiijada aftida;<br>h) Ka garnaqidda iyo ka go'aan-gaarista khilaafyada ka dhexeeya hay'adaha dawladda federaalka ah oo la xiriira awoodahooda dastuuriga ah; iyo | Faqraddan oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad waxaa lagu sameeyay dib u siiqayn.<br><br>***Xarafka (a)*** waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo toosin, waxayna xeerinaysaa fasiraadda Dastuurka Federaalka, Dastuurrada Dawlad Goboleedyada iyo xeerarka kale ee dalka.<br><br>***Xarafka (b)*** waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo toosin, waxayna xeerinaysaa dhagaysiga iyo go'aan ka gaarista murannada u dhexeeya hay'adaha dawladda;<br><br>***Xarafka (c)*** waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo toosin, waxayna xeerinaysaa dib-u-eegista iyo go'aan ka gaarista waafaqsanaanta dastuuriga ah ee hindise xeereedka la soojeediyay<br><br>***Xafarka (d)*** waxaa lagu sameeyay toosin, waxaana lagu |

| | | |
|---|---|---|
| (f) In ay dhegesato, go'aana ka gaadho Marka la eego Qodobka 92aad oo la xidhiidha kiisaska denbiyada dastuur ee Madaxweynaha lagu soo oogo ee xil ka qaadista keeni kara. | i) Awoodaha kale ee ku xusan Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo xeerarka kale ee dalka. | xeeriyay go'aan ka gaaridda xadgudubyada xuquuqaha iyo xorriyadaha Dastuurka ee muwaaddinka;<br><br>***FG:*** Go'aan ka gaaridda khilaafaadka ka dhasha doorashooyinka waxa xeerka doorashooyinka ee 2024 uu siiyay maxakamadda Sare.<br><br>***Xarafka (e)*** waa mid cusub oo xeerinaysa Go'aan ka gaaridda dacwadaha la xiriira Dastuurka ee looga soo gudbiyey maxkamadaha kale;<br><br>***Xarafka (f)*** waa mid cusub oo xeerinaya Burinta xeerarka iyo go'aannada maamul ee aan waafaqsanayn shareecada Islaamka iyo Dastuurka;<br><br>***Xarafka (g)*** waa mid cusub oo xeerinaya hubinta ansaxnimada hannaanka wax-kabeddelka Dastuurka, aftida dadweynaha iyo ku dhawaaqidda natiijada aftida; |

| | | |
|---|---|---|
| | | ***Xarfka (b)*** ee soojeedinta oo asalka Dastuurka ahaa xarafka (e) waxaana laga tiray "iyo waajibaadka ay kala leeyihiin"<br>***Xarafka (i)*** waa mid cusub oo xeerinaysa awoodaha kale ee ku xusan Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo xeerarka kale ee dalka. |
| (2) Maxkamadda Dastuuriga ah ayaa go'aansan doonta taariikhda ay ka bilaabmi karto hirgelinta marka la gaadho laguna dhawaaqayo in uu sharci yahay wax kama jiraan.<br>(a) Haddii sharci loo arko mid aan dastuuri ahayn, marka laga reebo sida ku cad a faqradda (b) ee qaybtan, iyadoo xisaabtana lagu darsanayo saameynta ay ku leedahay taariikhda uu sharcigaasu noqonayo wax kama jiraan, dadka daneynaya arrinta iyo guud ahaan danaha bulshoba, waxay maxkamaddu go'aansan kartaa in sharcigaasi uu yahay waxba kama jiraan ilaa markii la sameeyay,ama taariikhda ka bilaabanta markii xukunku dhacay ama, si ay haboon tahay marka wax kama jiraanimada sharcigu bilaabmayo, taariikh mustaqbalka ah loo qabto.<br>(b) Haddii arrintu ku lug leedahay sharci dembiyeed, haddii in sharcigaa wax kama jiraankiis laga bilaabo markii la sameeyay, haddii arrintaasi u faa'iideyneyso qof lagu xukumay sharcigaa aan dastuuriga ahayni, waa in ay | (3) Maxkamadda Dastuurka ayaa awood u leh go'aan ka gaarista taariikhda ay ka billaabmi karto hirgelinta go'aanka burinta marka lagu dhawaaqayo in uu xeer yahay wax kama jiraan, iyadoo la tixgelinayo saameynta ay ku leedahay:<br>a) Taariikhda uu xeerkaasu noqonayo wax kama jiraan;<br>b) Dadka daneynaya;<br>c) Guud ahaan danaha bulsho; iyo<br>d) Danaha qofka xeerkaas lagu xukumay haddii uu yahay xeer dambiyeed. | Faqraddan oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad waxaa lagu sameeyay siiqayn, iyadoo loo qoray hab ka kooban sidii hore nuxurkiina aan waxba laga tagin. |

| | | |
|---|---|---|
| Maxkamadda Dastuurka waqtigaa isaga ah ka soo bilowdaa wax kama jiraanimadiisa. | | |
| | **Qodobka 136aad: Maxkamad Kore** | **Qodobka cusub.** Qodobkan waa mid cusub, oo xeerinaya Maxkamad Kore oo ay yeelanayaan Dawlad Goboleedyada. |
| | (1) Dawlad Goboleed kasta waxay yeelanaysaa Maxkamad Kore oo xarunteedu tahay caasimadda Dawlad Goboleedka, waana hay'adda garsoorka ugu sarraysa ee ka shaqeysa soohdimaha dawlad goboleedkaas. Awooddeedu waxay ku fidsantahay dhammaan deegaannada hoos yimaada Dawlad Goboleedka. | **Faqrad cusub:** Faqaraddan waxay tilmaamaysaa in dawlad golobeed kasta yeelanayo Maxkamad Kore oo xarunteedu tahay caasimadda dawlad goboleedka, waxayna noqonaysaa hay'adda garsoor ee ugu sarraysa dawlad goboleedkaas. |
| | (2) Maxkamadda Kore ee Dawlad Goboleedku waxay ikhtisaas u leedahay:<br>a) Ka garnaqidda iyo ka go'aangaarista cabashooyinka la xiriirta dacwadaha maamul ee dhanka ka ah hay'adaha Dawlad Goboleedka;<br>b) Dhegaysiga dacwadaha la xiiriira muranka awoodaha maxkamadaha kala duwan ee Dawlad Goboleedka ee aan hoos tagayn ikhtisaaska federaalka;<br>c) Ku dhawaaqista natiijada kama-dambaysta ah ee doorashooyinka Golaha Wakiillada iyo Hoggaamiyaha iyo kuxgieenkiisa ee Dawlad Goboleedka; | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysa ikhtisaaska Maxkamadaha Kore ee Dawlad Goboleedka. |

| | | |
|---|---|---|
| | d) Ka garnaqidda iyo ka go'aangaarista rafcaannada laga soo qaato xukunnada iyo go'aannada maxkamadaha derajada 1aad ee Dawlad Goboleedka ee khusaysa dacwadaha federaaliga ah.<br>e) Ka garnaqidda iyo ka go'aangaarista rafcaannada aan federaaliga ahayn ee laga soo qaato xukunnada iyo go'aannada maxkamadaha derajada 2aad ee Dawlad Goboleedka;<br>f) Go'aan ka gaaridda murannada xilalka iyo magacaabista ee xafiisyada dawladda ee heer-dowlad goboleed ee ku siman soodimaha Dawlad Goboleed kasta;<br>g) Fulinta awood kasta oo uu siiyo Dastuurka ama xeerarka Dawlad Goboleedka, haddii aanay awoodahaasi ka hor imaanayn Dastuurka Federaalka iyo xeerarka federaalka; iyo<br>h) Awoodaha kale ee Dastuurkan, ama xeer kale oo aan Dastuurka federaalka iyo xeer federaal ah ka hor-imanayn uu siiyo. | |
| | (3) Caasimaddu waxay yeelanaysaa Maxkamad Kore, Maxkamad Racfaan iyo Maxkamadaha darajada 1aad. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxaa lagu nidaamin doonaa garsoorka caasimadda qaabka uu noqonayo. |
| | **Qodobka 137aad: Maxkamadda Racfaanka ee Dawlad Goboleedka** | **Qodob cusub:** |
| | Maxkamadda Rafcaanka ee Dawlad Goboleedka waxa ay ka garnaqdaa, go'aanna ka gaartaa dhammaan | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa awoodda Maxkamadaha |

| | | |
|---|---|---|
| | rafcaannada aan federaaliga ahayn ee laga soo qaato Maxkamadda Derajada 1aad ee Dawlad Goboleedka. | Rafcaanka ee Dawlad Goboleedyada. |
| | **Qodobka 138aad: Maxkamadaha Darajada Kowaad** | **Qodob cusub:** |
| | Maxkamadaha Darajada Koowaad waxay leeyihiin ikhtisaas federaali ah iyo mid heer Dawlad Goboleed ah, waxayna ka garnaqaan, go'aanna ka gaaraan dhammaan noocyada dacwadaha labada heer ee aan Dastuurkan ama xeer kale maxkamad kale siin. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay ku dhisantahay heshiiskii siyaasadeed ee GWQ ee 2022, oo lagu qaatay nidaamka garsoorka isku dhafan, taas macnaheedu yihiin in Maxkmadaha Darajada Koowaad ay leeyihiin ikhtisaas federaali ah iyo mid heer dawlad goboleed ah. |
| | **Qodobka 139aad: Garsoorka Ciidammada** | **Qodob cusub:** |
| | Garsoorka Ciidammada waxaa lagu nidaaminayaa xeer gaar ah oo uu soo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo lagu qeexaya qaabdhismeedka iyo ikhtisaaskooda. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa in Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uu soo saarayo xeer gaar ah oo lagu nidaaminayo Garsoorka Ciidammada. |
| | **Qodobka 140aad: Habraaca Magacaabista Garsooreyaasha iyo Kaaliyeyaasha** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka waxaa lagu soo xulanayaa habka soo socda:<br>a) Golaha Sare ee Garsoorka wuxuu soojeedinayaa qof hufnaan iyo dhaqan suuban | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa habraaca lagu magacaabayo guddoomiyaasha Maxkamadda |

| | | |
|---|---|---|
| | leh, haystana ugu yaraan shahaado heerka labaad ee qaanuunka, leh waaya-aragnimo aan toban (10) sanno ka yarayn oo ah shaqo garsoore, xeer-ilaaliye, qareen ama bare sare ee sharci;<br>b) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa mid kasta ku ansixinayaa ama ku diidayaa qofka la soo magacaabay cod hal dheeri ah, kaddib soojeedinta Golaha Sare ee Garoorka;<br>c) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaaalka Soomaaliya ayaa digreeto ku meelmarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka, kaddib ansixinta Baarlamaanka Federaalka; waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda. | Sare iyo Maxkamadda Dastuurka. |
| | (2) Kaddib soojeedinta Golaha Sare ee Garsoorka, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu u magacaabayaa garsooreyaasha kale ee Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuurka, qof hufnaan iyo dhaqan suuban leh, kana haysta ugu yaraan shahaadada koowaad ee qaanuunka, leh waaya-aragnimo aan todobba (7) sanno ka yarayn oo ah shaqo garsoore, xeer-ilaaliye, qareen ama bare sare ee sharci. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa magacaabidda garsoorayaasha Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuurka. |
| | (3) Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Kore waxaa magacaabaya Hoggaamiyeha Dawlad Goboleedka, kaddib marka Golaha Sare Garsoorku soojeediyo, Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedkuna ansixiyo. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa habraaca loo marayo magacaabidda guddoomiyayaasha |

| | | |
|---|---|---|
| | | Maxkamadda Kore ee Dawlad Gololeedyada. |
| | (4) Dhammaan Garsooreyaasha kale iyo kaaliyayaasha waxaa magacaabayaa Golaha Sare ee Garsoorka, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Golaha Sare ee Garsoorka uu magacaayo garsooreyaasha kale. |
| | **Qodobka 141aad: Dhaarta Garsoorka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka waxaa lagu hor dhaarinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda, iyadoo ay goobjoog yihiin Guddoomiyeyaasha Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa habraaca lagu dhaarinayo Guddomiyayaasha Maxkamadda Sare, Maxkamadda Dastuuriga iyo cidda goobjoogga ka noqonaysa xilliga la dhaarinayo. |
| | (2) Garsooreyaasha Maxkamadda Sare, Garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurka iyo dhammaan Garsooreyaasha kale waxa lagu hor dhaarinayaa Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa dhammaan garsoorayaasha kale in lagu hor dhaarinayo Guddoomiyaha Garsoorka. |
| | (3) Guddoomiyeyaasha iyo garsooreyaasha Maxkamadaha Kore ee Dawlad Goboleedyada waxa lagu hor dhaarinaya Hoggaamiyaha Dawlad goboleedka iyadoo ay goobjoog yihiin Guddoomiyeyaasha Golaha Wakiillada. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa habraaca dhaarta garsoorayaasha Maxkamadaha Kore ee Dawlad Goboleedyada iyo cidda lagu hor dhaarinayo. |
| | (4) Saraakiisha Garsoorka ee ku xusan farqadaha 1aad, 2aad iyo 3aad ee qodobkan, inta aanay shaqada billaabin, waxa ay marayaan dhaartan: | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa dhaarta ay marayaan saraakiisha garsoorka |

| | | |
|---|---|---|
| | Aniga oo ah_________________________________, waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan si daacad ah u guto waajibaadkayga; dhawrana una hoggaansamo Dastuurka iyo xeerarka dalka; inaan u fuliyo xilkayga si madax-bannaan oo dhexdhexaad ah; go'aannadaydana ku gaaro si aan lahayn cabsi, eex, siyaaasad, nin-jeclaysi ama saamayn kale; iyo inaan ku shaqeeyo danaha caddaaladda iyo sarraynta sharciga oo keliya, ilaaliyana sharafta, hufnaanta iyo madaxbannaanida garsoorka dalka. | dhammaantood inta ayna hawlgelin. |
| | **Qodobka 142aad: Muddada Xil Haynta iyo Da'da Hawlgabka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Saraakiisaha Garsoorku waxa ay hawlgab iskood ah gali karaan xilliga ay gaaraan da'da 65 jirka, waxaana waajib ku ah in ay hawlgab noqdaan marka ay gaaraan da'da 70 jirka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa da'da saraakiisha garsoorku ku geli karaan hawlgabnimo. |
| | (2) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Garsooreyaasha Maxkamadda Sare Federaalka iyo Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Kore ee Dawlad Goboleedka iyo Caasimadda waxa ay hawlgabka galayaan marka ay gaaraan da'da 75 jirka, haddii aanay si iskood ah uga fariisan xilka si waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa xilliga hawlgabnimada ee Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Garsoorayaasha Maxkamadda Sare iyo Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Kore ee Dawlad Goboleedyada. |
| | (3) Muddada xil haynta Guddoomiyaha iyo Garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurku waa toddoba (7) sano oo hal mar la cusboonaysiin karo. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa muddada xilhaynta ee Guddoomiyaha iyo |

| | | |
|---|---|---|
| | | garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka. |
| | **Qodobka 143aad: Xilwaayidda Garsooraha** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Garsooruhu waxa uu xilkiisa ku waayi karaa sababahan oo keliya:<br>a) Geeri;<br>b) Gaarista da'da hawlgabka ee waajibka ah;<br>c) Xil gudushao la'aan joogta ah sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed oo uu caddeeyay dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsanyahay;<br>d) Aqbalidda xil kale oo dawladeed;<br>e) Istiqaalo qoraal ah uu u gudbiyo Golaha Sare ee Garsoorka;<br>f) Fal anshaxmarin uu go'aamiyo Golaha Sare ee Garsoorka si waafaqsan Dastuurka iyo Xeererka Jamhuuriaydda; ama<br>g) Arrin kasta oo kale lagu xuso Dastuurka ama xeerarka kale ee Jamhuuriyadda. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa xilwaayidda garsooraha. |
| | (2) Xil ka qaadista Garsooruhu waxa ay ka billaabmi kartaa Golaha Sare ee Garsoorka ama cabasho qof kale u soo gudbiyey Golaha. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa halka ay ka billaaban karto xil ka qaadista garsooraha. |
| | (3) Cabashada ka dhanka ah garsooraha oo loo gudbinayo Golaha Sare ee Garsoorka, waa in qaab qoraal ah lagu soo gudbiyaa, laguna caddeeyaa saldhigga xeer iyo xaqiiqda cabashada. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa in cabashada laga gudbinayo garsooraha ay noqoto mid qoraal ah oo xeer iyo xaqiiq ku qotonta. |

| | | |
|---|---|---|
| | (4) Qiimeyn kaddib, haddii Golaha Sare Garsoorku ku qanco in asbaabta cabashadu keeni karto xil ka qaadis, waxaa la raacayaa habraaca soo socda:<br>a) Haddii cabashadu khuseyso Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka waa in:<br>i. Goluhu ku oggolaadaa kuna ansixiyaa cabashada aqlabiyad saddex meelood labo (2/3) tirada Golaha;<br>ii. Goluhuna u gudbiyaan cabashada iyo go'aankooda Madaxweynaha muddo 15 maalmood gudahood ah;<br>iii. Madaxweynuhu shaqada ka joojinayaa guddoomiyaha muddo 15 maalmood ah oo ka billaabanta marka go'aanka goluhu soo gaaray, isagoo raacaya talada Golaha.<br>iv. Madaxweynuhuna magacaabaa guddi ka kooban Guddoomiyaha Aqalka Sare oo noqonaya Guddoomiye, afar (4) Garsoore oo kala socda Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuurka, qareen leh khibrad ugu yaraan toban sanno ah iyo hal qof oo aqoon durugsan u leh arrimaha maamulka, bulshadana sumcad fiican ku dhex leh.<br>b) Haddii cabashadu la xiriirta garsoore aan ahayn guddoomiyeyaasha lagu sheegay xarafka(a), faqradda 4aad ee qodobkan, Golaha Sare ee Garsoorka wuxuu qaadayaa tallaabooyinkan:<br>i. Shaqada ka joojinayaa garsooraha; iyo | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay faahfaahinaysaa habraaca cabashada ka dhanka ah saraakiisaha garsoorka iyada oo kala saaraysa marka cabashadu khusayso guddoomiyayaasha maxkamadaha iyo markii ay ku aaddan tahay garsoorayaasha kale. |

| | | |
|---|---|---|
| | ii. Magacaabayaa guddi ka kooban afar (4) Garsoore oo derajada Maxkamad Racfaan ugu hoosayso, hal qareen oo leh khibrad aan 10 sanno ka yarayn iyo labo xubnood oo aqoon durugsan u leh arrimaha maamulka, bulshada dhexdeedana sumcad fiican ku leh. | |
| | (5) Garsooraha shaqada laga joojiyey wuxuu helayaa xuquuqda uu xaqa u lahaa ilaa inta go'aan kama-damabys ah laga gaarayo. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay waajibinaysaa in garsooraha shaqo joojinta lagu sameeyay helayo xuquuqdiisa ilaa go'aan kamadambays ah laga gaarayo. |
| | (6) Guddigu waa in uu sida ugu dhakhso badan uguna macquulsan go'aan uga gaaraa, iyagoo raacayaa habraac ay dejisteen iyo xeerarka arrinta khuseeya. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in go'aanka daahid la'aan iyadoo la raacayo habraaca guddiga iyo xeerarka khuseeya arrrinka. |
| | (7) Madaxweynaha ama goluhu waxay ku go'aan qaadanayaan talada guddiga ayada ayeyna fulinayaan. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Madaxweynaha iyo goluhuba ay go'aankooda ku salaynayaan talada guddiga, talooyinkoodana hirgelinayaan. |
| | (8) Garsooraha go'aanka guddigu saameeyey wuxuu muddo 15 maalmood gudahood ah cabasho u qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Dalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in garsooraha go'aanka goluhu saameeyey in ay furan tahay |

| | | |
|---|---|---|
| | | rafcaan uu u qaadan karo Maxkamadda Sare ee Dalka. |
| | (9) Haddii garsooraha aanu racfaan qaadan, go'aanka Guddigu wuxuu dhaqan galayaa marka muddada racfaanka dhammaato. Haddii uu racfaan qaato, go'aanka ugu dambeeya wuxuu ku xiranyahay xukunka Maxkamadda Sare. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay sharraxaysaa marka uu dhaqangalayo go'aanka golaha. |
| | **Madaxa Seddexaad: Xeer-ilaalinta Guud** | **Madax cusub.** |
| | **Qodobka 144aad: Dhismaha Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Waxaa la dhisayaa xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay dhisaysaa Xaafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka. |
| | (2) Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranku wuxuu ka koobanyahay:<br>a) Xeer-ilaaliyaha Guud oo ah mas'uulka ugu sarreeya xafiiska, iyo Ku-xigeennada Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka; iyo<br>b) Xeer-ilaaliyaha Dawlad Goboleedka iyo Ku-xigeennada Xeer-ilaaliyaha Dawlad Goboleedka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay faahfaahinaysaa inta uu ka koobanyahay Xaafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee labada heer dawladeed. |
| | (3) Xarunta Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud waa caasimadda Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, wuxuuna xarumo shaqo ku yeelan karaa meeshii uu u arko Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka in ay u muhiim u tahay fulinta hawlaha xafiiska. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa xarunta Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo awoodda in uu xarumo shaqo ku yeelan karo meel kasta oo dalka ka mid ah. |

| | | |
|---|---|---|
| | **Qodobka 145aad: Magacaabista iyo Xil Ka Qaadsita Xubnaha Xafiiska Xeer-ilaalinta** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Habraaca magacaabista Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, xilwaayiddiisa iyo dhaartaba waa mid la mid ah habraaca Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Federaalka iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa habraaca magacaabista iyo xilwaayidda Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka. |
| | (2) Kuxigeennada Xeer-ilaaliyeha Guud waxaa loo marayaa magacaabistooda, xil kaqaadistooda iyo dhaartaba habraac la mid ah kan garsooreyaasha Maxkamadda Dastuurka iyo Maxkamadda Sare ee Federaalka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa in magacaabista, xil ka qaadista iyo dhaartaba in loo marayo habraac lamid ah kan garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka iyo Maxkamadda Sare ee Federaalka. |
| | (3) Xeer-ilaaliyayaasha Dawlad Gobooledyada iyo Kuxigeennadooda waxaa loo marayaa magacabistooda, dhaartooda iyo xilkaaqaadistoodaba habraac la mid ah garsooreyaasha Maxkamadda Kore ee Dawlad Goboleedka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxaa lagu nidaaminayaa habraaca loo marayo magacaabidda xeer-ilaaliyayaasha Dawlad Goboleedyada iyo kuxigeennadooda. |
| | **Qodobka 146aad: Madaxbannaanida Xafiiska Xeer-ilaalinta** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka oo qayb ka mid ah Garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, wuxuu u madaxbannaanyahay hawlaha maamul iyo maaliyadeed ee xafiiska. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa madaxbannaanida Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee hawlaha maamul iyo maaliyadeed. |

| | | |
|---|---|---|
| | (2) Xeer-ilaaliyuhu wuxuu u hoggaansamayaa oo keliya Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka marka uu gudanayo waajibaddkiisa, lamana farogelin karo xafiiska xeer-ilaalinta iyo saraakiishiisa marka ay gudanayaan xilkooda. | **Faqrad cusub:** Faqradddan waxay tilmaamaysaa in Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud madaxbannaanyahay oo uu u hoggaansmayo keliya Dastuurka iyo xeerarka dalka. |
| | **Qodobka 147aad: Xilka iyo Awoodaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud waxaa xil ka saaranyahay ilaalinta caddaaladda, ku dhaqanka xeerarka, difaacidda danaha shacabka iyo dawladda. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud mas'uuliyad ka saarantahay ilaalinta xeerarka iyo difaacidda xuquuqda shacabka. |
| | (2) Awoodaha xafiiska Xeer Ilaalinta Guud waxaa ka mid ah:<br>a) Ladagaallanka iyo ka hortagga dembiyada federaalka,<br>b) Inuu dhaqaajiyo isla markaana oogo dacwadaha ciqaabta ah;<br>c) Hoggaaminta baarista dambiyada federaaliga;<br>d) Inuu unko ama billaabo tallaabooyinka horgaynta eedaysanayaasha maxkamadaha hortooda;<br>e) Inuu qaato racfaannada dacwadaha laga xukumo markay ay ku jirto danta caddaaladda;<br>f) Inuu Maxkamadaha ku matalaa dadka taagta daran iyo carruurta agoonta ah; | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxaa lagu xeeriyay awoodaha xafiiska xeer-ilaaliyaha guud. |

| | | |
|---|---|---|
| | g) Inuu ku kormeeraa hay'adaha baarista iyo saraakiisha Booliska shaqadooda;<br>h) Inuu hago ama uu la wareego tallaabooyinka baariseed si waafaqsan danta guud;<br>i) Inuu hago iskuna xiro xafiisyada xeer-ilaalinta ee heerarka kala duwan ee dawladda; iyo<br>j) Inuu guto waajibaad kasta iyo hawl kasta oo ay farayaan Dastuurka iyo xeerarka dalka. | |
| | (3) Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxay mas'uuliyad gaar ah ka saarantahay:<br>(a) Daryeelka maxaabiista, agoonta iyo dadka aan isdifaaci karin sharciga hortiisa;<br>(b) Hubinta in eedda lagu gudbiyo muddada xeerku tilmaamay; iyo<br>(c) kormeeridda xabsiyada iyo goobaha sharci ee dadka lagu xiro ama lagu hayo. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxaa lagu xeeriyay mas'uuliyadda Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka. |
| | (4) Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxa uu soo saari karaa habraacyo iyo xeernidaamiyayaal lagu fududeenayo shaqada xafiiska. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa in Xeer-ilaaliyuhu soo saari karo xeer nidaamiyayaal. |
| | **Qodobka 148aad: Awoodaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Dawlad Goboleedka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Xafiiska Xeer-ilaalinta Dawlad Goboleedka waxa uu awood u leeyahay dacwad-oogista dhammaan dacwadaha ka dhasha xeerarka Dawlad Goboleedka oo keliya, waxaana awoodihiisa ka mid ah:<br>a) Inuu oogo dacwadaha ciqaabta ah ee heer dawlad goboleed; | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa awoodaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Dawlad goboleedyada. |

| | | |
|---|---|---|
| | b) Inuu billaabo tallaabooyinka horgaynta eedaysanayaasha maxkamadaha hortooda;<br>c) Inuu qaato racfaannada dacwadaha laga xukumo markay ay ku jirto danta caddaaladda;<br>d) Inuu maxkamadaha ku matalaa dadka taagta daran iyo carruurta agoonta ah;<br>e) Inuu ku kormeeraa hay'adaha baarista Dawlad Goboleedka iyo saraakiisha Booliska shaqadooda la xiriirta dambiyada Dawlad Goboleedka;<br>f) Inuu hago ama uu la wareego tallaabooyinka baariseed ee la xiriira xeerarka Dawlad Goboleedka si waafaqsan danta guud; iyo<br>g) Inuu guto waajibaad kasta iyo hawl kasta oo ay farayaan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyada Federaalka ama Dastuurka iyo xeerarka dawlad goboleedka. | |
| | (2) Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranku wuxuu u igman karaa xeer-ilaaliyaha Dawlad Goboleedka ama mid ka mid ah kuxigeennada Xeer-ilaaliyaha Dawlad Goboleedka oogista dacwadaha ciqaabta ee federaalka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa in Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka uu igman karo xeer-ilaaliyeyaasha dawlad goboleedka oogista dawadaha ciqaabta ee federaalka. |
| | **Madaxa Afaraad: Maamulka Garooorka** | **Madax cusub.** |
| | **Qodobka 149aad: Dhisidda Golaha Sare ee Garsoorka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Waxaa la dhisayaa Golaha Sare ee Garsoorka kaas oo xaqiijinaya madaxbannaanida garsoorka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay dhisaysaa Golaha Sare ee Garsoorka. |

| | | |
|---|---|---|
| | (2) Golaha Sare ee Garsoorka waa in uu ahaadaa mid maamul iyo maaliyad ahaan madaxbannaan. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa madaxabannaanida Golaha. |
| | **Qodobka 150aad: Xubnaha Golaha Sare ee Garsoorka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Golaha Sare ee Garsoorka wuxuu ka koobanyahay xubnaha soo socda:<br>(a) Guddomiyaha Maxkamadda Sare;<br>(b) Guddomiyaha Maxkamadda Dastuurka;<br>(c) Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka;<br>(d) Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Kore ee Dawlad Goboleedyada;<br>(e) Xeer-ilaaliyeyaasha Dawlad Goboleedyada;<br>(f) Qofka ugu sarreeya Maxkamadaha Caasimadda iyo Xeer-ilaaliyaha Caasimadda iyadoo loo eegayo hadba maqaamka ay yeelato caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>(g) Xubin ka tirsan Guddiga Xuquuqul Insaanka oo ay soojeedinayso wasaaradda ay khuseyso, si uu Golaha Wasiirada u ansixiyo;<br>(h) Saddex (3) Qareen Sare oo ka imaanaya Ururka Qareennada Soomaaliyeed, xilkana haynaya muddo shan (5) sano ah; iyo<br>(i) Saddex (3) xubnood oo ku xeel-dheer xeerarka oo haysta shahaado jaamacadeed oo qaanuunka ah, leh khibrad muddo aan ka yarayn toban (10) sano, xilkana haynaya muddo shan (5) sano ah. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa xubnaha Golaha Sare ee Garsoorka, waxayna ku dhisantahay heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran ee 2022 ee ku saasabnaa Federaalaynta Garsoorka. |
| | (2) Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Federaalka ayaa ah Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka, Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka ayaa ah | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa in Guddoomiyaha Maxkamadda |

| | | |
|---|---|---|
| | kuxigeenka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka. | Sare uu yahay Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka. |
| | (3) Si waafaqsan Dastuurka Federaalka iyo Xeerarka, Golaha Sare Garsoorka wuxuu samaysanayaa xeer hoosaad. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay xeerinaysaa in Goluhu yeelanayo xeer hoosaad ugaar ah oo aan ka hor imaanayn Dastuurka iyo Xeerarka Dalka. |
| | **Qodobka 151aad: Shuruudaha iyo Awoodaha Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka ahna Guddoomiyaha Maxkamadda Sare waa in uu buuxiyaa sharuudaha soo socda, waana in:<br>a) Uu yahay muwaaddin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo Muslim ah;<br>b) Labadiisa waalid ay yihiin muwaaddiniin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;<br>c) Da'adiisu aanay ka yarayn afartan sano (40);<br>d) Uusan qabin xaas ajnabi ah;<br>e) Aqoontiisa ay gaarsiisantahay shahaado qaanuun ee heerka labaad jaamacadda iyo waaya-aragnimo hoggaamineed oo aan ka yarayn 15 sano;<br>f) Lagu yaqaannaa dhaqan suubban bulshada dhexdeeda;<br>g) Dhimirkiisu dhanyahay, horayna aan dhakhtar la aqoonsanyahay si rasmi ah ugu caddayn xanuun dhimirka ah; iyo | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa shuruudaha Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka. |

| | | |
|---|---|---|
| | h) Aanu gelin faldambiyeed culus oo ay maxkamad madaxbannaan ugu xukuntay si kamadambays ah. | |
| | (2) Guddoomiyaha Golaha Sare Garsoorka waa mas'uulka ugu sarreeya garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka, waxaanu awood maamul iyo kor-joogteyn ku leeyahay dhammaan maxkamadaha iyo Xeer Ilaalinta dalka, wuxuuna soo saari karaa awaamiir iyo xeer-nidaamiyayaalka muhiim u ah maamulka iyo habsami u socodka caddaaladda. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay qeexaysaa awoodaha Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka |
| | **Qodobka 152aad: Waajibaadka Golaha Sare ee Garsoorka** | **Qodob cusub:** |
| | Golaha Sare ee Garsoorka wuxuu fulinayaa howlaha soo socda:<br>(a) Ilaalinta madaxbannaanida, dhex-dhexaadinimada, hufnaanta iyo horumarinta garsoorka;<br>(b) Soojeedinta magacaabista, xilkaqaadista, baddelidda, dallacsiinta, go'aan ka gaarista anshax marinta, xuquuqda, howlgabnimada iyo horumarinta xubnaha garsoorka;<br>(c) Tixgelinta cabashooyinka dadweynaha ayada oo la qaadayo tallaabooyinka ku habboon, si kor loogu qaado kalsoonida ay ku qabaan garsoorka;<br>(d) Nidaaminta habsami-u-socodka howlaha garsoorka, hagaajinta xaaladaha shaqada iyo daryeelka howlwadeennada garsoorka;<br>(e) Maareynta maamulka iyo maaliyadda garsoorka;<br>(f) Casriyaynta hab-maamulka hay'adaha garsoorka; | **Faqrad cusub:**<br>Faqradan waxay qeexaysaa waajibaadka Golaha Sare ee Garsoorka, waxaana laga soo qaatay heshiiska Hannaanka Federaalaynta Garsoorka ee 28 Diseembar 2022. |

| | | |
|---|---|---|
| | (g) La xisaabtanka, qiimeynta iyo korjoogteynta xilgudashada hay'adaha garsoorka ee dhammaan heerarka dawladda; iyo<br>(h) Waajibaadka kale ee ku xusan Dastuurka, Xeerarka kale ee Jamhuuriyadda iyo xeer hoosaadka Golaha Sare ee Garsoorka. | |
| | **Qodobka 153aad: Sanduuqa Garsoorka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Dastuurka waxa uu aasaasayaa Sanduuq Maaliyadeed oo loogu yeero Sanduuqa Garsoorka oo uu maamulayo Xoghayaha Guud ee Garsoorka, oo qayb ka ah miisaaniyadda Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddani waxay xeerinaysaa dhismaha sanduuqa garsoorka oo aad ugu muhiim ugu ah Garsoorka. Inta badan, dalalka caalamka waxay xaqiijiyaan madaxabannaanida garsoorka gaar ahaan maaliyaddiisa, sidaas darteed waxaa la dhisaa Sanduuq Garsoorka. |
| | (2) Sanduuqa waxa loo isticmaalayaa kharashaadka maamul ee garsoorka iyo arrimaha kale ee muhiimka u ah xilgudashada garsoorka. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay tilmaamaysaa in sanduuq loo adeegsanayo oo keliya kharashaadka maamul ee garsoorka. |
| | (3) Sannad maaliyadeed kasta, Xoghayaha Guud ee Garsoorka ayaa diyaarinaya miisaaniyadda Garsoorka una gudbinaya Baarlamaanka si uu u ansixiyo, kaddib marka Golaha Sare Garsoorku oggolaado. | **Faqrad cusub:**<br>Faqraddan waxay qeexaysaa diyaarinta miisaaniyadda Garsoorka iyo ugudbinta Goleyaasha Baarlamanka. |
| | (4) Miisaaniyadda Garsoorka markuu Baarlamaanku ansixiyo waxaa si toos ah loogu shubayaa Sanduuqa Garsoorka. | **Faqrad cusub:** |

| | | |
|---|---|---|
| | | Faqraddan waxay xeerinaysaa in Sanduuq Garsoorka lagu shubayaa qoondada garsoorka. |
| | (5) Xeer Baarlamaanku soo saaro ayaa lagu faahfaahinayaa maamulka Sanduuqa Garsoorka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysa in Xeer gaar ah lagu faahfaahinayo maamulka Sanduuq Garsoorka. |
| | **Qodobka 154aad: Fadhiyada Golaha Sare ee Garsoorka** | **Qodob cusub:** |
| | (1) Xubnaha Golaha sare ee Garsoorka waa in ugu yaraan saddexdii biloodba halmar shiraan. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysa in xubnaha Golaha Sare ee Garsoorka ay shirayaa 3 biloodba halmar. |
| | (2) Golaha waxaa iskugu yeeri kara oo keliya Guddoomiyaha Golaha, haddii u maqanyahayna waxaa iskugu yeeri kara Guddoomiye kuxigeenka. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay qeexaysaa in Guddoomiyhu uu shirka iskuhu yeeri karo, haddii u maqanyahayna waxaa isugu yeeri kara Guddoomiye kuxigeenka. |
| | (3) Guntanka fadhiyada Golaha waxa uu ku qabsoomayaa ugu yaraan aqlabiyad boqolkiiba konton iyo hal dheeri xubnaha Golaha. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay tilmaamaysa kooramka fadhiyada Golaha aqlabiyad boqolkiiba konton iyo hal dheeri xubnaha Golaha. |
| | (4) Shirarka Golahu wuxuu ku qabsoomi karaan xarunta guud ee Golaha, waxa uu sidoo kale ka dhici | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay qeexaysaa xarunta shirka Golaha. |

| | | |
|---|---|---|
| | karaan hadba meeshii uu Guddoomiyaha Goluhu u arko munaasab. | |
| | (5) Haddii si kale cutubkan iyo xeerarka dalku u qeexin, go'aannada Golaha waxaa lagu gaarayaa cod dheeri, haddii ay codadku barbardhac noqdaan, codka Guddoomiyaha ayaa kala saaraya. | **Faqrad cusub:** Faqraddan waxay xeerinaysaa coddaynta golaha iyo habka go'aanka lagu gaarayo. |

GMDHD

ICRIC